# DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBALAND EE SOOMAALIYA

WARBIXINTA HANTIDHOWRKA GUUD EE

KU SAABSAN BAYAANNADA

MAALIYADEED EE ISKU-DHAFAN EE

SANNADKII DHAMMAADEY 31-KA

DISEMBAR 2022

# Warqadda Faafinta

XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBALAND EE SOOMAALIYA

5-ta Oktobar, 2023

Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka

Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya, Kismaayo, Jubaland ,Soomaaliya

Mudane Guddoomiye

Iyada oo la raacayo qeybta 32(3) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (PFM) ee 2017 iyo qeybaha 30aad, 32aad iyo 33aad ee Xeerka Hantidhowrka/Baarista ee 2016 ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ), waxaan ku faraxsanahay in aan kuu soo gudbiyo warbixinteyda ku saabsan xisaabaha Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ee sannad maaliyadeedkii dhammaaday 31ka Disembar 2022 si loo horgeeyo Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

Mahadsanid,

Mudane Bashiir M Bahale
Hantidhowrka Guud ee
Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya

## Tusmada Buugga


**1. Erayada La Isku Gaabiyay .......... 3**

**2. Gogoldhig .......... 4**

**3. Nuxurka Warbixinta oo Kooban .......... 5**

*3.1 Doorka XHDG .......... 5*

*3.2 Ra'yiga Hantidhowraha Guud .......... 5*

*3.3 Waxyaabihii Lagu Ogaadey Baarista oo Kooban .......... 6*

*3.4 Gebaggebo .......... 8*

**4. Hordhac .......... 8**

*4.1 Waajibaadkeenna iyo Madax-bannaanideenna .......... 8*

*4.2 Horumarka Ilaa iyo Hadda La Gaarey .......... 9*

*4.3 Caqabadaha .......... 9*

*4.4 Qaddarin .......... 9*

**5. Waxyaabihii La Oggaaday oo Faahfaahsan – Baarista Sannad Maaliyadeedka (FY) 2022 .......... 10**

*5.1 Dakhliga .......... 10*

*5.2 Lacag-bixinnada .......... 10*

*5.3 Wax-soo-iibsiga .......... 10*

*5.6 Hantida aan muddo gaaban la caddeysan karin (Non-current assets) .......... 11*

*5.7 Bankiga iyo Kaashka .......... 11*

*5.8 Miisaaniyadda .......... 11*

*5.10 La-socoshada Soo-jeedimada Baaristii Sannad Maaliyadeedka (FY) 2021 .......... 12*

**Lifaaqa 1aad – Bayaannada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee La Baarey ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) Sannadkii Dhammaadey**
**31-ka Disembar 2022 iyo warbixinta hantidhowrka/baaraha ee la socda .......... 13**

**Lifaaqa 2aad – Warqadda Maamulka ee Kama-Dambeysta ah. Warbixinta Hantidhowraha ee Madax-banaan ee ku saabsan Baarista Dowlad-goboleedka Jubaland ee**
**Soomaaliya (DGJ) Sannadkii Dhammaadey 31-ka Disembar 2022. .......... 14**

## 1. Erayo La Isku Gaabiyay

| Erayga La Isku Gaabiyay | Ereyada oo Kaamil ah |
|---|---|
| CPO | Ballanqaadka Amarka Lacag-bixinta |
| CSC | Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah |
| DG | Agaasimaha Guud |
| EU | Midowga Yurub |
| FMIS | Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda |
| FY | Sannad Maaliyadeed |
| ICT | Tiknoolajiyadda War-isgaarsiinta iyo Macluumaadka |
| ID | Aqoonsi |
| IPSAS | Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda |
| ISSAI | Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare |
| IT | Tiknoolajiyadda Macluumaadka |
| DGJ | Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya |
| MOF | Wasaaradda Maaliyadda |
| NGO | Urur Aan Dowli Ahayn |
| XHDG | Xafiiska Hantidhowrka Guud |
| PFM | Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha |
| SFAS | Xoojinta Isla-Xisaabtanka Maaliyadeed ee Soomaaliya |
| RMS | Nidaamka Maareynta Dakhliga |
| SAI | Hay'adda Hantidhowrka Sare |
| TD | Agaasimaha Waaxda Khasnadda |
| TSA | Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda |
| UNDP | Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay |
| USD | Doolarka Mareykanka |

## 2. Gogoldhig

Sannado badan, oo uu mas'uul ka ahaa Hantidhowraha Guud, iyadoo taageero laga helayo saaxiibada deeq-bixiyeyaasha gaar ahaan taageerada Caawimaad Farsamo oo laga helay mashruuca Midowga Yurub ee EUs SFAS sannadkan, Xafiiska Hantidhowraha Guud (XHDG) ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) ayaa waxaa uu baaritaanno maaliyadeed iyo kuwa u hoggaansamidda shuruucda ah ku sameeyay xisaabaha dowladda ee DGJ. Meelaha u baahan in la sii wanaajiyo ayaa la sii aqoonsadey waxaanna la soo-jeediyay soo-jeedimo la-taaban karo oo ku saleysan waxyaabihii aan ku oggaaney baarista. Soo-jeedimadu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah warbixinnada baaritaankeenna. In la dhaqangeliyo waa muhiim si loo sii wanaajiyo oo loo dardargeliyo bixinta barnaamijyada iyo adeegyada kharash ahaanta taabogalka ah ee loogu talagalay dadka ku nool Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ).

Iyadoo qeyb ka ah shaqadeenna, ayaa waxaan xaqiijineynaa in aan dabagal ku sameyno soo-jeedimada lagu soo-jeediyay baaristii hore si kuwa ka mas'uulka ah ay u qaadaan tallaabo lagu dhaqangelinayo soo-jeedimadeenna.

Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHDG) ayaa si adag waxaa uga go'an in uu si fiican gacan uga geysto sidii looga gudbi lahaa caqabadaha hor yaalla hannaanka xakameynta iyo maareynta maaliyadaha ee aad iyo aadka looga taxaddaro. Waxaannu sii wadi doonnaa in aan sii joogno oo aan sii bixinno aragtiyo ku saabsan sababaha asalka ah ee keena nidaamyada kontaroolka gudaha oo daciif ah.

Waxaan sidoo kale dooneynaa in aan u mahadnaqno bah-wadaagta horumarinta, gaar ahaan kooxda EU-SFAS, oo sii wadey in ay xiiso u muujiso adkeynta kartida hawlgalka gudaha ee Xafiisyada Hantidhowrka Guud (XHDG) ee Dowlad-goboleedka Jubaland.

Waxaan si kal iyo laab ah ugu mahad-celinayaa dhammaan hawlwadeennada Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ-XHDG) oo si joogto ah ugu heelanaa waalijaabkooda iyo mas'uuliyadooda iyagoo ku jira duruufo adag.

# 3. Nuxurka Warbixinta oo Kooban

Nuxurkan warbixinta ee kooban wuxuu bixinayaa guudmarka waxyaabahii ugu muhiimsanaa ee lagu oggaadey warbixintan.

## 3.1 Doorka XHDG

Annaga oo ah Hay'adda Hantidhowrka Sare (SAI) ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ), waajibaadkeenna dastuuriga ah waa xaqiijinta in maaliyadaha dowladda si sharci ah oo taabogal ah loogu isticmaalo adeeg bixinta. Taa macnaheedu waa in aannu nahay hay'ad u madax-bannaan ilaalinta maaliyadaha dowladda iyo amniga dhaqaalaha ee Dowlad-goboleedka Jubaland sida lagu sheegay Qodobbada 88aad iyo 89aad ee Dastuurka Jubaland iyo Qeybta 7aad ee Xeerka Hantidhowrka DGJ ee 2016.

Waxaannu baarnaa oo aan ka warbixinnaa mas'uuliyada ay Dowladdu inoo igmatey ee naga saaran ilaalinta lacagaha la helay, ha ahaato mid laga helay canshuur-bixiyeyaasha, deeq-bixiyeyaasha ama meel kale, iyo kharashaadka la xiriira ee laga bixiyay maaliyadahan oo ah hab daahfuran, anshax iyo xirfadlenimo ku dheehan. Sidoo kale, waxaannu ka salgaarnaa xaqiiqda heerka hubaalka macquulka ah ee in lacagaha dadweynaha ay Dowladda u adeegsato, habka uu ansixiyey Baarlamaanka, iyadoo loo marayo baaritaanno xirfadeed madax-bannaan. Waxaannu daraaseynaa sida iyo haddii maaliyadahan ay si cad oo sax ah ay uga soo warbixisay Dowladda iyo sida loo adeegsado marka loo eego dhaqaalaha, hufnaanta iyo taabogalnimada. Waxaannu ku faafinaa warbixinta baaritaanka Faafinta Rasmiga ah waxaanna marka hore u geynaa Baarlamaanka ka-dibna muwaadiniinta u dhashey Dowlad-goboleedka Jubaland iyo daneeyayaasha kale annaga oo xaqiijinayna in ay hal bil gudaheeda ku helaan marka la dhammeeyo warbixinta hantidhowrka sida ku cad qeybta 32(3 iyo 4) ee Xeerka PFM ee 2017. Dhammaan warbixinnadeenna ayaa waxaa si guud loogu soo bandhigi doonnaa mareegtada XHDG.

Gaar ahaan, Qeybta 30(6) ee Xeerka Hantidhowrka ee 2016 ayaa uga baahan hantidhowraha Guud (AG) in uu warbixintiisa ku soo daro:

- ra'yigiisa dhabta ah ee miisaaman ee xisaabaadka dowladda ee isku-dhafan iyo kuwa kala-soocan;
- waxyaabihii la ogaaday ee mugga lahaa iyo soo-jeedimada;
- nusqaamaha lagu tilmaamay nidaamka kantaroolka gudaha;
- faahfaahinnada diiwaannada aasaasiga ah ee aan la joogteyn; iyo
- lacago kastoo la bixiyay iyada oo aan la eegin dhaqaalaha ama waxtarkooda.

## 3.2 Ra'yiga Hantidhowrka Guud

Waxaan baarey bayaannada maaliyadda isku-dhafan ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2022. Bayaannadan Maaliyadeed ayaa ka kooban Bayaanka Qabashada iyo Lacag-bixinta, Bayaanka Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyay iyo Tan Rumoowday, iyo qoraallada bayaannada maaliyadeed oo ay ku jiraan siyaasadaha xisaabaadka mugga leh ee kooban iyo macluumaadka kale ee sharraxaadda ah. Sannadkan, waxaan soosaarey fikrad ama ra'yi hantidhowr cillad leh (*qualified opinion*). Bayaannada Maaliyadeed waxaa loo arkey in intooda badani ay waafaqsan yihiin qodobbada Xeerka PFM ee 2017 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee (IPSAS) - Warbixinta Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan. Ra'yiga Hantidhowrka oo dhammeystiran (oo ay la socdaan Bayaannada Maaliyadeed) waxaa lagu soo bandhigey Lifaaqa 1aad.

Waa suuragal Bayaannada Maaliyadeed ee 2022, sida loo soo bandhigey, in aysan si caddaalad ku dhisan u bixinaynin hawlaha maaliyadeed ee dowladda oo ah seddax, meelood, oo muhiim ah.

(a) Qabashooyin aan la taageerin oo dhan $945,600. Ma awoodin in aan xaqiijinno haddii qabashooyinka loo shaaciyay si waafaqsan xeerarka xisaabaadka saxda ah.

(b) Lacag-bixinno guud ahaan dhan $2,737,150 ma lahayn wax caddeyn ah oo muujinaya in ay jiraan.

(c) Lacag-bixinno guud ahaan dhan $3,742,005 ma lahayn dokumentiyo taageeraya oo ku filan.

## 3.3 Waxyaabihii Lagu Ogaadey Baarista oo Kooban

**Kaash iyo banki**

Ka gaabinta maamulka in uu hirgeliyo oo uu u hoggaansamo shuruudaha xeer-hoosaadka bankiyada kuwaas oo ku waajibiya Wasaaradda Maaliyadda in ay qaybiso oo ay ka xaqiijiso dhammaan xisaabaha bankiga ee dowladda magaceeda ku furan dhammaan bankiyada sannadka dhammaadkiisa. Arrintan ayaa u baahan joogteynta ama gacan ku haynta diiwaanka bankiga iyo isku ururinta natiijada habraacyada raacidda xeer-hoosaadka.

**Qabashooyinka**

Nusqaamaha aasaasiga ah ee ururinta iyo diiwaangelinta dakhliyada ayaa la aqoonsadey. Nusqaamahan aasaasiga ah ayaa guud ahaan sabab u ah nidaamyada kantaroolka gudaha oo daciif ah oo saameeya dhammeystirnaanta, baadi-sooca iyo saxnaanta dakhliyada la ururiyay laguna sheegay Bayaannada Maaliyadeed.

Si kor loogu qaado ku kalsoonaanta macluumaadka lagu soo bandhigay bayaanka maaliyadeed ee ku saabsan qaddarada laga helay ilaha dakhliga ee kala duwan, nidaam kantaroolka gudaha ah adag oo xoogan waa in la diyaariyaa oo la hirgeliyaa. Kantarooladan ayaa sidoo kale gacan ka geysanaya hubinta in dowladdu ay qaado dhammaan lacagaha la filayo iyo in dhammaan lacagaha la ururiyey ee loo adeegsadey dan guud.

**Lacag-bixinnada**

Marka lacago la bixinayo, si kasta oo ay u yar tahay amaba u badan tahay, waxaa muhiim ah in la raaco hannaanka ku habboon ee ku xusan sharciyada iyo xeernidaamiyeyaasha khuseeya. Marka lacago la bixinayo, aad iyo aad ayay muhiim u tahay in caddeymo laga hayo tusaale ahaan dokumentiyada taageeraya sida: qaansheegyo, ogeysiisyada xawilaadaha bankiga, waraaqaha guddoonka alaabta, iyo qandaraasyada. Nasiib-darrose, qaar ka mid ah lacag-bixinnada dowladda ayaa la sii bixiyaa iyadoo aan jirin dokumentiyada noocaas ah (dokumentiyo kasta) ee taageeraya. Sida lagu muujiyay iyadoo lagu saleynayo faqradda ra'yiga baarista, lacag-bixinno guud ahaan dhan $2,737,150 ayaa la bixiyay iyadoo aan la helin dokumentiyo taageeraya iyadoo lacag-bixinno guud ahaan dhan $3,742,005 aaney lahayn dokumentiyo ku filan oo taageeraya. DGJ waa in ay ka haysaa dokumentiyo taageeraya dhammaan macaamulaadka maaliyadeed, waa in aan wax lacag-bixinno ah la sameyn iyadoo aan si habboon loo eegin caddeymaha taageeraya qaddarka iyo dabciga macaamulaadka sababaya.

**Wax-soo-iibsiga**

Baaritaanadii ugu dambeeyay ma lahayn wax horumar ah oo muuqda oo laga sameeyay hannaanka wax-soo-iibsiga ee dowlad-goboleedka. Gaar ahaan, waxaa guud ahaan lagu guuldareystay in la raaco tilmaamaha wax-soo-iibsiga. Tusaalooyinka xeer-jebinta waxaa ka mid ahaa balse aan ku xaddidnayn;

- la'aanta tartan lagu xulanayo kuwa laga soo iibsado alaabooyinka iyo adeegyada; iyo
- in si xad-dhaaf ah loogu tiirsan yahay hal-meel oo laga helo kaliya iyada oo aan loo yeelin sabab.

DGJ waa in ay raacdaa tilmaamaha wax-soo-iibsiga si ay uga fogaato u hoggaansamid la'aanta Xeerka PFM ee 2017 iyo si loo yareeyo halisaha mugga leh ee khiyaannada iyo xatooyada iyadoo la hubinayo in qiimaha ugu badan ee lacagta lagu gaaro kheyraadyada iyo dhaqaalaha dowlad-goboleedka ee xaddidan.

**Hantida**

Aad iyo aad ayay muhiim u tahay in la ilaaliyo hantida dowladda iyo in la raaco habraacyada iyo siyaasadda hantida. Waxaan oggaanay in dowladda aysan joogteyn ama gacanta ku hayn diiwaanka hantida ma guurtada ah, hantida lama calaamadin mana jirin nidaamka maareynta hantida. Tani ayaa ka dhigeysa mid aan suuragal ahayn in la raadraaco, lala socdo oo la sameeyo hawl lagu xaqiijinayo, joogto ah oo itus oo itaabsii ah. La'aanta kantaroollada aasaasiga ee noocaas ah ee ku saabsan maareynta hantida dowladda, waxaa jirta halis aad u badan oo ah in hantida dowladda lagu takrifalo ama in si khaldan loo adeegsado.

**Miisaaniyad**

Miisaaniyaddu waa laf-dhabarta dhammaan hawlaha dowlad-goboleedda. Miisaaniyadda sannad maaliyadeedkii 2022 la xaqiijiyay waxay ahayd $37.5 milyan marka loo eego miisaaniyadda asalka oo $53.3 milyan ahayd. Boqolkiiba soddon ee miisaaniyadda 2022 ee dowlad-goboleedka lama xaqiijin. Miisaaniyadda dowladda waa in loo diyaariyaa hab aad macquul u ah. Haddii aanan la gaari karin bartilmaameedyada dakhliga miisaaniyad dheeraad ah waa in la diyaariyaa.

**La-socoshada Soo-jeedimadii Baaristii Sannadkii Hore**

Intii lagu guda jiray baarista waxaannu dabagal ku sameynay dhammaan soo-jeedimadii baarista ee la soo-jeediyay sannadadii hore. Xaaladda hadda ee soo-jeedimadan oo kooban ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

| Xaaladda | Tirada Soo-jeedimadii Sannadkii Hore |
|---|---|
| La Hirgeliyay | 2 |
| Qayb Ahaan La Hirgeliyay | 5 |
| Aan La Hirgelin | 11 |
| **WADARTA GUUD** | 18 |

Sidii sannadahii hore, horumarka laga gaarey hirgelinta soo-jeedimada hantidhowrka ayaa ahaa mid aad u yar. Waa muhiim in horumarkan uu horey u sii socdo. Si ujeedkan loo gaaro, Wasaaradda Maaliyadda (MoF) waa in ay hirgelisaa hab rasmi ah oo lagu qaadayo tallaabooyin lagu saxayo oo habboon.

### 3.4 Gebaggebo

Kantaroollada ka jira DGJ si weyn uma sii hagaagin sannadihii la soo dhaafay. Meelaha ugu waaweyn ee uu walaacu ka taagan yahay waa dhammeystirnaanta dakhliga, ku takrifalka maaliyadaha, lacag-bixinnada kaashka ah ee badan iyo in aannu jirin diiwaanka hantida ma guurtada ah. Inta badan meelahan dowladdu waxay leedahay qaab guud sharci ah oo faahfaahsan; haseyeeshee, inta badan shuruudahan sharciga ah lama raaco. Waxaa loo baahan yahay in si joogto ah loo korjoogteeyo u hoggaansamidda habraacyadan kantaroolka ee aasaasiga ah ee leh cawaaqib-xumo ka dhallan karta sharci-jebinta soo noqnoqota. Kantaroollada gudaha ee ururinta iyo diiwaangelinta dakhliga lama hirgalin iyadoo lacag-bixinnada iyo qabashooyinkana aanan si buuxda loo taageerin. Arrimahan waxaa ay keenaan in shaki weyn laga muujiyo waxyaabaha lagu sheegay bayaannada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah. Sidaa daraadeed, Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHDG) ayaa wuxuu bixiyey ra'yi hantidhowr qeexaya in bayaannada maaliyadeed loo soo bandhigay si caddaalad ah, marka laga reebo arrimo cayiman.

## 4. Hordhac

Kalsoonida ay muwaadiniinta ku qabaan hay'adaha dowliga ah ayaa dib loo soo celin karaa iyadoo loo adeegsanayo kheyraadka aan badneyn siyaabo lagu kordhinayo qiimaha-lacagta iyo bixinta natiijooyin tayo leh. Si loo fuliyo doorkan, muwaadiniinta ayaa sidoo kale u baahan caddeymo la isku halleyn karo oo ku saabsan sharciyada iyo barnaamijyada shaqeeya iyo kuwa aan shaqeyn. Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHDG) oo ah hantidhowraha dibedda ee waaxaha dowladda, ayaa wuxuu qabtaa shaqo muhiim ah oo lagu taageerayo doorarka kuwa loo igmaday maamulka hay'adaha waaxda dowladda iyo daneeyeyaasha kale marka loo eego la-socodka, fahamka iyo aragtida dheer.

### 4.1 Waajibaadkeenna iyo Madax-bannaanideenna

Qaybta 28(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016 ayaa wuxuu koobayaa mas'uuliyadda xafiiska hantidhowrka guud (XHDG) uu ka saaran yahay in uu baaritaan ku sameeyo xisaabaadka dhammaan hay'adaha guud ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ). Iyada oo la raacayo qodobbada Qaybta 32(3) ee Xeerka PFM ee 2017 iyo qaybta 30(4) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016, Hantidhowraha Guud waa in uu u soo gudbiyaa warbixinta Baarista Sanadlaha ah Baarlamaanka afar bilood gudahooda ka-dib marka uu Bayaannada Maaliyadeed ka helo Wasiirka Maaliyadda. Guddoomiyaha Barlamaanka waa in uu ku horgeeyo dhammaan warbixinnada hantidhowrka Golaha Shacabka ee Dowlad-goboleedka shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ka-dib marka uu helo warbixinta sida ku cad qaybta 33(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016.

Madax-bannaanida Hantidhowraha Guud waa sifada aasaasiga ah ee ay leedahay Hay'adda Hantidhowrka Sare (SAI) oo si fiican u shaqeynaysa oo u hawlgaleysa si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare (International Standards of Supreme Audit Institutions (ISSAIs). Qaybaha 88aad iyo 89aad ee Dastuurka Jubaland wuxuu dhigayaa in XHDG uu yahay hay'ad madax-bannaan shaqadiisa ugu weynna ay tahay in uu noqdo hantidhowraha dibedda ee Dowlad-goboleedda. Intaa waxaa dheer, Qaybta 7(1) ee Sharciga Hantidhowrka ee 2016 ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya in ay si gaar ah ula xiriirto Hantidhowraha-Guud in uu u madax-bannaan yahay gudashada mas'uuliyadiiisa.

## 4.2 Horumarka Ilaa iyo Hadda La Gaarey

Horumar ayaa waxaa laga gaarey dhisidda kartida shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud (XHDG) sannadahii 2020 iyo 2021. Xawaaraha ay ku socotay karti ku biirrinta ayaa hoos u dhac ku yimid iyadoo ay sabab u tahay gaabis ku yimid taageerada deeq-bixiyeyaasha sannadahii 2022 iyo 2023. In kastoo ay dib u dhacyadan jiraan haddana xafiiska wuxuu awooday in uu soosaaro warbixinta sannadlaha ah ee XHDG ee 2022 iyadoo taageero laga helayo la-taliyaha SPFAS.

## 4.3 Caqabadaha

DGJ XHDG ayaa isku-dayaya in uu helo hawlwadeenno hantidhowrka u sameeyo oo xirfadoodu aad u sarreyso kuwaas oo gudan kara waajibaadka sharci ee xafiiska iyagoo haysta taageero yar. Si shuruudan loo buuxiyo, kheyraadyada ku habboon waa in la bixiyaa si loo haqabtiro baahiyada tababarka iyo hawlgalka ee xafiiska. Gaabiskan ku yimid taageerada deeq-bixiyayaasha ayaa saameyn xun ku yeeshay dhammaan hawlahii xafiiska ka socday. Kor u qaadista xirfadaha shaqaalaha xafiiska hantidhowka guud (XHDG) ayaa la dhimay waxaanna joogsaday hawlo badan oo xafiiska u qorsheysnaa. Sidaa daraaddeed warbixintii baaritaannada 2022 ayaa sidoo kale dib u dhac ku yimid.

Waxaannu aaminsannahay in aqoonsashada arrimaha baarista ee jira iyo dowladda in la siiyo soo-jeedimo in ay tahay tallaabada ugu horreysa oo keliya. Shaqada dhabta ahi ayaa bilaabata marka kuwa mas'uuliyadaha haya, ay qaadaan tallaabo lagu dhaqangelinayo talooyinkii aynu soo-jeedinay. Sababtan daraadeed ayaa waxaa jira qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadeenna oo ah in aannu dabagalno ama la-soconno soo-jeedimadii lagu sameeyay baaritaannadii hore, si loo qiimeeyo horumarka laga gaarey tallaabooyinkii aynu horey u soo-jeedinay. Markaa ka-dib waxaa Baarlamaanka, iyo daneeyayaasha kale looga fadhiyaa in ay gacan ka geystaan hubinta in dowladdu ay qaaddo tallaabo ku filan oo wax looga qabanayo arrimaha baarista ee la tilmaamay.

## 4.4 Mahadnaq

Xafiiska XHDG wuxuu fursaddan ugu faa'iideysanayaa in uu ugu mahadnaqo shaqaalaheenna sida ay ugu heellanaayeen shaqadooda, bah-wadaagta iyo shaqaalaha uu ka mid yahay la-taliyaheenna TA kuwaas oo waxyaabihii ay ku biirriyeen u suurageliyay in xafiiska XHDG uu sii wado joogteynta xirfadlenimadiisa.

Ugu dambeyn, waxaan u mahad-celineynaa Baarlamaanka, Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, kuwaas oo si uun gacan uga geystay shaqada xafiiska hantidhowrka guud (XHDG). Waxaa sharaf weyn inoo ah in aan soo bandhigno Warbixinta Sannadlaha ah ee Hantidhowrka-Guud ee 2022.

# 5. Waxyaabihii La Oggaaday oo Faahfaahsan – Baarista Sannad Maaliyadeedka (FY) 2022

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan waxyaabihii la oggaadey ayaa laga heli karaa Lifaaqa 2aad ee warbixintan

## 5.1 Dakhliga

Waxyaabo ay ka mid yihiin liidashooyinkan soo socda ayaa la arkay oo ku saabsan ururinta, diiwaangelinta iyo ka warbixinta dakhliyada; Macaamulaad kala duwan oo tijaabin loo xushay oo dhan $902,700 ayaa waxaan lagu taageerin nuqullada rasiidyada asalka ah oo ay ahayd in canshuur bixiyaasha rasiid ahaan loo siiyo taas oo markaasi shaki-gelinaysa kala-soocidooda saxda ah iyo in lagu soo bandhigo bayaanka maaliyadeed. Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS) lama wada adeegsan maadaama uusan diiwaangelin dhammaan dakhliyada ay dowladdu canshuurta saartey, nidaamka RMS sidoo kale lama dhexgalin Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda (FMIS) taas oo keentay kala duwanaansho su'aal gelinaysa ku kalsoonaanta dakhliyada la diiwaangeliyay, ururinta iyo diiwaangelinta dkahliyada ka soo xarooda dekedda waa mid gacanta lagu sameeyo taas oo u banaan wax-isdabamarin iyo xatooyo, dakhli ururinta dekedda sidoo kale laguma taageero dokumentiyo hadba sida loo hor diiwaangeliyay iskugu xigxiga oo caqligal ah. Daldaloollada ka jira xarunta dakhli ururinta waxaa ka mid ah is-waafajin la'aan u dhaxeysa buugaagta rasiidka asalka ah iyo lacagaha la ururiyay ee bankiyada lagu shubay iyo sidoo kale nidaam-darro iyo galaynta diiwaannada oo liidata.

**Dhammaan macaamulaadka dakhliga waa in lagu taageeraa dokumentiyada asalka ee muhiimka ah, nidaamka RMS waa in la dhexgeliyaa nidaamka FMIS si loo joogteeyo ama loo ilaaliyo daacadnimada ku dheehan xogta loo isticmaalay diyaarinta bayaanka maaliyadeed. Nidaamka RMS waa in sidoo kale la sii wanaajiyaa si loogu diiwaangeliyo dhammaan dakhliga dowladda waqtiga la joogo. Dakhli ururinta oo dhan waa in laga dhigaa mid otomaatik ah iyadoo la wanaajinayo iswaafajinnada si loo hubiyo in dhammaan dakhliyada la ururiyo, la diiwaangeliyo oo loo xisaabiyo hab daahfuran.**

## 5.2 Lacag-bixinnada

Lacag-bixinno guud ahaan dhan $6,479,155 ayaan gebi ahaanba la taageerin ama si ku filan looma taageerin. Qaar ka mid ah lacag-bixinnadan ma lahayn dokumentiyo taageeraya oo aasaasi ah sida qaan-sheegyo, fawjarro la ansaxiyey waxaanna badankooda lagu taageeray keliya warqad gudaha ka soo baxdey kana timid Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda. Halka qaar kale aysanba lahayn cadeymaha dokumentiyada alaabooyin la keenay ama adeegyo la bixiyay sida warqadda guddoonka alaabta, xaashida diiwaanka gaadiidka, xaashida waqtiga ama warqadaha lagu caddeeyo shaqo la dhammeeyay.

**Si kor loogu qaado u hoggaansamidda xeerka PFM iyo xeer-nidaamiyeyaasha waaxda khasnadda, dokumentiyo taageeraya oo ku habboon waa in laga hayaa dhammaan lacag-bixinnada. Waa in aan wax lacag ah la bixin iyadoon lahayn dokumentiyo ku filan oo taageeraya.**

## 5.3 Wax-soo-iibsiga

Intii lagu guda jiray dib-u-eegistii wax-soo-iibsiga, waxaannu oggaaney in ay jireen liidashooyinkan soo socda.

- Xaalado kuwa laga soo iibsado alaabooyinka iyo adeegyada la shaqaaleeyay iyadoon la soo marsiin hannaanka wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo oo ka hor-imaanaysa sharciyada iyo xeer-hoosaadyada jira iyadoon la qiimeyn qiimaha lacagta.
- Haddii aannu jirin sababo loogu baahanayo wax-soo-iibsiga halka meel laga helo sida ku cad Qeybta 4.25.4 ee Buugga Wax-soo-iibsiga.

***Hubso in hannaanka wax-soo-iibsiga lagu tartamo in si buuxda loo dhaqangeliyay si qiimaha lacagta loo gaarsiiyo heerka ugu sarreeya ee loogu talagalay kharashaadka dowladda. Sababta keenta in hal meel laga helo waa in ay ahaataa mid yar oo keliya loo adeegsado wax-soo-iibsiga xaaladaha degdegga ah ee halka mar la sameeyo.***

## 5.6 Hantida aan muddo gaaban la caddeysan karin (Non-current assets)

Waxaannu oggaaney nusqaamahan soo socda in ay ka jiraan maareynta hantida dowladda:

- Ma jiro diiwaan dhexe oo ku diiwaangashan hantida ma guurtada ah oo uu hayo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda taas oo ka hor-imaanaysa shuruudaha xeer-hoosaadka maareynta hantida.
- Hantida ma guurtada ah lama calaamadin (laguma dhejinin calaamad aan ka go'in) taas oo adkaynaysa in la raadraaco.
- Ma jirin habraacyo loogu talagalay xaqiijinta hantida ee muddo ka dibba mar la sameeyo taas oo keenaysa hay'adaha in ay halis u galaan xatooyo iyo ku takrifal.

***Diiwaanka hantida waa in la diyaariyaa oo la cusboonaysiiyaa si loogu daro dhammaan hantida dowladda labadaba hantida ma guurtada ah iyo tan guurtada ah.***

## 5.7 Bankiga iyo Kaashka

Waxaan oggaanay in aan loo hoggaamsanin habraacyada sannadka dhammaadkiisa la sameeyo ee u baahan xaqiijinta iyo falanqeynta dhammaan xisaabaha bankiga ee ku qoran magaca dowladda ee loogu talagalay ujeeddooyinka korjoogteynta dhow.

***Xaqiijinta xisaabaha bankiga ee la sammeeyo sannadka dhammaadkiisa iyo cusboonaysiinta diiwaanka bankiga waa in loo hoggaansamaa.***

## 5.8 Miisaaniyad

Si ka hor-imaaneysa qaybaha 10aad iyo 12aad ee Xeerka PFM, qiyaasaha miisaaniyadda Sannad Maaliyadeedka 2022 ee loogu talagalay dakhliga iyo kharashaadkaba waxaa la baal-marey 30%. Tani waxay shaki gelinaysaa ku-tiirsanaanta iyo macquulnimada xaddidaadaha lagu adeegsadey hannaanka miisaaniyad diyaarinta.

Waxaa intaa dheer, in aan oggaaney in sanduuqa ku-talagalka ah 5% sida lagu qeexay Qeybta 14aad ee PFM in aanan laga dhabbeyn waxaanna lagu dejiyay saadaasha miisaaniyadda.

***Miisaaniyad sannadeedda waa in lagu sameeyo dib-u-eegis, wax kastoo ka badan ama ka hooseeya saadaasha waxqabadka maaliyadeedna waa in wax looga beddelaa dib-u-eegista dheeraadka ah ee bisha Luulyo.***

***5% ee miisaaniyadda waa in ku-talagal ahaan loo dejiyaa, hawlo kasta oo ku-talagal ahna waa in laga maalgeliyaa keydkan. Ku-talagalladana waa in aanan laga bixin qeybaha kale ee la ansaxiyey ee miisaaniyadda.***

## 5.10 La-socoshada Soo-jeedimada Baaristii Sannad Maaliyadeedka (FY) 2021

Intii lagu guda jiray baarista, waxaannu dabagal ku sameynay dhammaan soo-jeedimadii baarista ee la soo-jeediyay sannadadii hore waxaanna oggaaney in, marka la eego 18kii soo-jeedimo ee uu soo-jeediyay Xafiiska Hantidhowrka Guud (AOG) in 2 soo-jeedin oo keliya la fuliyay.

***Nidaam rasmi ah waa in la dhaqangeliyaa si loo xaqiijiyo in uu jiro qorshe habboon oo lagu hubinayo in soo-jeedimadan loo hirgeliyo sidii la qorsheeyay iyo in horumarku uu la socdo Maamulka Sare ee Wasaaradda Maaliyadda (MoF).***

# Lifaaqa 1aad – Bayaannada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee La Baarey ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar 2022 iyo warbixinta hantidhowraha ee la socota

# Lifaaqa 2aad– Warqadda Maamulka ee Kama-Dambeysta ah. Warbixinta Hantidhowrka Madaxa-Bannaan Ee Ku Saabsan Baaritaanka Dowlad-Goboleedka Jubaland Ee Soomaaliya (DGJ) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Dismebar 2022.

# DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBALAND EE SOOMAALIYA (DGJ)

# WARBIXINTA HANTIDHOWRKA GUUD EE KU SAABSAN BAYAANNADA MAALIYEED EE ISKU-DHAFAN EE SANNADKII DHAMMAADEY 31KA DISEMBAR 2022

## TUSMADA

**1.0 BAYAANKA MAS'UULIYADDA EE WASAARADDA MAALIYADDA....................................... 2**

**2.0 WARBIXINTA HANTIDHOWRKA MADAX-BANNAAN EE KU SAABSAN BAYAANNADA MAALIYADEED EE ISKUDHAFAN EE SANNADKII DHAMMAADEY 31-KA DISEMBAR 2022........................................................................................................................ 3**

Lifaaqa 1aad: Bayaannada Maaliyadeed ee Wasaaradaha iyo Tan Isku-dhafan ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2022 ................................................ 5

## 1.0 BAYAANKA MAS'UULIYADDA EE WASAARADDA MAALIYADDA

Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka / Dadweynaha (PFM) ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya wuxuu Wasaaradda Maaliyadda uga baahan yahay in ay diyaariso Bayaanka Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinnada ee sannad maaliyadeed kasta kaas oo aragti iyo sawir dhab ah oo miisaaman ka bixinaya halka ay dhaqaale ahaan taagan tahay Dowlad-goboleedka dhammaadka sannad maaliyadeedka iyo wixii saa'id ama naaqis ku ah sannadkaasi. Wuxuu sidoo kale doonayaa Dowladda in ay xaqiijiso in Dowladda ay joogteyso diiwaannada xisaabaadka habboon oo ku filan in ay muujiyaan oo ay sharxaan macaamulaadka Dowladda iyo in ay si sax ah oo macquul ah, u shaaciso xaaladda maaliyadeed ee Dowladda. Dowladda ayaa sidoo kale ka mas'uul ah ilaalinta hantida Dowladda iyo in ay qaado tallaabooyin macquul ah oo loogaga hortagayo laguna oggaanayo khiyaannada iyo wax isdabamarinnada kale.

Maamulka wuxuu oggol yahay mas'uuliyadda diyaarinta iyo in uu u soo bandhigo Bayaannadan Maaliyadeed si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno *International Public Sector Accounting Standards* iyo habka uu u baahan yahay Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya. Maamulka ayaa sidoo kale oggol mas'uuliyadda:

i) Nakh-shadeynta, hirgelinta iyo joogteynta kantaroolka gudaha ee ku habboon diyaarinta iyo in si wanaagsan loo soo bandhigo Bayaannada Maaliyadeed ee Iskudhafka ah.

ii) Xulashada iyo adeegsiga siyaasadaha xisaabaha ee habboon; iyo

iii) Sameynta qiyaasaha xisaabaadka iyo go'aamada macquulka ah ee ku saleysan xaaladaha.

Marka uu qiimeeyo awoodda ay Dowladda u leedahay in ay sii jirto/sii hawlgasho, Maamulka kama warqabo wax hubsasho la'aan ah oo la taaban karo oo la xiriira dhacdooyinka ama xaaladaha shakiga gelin kara awoodda ay Dowladda u leedahay in ay sii jirto/hawlaheeda sii wadato.

Maamulka wuxuu qirayaa baarista madax-bannaan ee Bayaannada Maaliyadeed ee Iskudhafan in aysan ka xayuubinaynin mas'uuliyadahooda

Waxaa ansaxisay DGJ markay ahayd 24, September 2023.

**Axmed Cabdirisaaq Maxamed ( Handal)**….

Wasiirka Maaliyadda iyo harmarinta

dhaqaalaha Dowladda Jubaland

**Signature**

…………

**Saxiixa**

## 2.0 WARBIXINTA HANTIDHOWRKA MADAX-BANNAAN EE KU SAABSAN BAYAANNADA MAALIYADEED EE ISKUDHAFAN EE SANNADKII DHAMMAADEY 31-KA DISEMBAR 2022

### Ra'yiga Wax-laga-beddelay

Ra'yigeyga, marka laga reebo saameynta ay leeyihiin arrimaha lagu sharxay qaybta warbixintayda ee Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga Ku Jira Fikradda Cilladda Leh (Qualified Opinion), bayaannada maaliyadeed ee la socda waxay si caddaalad ah u soo bandhigayaan halka ay dhaqaale ahaan taagneyd Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya sannadkii dhammaaday 31-ka Disembar, 2022, iyo waxqabadkeeda maaliyadeed ee sannadkii dhammaadey iyadoo la raacayo Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) ee 2017 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno *International Public Sector Accounting Standard* (IPSAS) - Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan.

Waxaannu baarney Bayaannada Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya oo ay ku jiraan Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta, Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyay iyo Tan Rumoowday ee sannadkii dhammaadey 31ka Disembar 2022 iyo Qoraallada Bayaannada Maaliyadeed ee uu ku jiro nuxurka kooban ee siyaasadaha xisaabaadka muhiimka ah.

### Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra'yiga Wax-laga-beddelay

Waxaan aqoonsaney khaladaadkan la taaban karo ee soo socda intii ay socotey baarista loo sameeyay si waafaqsan jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare (ISSAI):

- Qabashooyin aan la taageerin oo dhan $945,600. Ma awoodin in aan xaqiijinno haddii qabashooyinkan loo shaaciyay si waafaqsan xeerarka xisaabaadka saxda ah.
- Lacag-bixinno guud ahaan dhan $2,737,150 ma lahayn wax caddeyn ah oo muujinaya in ay jiraan.
- Lacag-bixinno guud ahaan dhan $3,742,005 ma lahayn dokumentiyo taageeraya oo ku filan.

Waxaan baaristeyda u sameeyay si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Sare ee loo yaqaanno *International Standards for Supreme Audit Institutions* (ISSAI). Mas'uuliyadaheyga ee waafaqsan jaangooyadaasi ayaa si faahfaahsan loogu sharxay Mas'uuliyadaha Hantidhowrka ee Baarista qaybta Bayaannada Maaliyadeed ee Warbixinteyda.
Waxaan ka madax-bannaanahay hay'adda iyadoo la raacayo Xeer-Anshaxeedka Hay'adaha Hantidhowrka Sare iyo shuruudaha anshaxa ee u habboon baaristeyda bayaannada maaliyadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaanna mas'uuliyadaheyga kale ee anshaxa uga soo baxay si waafaqsan shuruudahan iyo Xeer-Anshaxeedka. Waxaan aaminsanahay caddeymaha aan baarista ku helnay in ay ku filan yihiin kuna habboon yihiin bixinta waxyaabaha lagu saleeyey ra'yigeyga.

### Macluumaad kale

Wasaaradda Maaliyadda ayaa ka mas'uul ah macluumaadka kale. Macluumaadka kale ayaa ka kooban macluumaadka ku jira Warbixin Sannadeeda laakiinse kuma jirto Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta iyo warbixinteenna hantidhowrka ee raacsan.
Ra'yigeenna ku saabsan Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta kama hadlayo macluumaad kale mana muujinayno nooc kasta oo gunaanad la hubo ah oo raacsan.
Iyadoo lala xiriirinayo baaristeenna Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta, mas'uuliyadeenna waa in aan akhrino macluumaadka kale, marka aan sidaa sameynayno, in aan tixgelinno haddii macluumaadka kale uu yahay mid la taaban karo oo aan waafaqsanayn Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Lacag-bixinta ama aqoonta aan ka helnay baarista, ama si kale u muuqda in uu yahay khalad la taaban karo. Haddii, lagu saleeyo shaqada aan qabaney ee ku saabsan macluumaadka kale, waxaan ku soo gunaanadaynaa in uu khalad la taaban karo ku jiro macluumaadkan kale, waxaa na looga baahan yahay in aan soo sheegno xaqiiqdaas. Ma hayno wax aan ka warbixinno oo arrintan ku saabsan.

## Arrimaha Muhiimka ah ee Baarista

Arrimaha muhiimka ah ee baarista waa arrimaha, marka aan ku saleyno ra'yigeenna, fikirkeenna xirfadlenimo, ee ugu muhiimsannaa baaristeenna Bayaannada Maaliyadeed ee muddada. Arrimahan, waxaa looga hadley guud ahaan nuxurka qoraallada Baaristeenna ee Bayaamada Maaliyadeed, iyo in aan bixinno ra'yigeenna ee la socda, mana bixinayno ra'yi gaar ah oo arrimahan ku saabsan. Ka sokow arrimaha aan ku qeexnay qaybta Waxyaabaha Lagu Saleeyey Ra’yiga Wax-laga-beddelay, waxaan go'aaminay arrimaha hoos lagu qeexay in ay noqdaan arrimaha muhiimka ah ee baarista ee ay tahay in aan ugu hadalno warbixinteenna:

#### A. Ururinta iyo diiwaangelinta dakhliga.

Habraacyada uu ku dhaqmay Maamulka Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ayaa baneynaya fursad dakhli lagu lumin karo iyo khaladaad ku yimaada bayaannada maaliyadeed oo ay sababeen:

- In aan la wada adeegsan Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS) ee otomaatika ah.
- Iswaafajin la'aanta dakhliga la ururiyay iyo tirada lacagaha bankiga lagu shubay iyo nidaamka xisaabaadka.
- Rasiidyo taageeraya dakhliga oo aan lahayn

### B. Deymo aan la taageerin

Qoraalka 18 ee bayaannada maaliyadeed wuxuu sheegayaa deymo aan wali la bixin oo dhan USD **8,449,387** kana kooban keenista alaabooyin iyo adeegyo loo qabtey Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya, lanama siinin jadwallada dib-u-bixinta deymahan. Ma aanan helin heshiisyo deymaha khuseeya oo u dhaxeeya DGJ iyo deyn-bixiyaasha gaarka ah si aan u eegno shuruudaha deymaha. Ma jiro diiwaan weyn oo qoraya baaqiga sannadka dhammaadkiisa ee sannad maaliyadeedka FY2022 iyo qaddarada la soo minguuriyay sannadka bilowgiisa.

Ansaxnimada deymaha aan wali la bixin ee lagu sheegay qoraalka 18 ee bayaannada maaliyadeed lama xaqiijin karo.

#### C. Hantida Aan Maaliyadda Ahayn

Nidaamka Maareynta Hantida ayaa burburay intii lagu guda jiray sannadka la eegayo. Sidaa daraadeed, waxaa meesha ka maqan diiwaanka maareynta hantida oo dhammeystiran ee Dowlad Goboleedka Jubaland; haddaba hantida ay dowladdu leedahay sugnaanteeda lama ogga.

## Mas'uuliyadaha Maamulka iyo Kuwa Loo Igmaday Maamulka Bayaannada Maaliyadeed

Maamulka ayaa ka mas’uul ah diyaarinta iyo si wanaagsan u soo bandhigidda Bayaamadan Maaliyadeed oo waafaqsan Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2017 iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno *International Public Sector Accounting Standard* (IPSAS) - Ka-warbixinta Maaliyadaha ee Habka Kaashka Ku Saleysan ee Xisaabaadka iyo kantaroolka gudaha ee kale ee Guddiga Maamulku u arko in ay lagamamaarmaan u yihiin diyaarinta Bayaamada Maaliyadeed oo aan lahayn khalad la taaban karo, khayaamo ama ilduul mid uu ku yimaadaba.

Marka la diyaarinayo bayaannada maaliyadeed, Maamulka ayaa ka mas’uul ah qiimeynta awoodda ay Dowladda Jubaland u leedahay in ay sii jiro/sii hawlgasho, iyadoo si ku habboon loo shaacinayo, arrimaha la xiriira sii jiridda/sii hawlgelidda lana adeegsanayo habka sii jiridda ee xisaabaadka ku saleysan haddii Maamulka uu doonayo in uu lacageeyo ama iibiyo hantida DGJ ama uu joojiyo hawlgallada mooyaane, ama uusan lahayn xal kale oo macquul ah oo aan ka ahayn in sidaa la sameeyo.

Kuwa loo igmaday maamulka ayaa ka mas'uul ah kor-ka-ilaalinta hannaanka ka-warbixinta maaliyadaha hay'adda ee Dowladda.

## Mas’uuliyadaha Hantidhowraha ka Saaran Baarista Bayaannada Maaliyadeed

Ujeeddooyinkeenna waa in aan helno ballanqaad caqligal ah oo ku saabsan in bayaannada maaliyadeed ee dowlad-goobleedka in aaney lahayn khalad la taaban karo, khayaanno iyo ilduuf mid uu ku yimaadaba , iyo in aan soo saarno warbixinta hantidhowraha oo aan ku sheegeyno ra’yigeenna. Ballanqaad caqligal ah waa ballanqaad heerkiisu sarreeyo, laakiin ma ahan damaanadqaad sheegaya in baarista loo sameeyey si waafaqsan ISSAIs iyo in uu mar walba soo helayo khaladaad marka uu jiraba. Khaladaadka ayaa waxay ka dhalan karaan khayaamo ama ilduuf waxaana loo qaadanayaa in ay yihiin kuwo la taaban karo haddii, mid ahaan ama wadar ahaanba, si caqligal ah loo fili karo in ay saameyn ku yeeshaan go’aannada dhaqaale ee ay qaateen adeegsadayaasha marka lagu saleynayo warbixintan maaliyadeed.

Iyadoo qayb ka ah baarista qaabilsan ISSAIs, ayaa waxaannu adeegsanaa go'aan xirfadeed annaga oo joogteyn doonnaa shaki xirfadeed inta ay baaristu socota. Waxaan kaloo:

- Aqooonsanaa oo aan u-kuurgalnaa halisaha khaladka la taaban karo uu ugu jiri karo bayaannada maaliyadeed, khayaano ama ilduuf midka uu doonaba ha ku yimaadee, in aan nakh-shadeyno oo aan sameyno habraacyo hantidhowr oo wax ka qabanaya halisahan, iyo si aan u helo caddeyn dad ku filan oo u habboon si aan ugu saleyno ra’yigeenna. Halista ah in aan la soo oggaan khaladka la taaban karo ee ku yimid khayaano ayaa ka badan tan midka ku yimaada ilduufka, maaddaama khayaannadu ay ku lug lahaan karto mu’aamarad, been-abuur, si ku-talogal ah in wax looga tago, maldahaad, ama in laga dul-boodo kantaroolka gudaha.
- Helnaa faham ku aaddan kantaroolka gudaha oo u habboon baarista si aan u nakh-shadeyno habraacyo baarist oo ku habboon xaaladaha jira, laakiinse aanu ahayn in la bixiyo ra’yi ku aaddan taabogalnimada kantaroolka gudaha ee dowladda.
- Qiimeynaa sida guud ahaan loo soo bandhigey, loo diyaariyey iyo waxa ku jira Bayaannada Maaliyadeed, ee ay ka mid yihiin shaac-ka-qaadista, iyo in Bayaannada Maaliyadeed ee dowlad-goboleedka ay tacaamulaadka iyo dhacdooyinka aasaaska u ah ay u muujinayaan si ka bixineysa sawir dhab ah oo caddaalad ku dhisan.
- Ku soo gunaanadeynaa habboonaanshaha in maamulku uu adeegsado sii jiridda xisaabaadka ku saleysan iyo, iyadoo lagu saleynayo caddeynta baarista, la helay haddii hubaal la'aan la taaban karo ay jirta oo la xiriirta dhacdooyinka ama xaaladaha shaki weyn u keeni kara awoodda ay DGJ u leedahay in ay sii jirto ama sii hawlgasho. Haddii aan ku soo gunaanadno in hubaal la'aan la taaban karo ay jirto, waxaa nalaga doonayaa in aan dadka ku dareensiinno warbixintayada hantidhowrka shaac-ka-qaadista la xiriirta ee ku xusan bayaannada maaliyadeed, ama, haddii shaac-ka-qaadista noocaasi ahi aysan dad ku filnayn, in aannu wax ka beddelno ra'yigeenna. Gunaanadkeenna wuxuu ku saleysan yahay caddeynta baarista ee la helay ilaa iyo taariikhda warbixinteenna hantidhowrka. Si kastaba ha ahaatee, dhacdooyinka ama xaaladaha mustaqbalka ayaa keeni kara DGJ in aysan sii hawlgelin.
- Qiimeynaa sida guud ahaan loo soo bandhigey, loo diyaariyey iyo waxa ku jira bayaannada maaliyadeed, ee ay ka mid yihiin shaac-ka-qaadista, iyo in bayaannada maaliyadeed ee dowlad-goboleedka ay tacaamulaadka iyo dhacdooyinka aasaaska u ah ay u muujinayaan si ka bixineysa sawir dhab ah oo caddaalad ku dhisan.

Waxaan kuwa ka mas'uulka ah arrimaha maamulka la xiriira kala xiriirney, oo ay ka mid yihiin, baaxadda iyo waqtiga loo qorsheeyey hantidhowrka iyo waxyaabihii muhiimka ahaa ee hantidhowrka lagu soo oggaadey, oo ay ka mid yihiin haddiiba ay jiraan nusqaamo mug leh oo la xiriira kantaroolka gudaha ee aan soo ogaaney inta uu socday baaritaankeenna.

**Bashiir Maxamed Baahale**
**Hantidhowraha Guud** Saxiixa-----------------------------

31, September
Taariikhda --------------------------

XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
OFFICE OF THE AUDITOR GENERAL
JUBALAND STATE OF SOMALIA
DOWLAD GOBOLEEDKA JUBALAND

**Kismaayo Jubaland Soomaaliya,**

**Lifaaqa 1aad: Bayaannada Maaliyadeed ee Wasaaradaha iyo Tan Isku-dhafan ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2022.**

# BAYAANNADA MAALIYADEED EE WASAARADAHA & TAN ISKUDHAFAN EE DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBALAND EE SOOMAALIYA

Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar ee 2022

*Waxaa loo diyaariyay si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda (IPSAS) – Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan 2017*

Waxaa Diyaariyey Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha

DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBALAND EE SOOMAALIYA

## Bayaanka Caddaynta – Bayaannada Maaliyadeed ee 2022

Bayaannada maaliyadeed ee 2022, iyo qoraallada la socda, ayaa waxaa loo diyaariyey si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda, Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan ee (2017 ) iyo habka uu u baahan yahay Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) 2017.

Marka la eego ra'yiga Wasiirka Maaliyadda, bayaannada maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) sida loogu gudbiyay hantidhowrka ee waafaqsan Qaybta 32aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2017, waa kuwo sax ah oo sawir dhab ah oo miisaaman ka bixinaya halka ay dhaqaale ahaan taagan tahay Dowlad-goboleedka DGJ 31ka Disembar ee sannadkii dhammaadey 2022. Wasiirka wuxuu sii xaqiijinayaa dhammeystirnaanta diiwaannada xisaabaadka gacanta lagu hayo ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya, kuwaas oo lagu tiirsanaa markii la diyaarinayey bayaannada maaliyadeed ee Jubaland iyo sidoo kale dad ku filnaanshaha nidaamka kantaroolka maaliyadaha gudaha.

Aniga oo ka wakiil ah Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya

**Mudane Axmed Cabdirisaaq Maxamed – Handal**
**Wasiirka maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha**

**27-da**
**Abriil, 2023**
**Taariikhda**

**Saxiixa**

**Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya**
**Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Bixinta**
**Lacagaha ee Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda**
**31ka Disembar ee Sannadkii Dhammaadey 2022**

| | Qoraalka | 2022 Waxaa Kantaroola TSA USD | 2021 Waxaa Kantaroola TSA USD |
|---|---|---|---|
| **Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)** | | | |
| **Canshuuraha** | | | |
| Canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka iyo faa'iidooyinka raasumaalka | **2** | 253,203 | 266,658 |
| Canshuuraha mushaaraadka iyo shaqaalaha | **3** | 708,305 | 505,035 |
| Canshuuraha alaabada iyo adeegyada | **4** | 4,481,039 | 4,092,704 |
| Canshuuraha ganacsiga iyo macaamulaadka caalamiga ah | **5** | 10,108,700 | 10,051,485 |
| Canshuuraha kale | | - | 12,534 |
| **Canshuuraha** | | **15,551,247** | **14,928,416** |
| **Deeqaha** | | | |
| Ka yimid ururrada caalamiga ah | **6** | 8,091,909 | 4,004,990 |
| Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud | **7** | 11,554,863 | 4,854,160 |
| **Deeqaha** | | **19,646,772** | **8,859,149** |
| **Dakhli Kale** | | | |
| Iibka alaabada iyo adeegyada | **8** | 3,169,280 | 2,405,819 |
| Ganaaxyada iyo ciqaabaha | **9** | 52,389 | 24,455 |
| **Dakhli Kale** | | **3,221,669** | **2,430,274** |
| **Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)** | | **38,419,688** | **26,217,839** |
| **Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)** | | | |
| **Gunnooyinka la siiyo Shaqaalaha** | | | |
| Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka | **10** | 18,140,859 | 15,050,731 |
| **Gunnooyinka la siiyo Shaqaalaha** | | **18,140,859** | **15,050,731** |
| **Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada** | | | |
| Safarrada iyo Shirarka | **11** | 1,827,200 | 1,798,852 |
| Kharashaadka Hawlgallada | **12** | 6,255,429 | 2,755,664 |
| Kiro | **13** | 59,269 | 68,004 |
| Kharashaadka Kale ee Hawlgallada La Xiriira | **14** | 3,085,067 | 2,249,225 |
| Ku-talagalka | **15** | 333,522 | 226,307 |
| **Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada** | | **11,560,487** | **7,098,052** |
| **Deeqaha** | | | |
| Deeqaha La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud | **16** | 331,421 | 108,638 |
| **Deeqaha** | | **331,421** | **108,638** |
| **Dheefaha Bulshada** | | | |
| Dheefaha bulshada ee shaqada la xiriira | **17** | 63,245 | 101,763 |
| **Dheefaha Bulshada** | | **63,245** | **101,763** |
| **Kharashaadka Kale** | | | |
| Xawilaadaha aan meel kale lagu sheegin | **18** | 6,631,814 | 3,513,419 |
| **Kharashaadka Kale** | | **6,631,814** | **3,513,419** |
| **Hantida aan maaliyadda ahayn** | | | |
| Hantida Ma Guurtada ah | **19** | 797,666 | 671,719 |
| **Hantida aan maaliyadda ahayn** | | **797,666** | **671,719** |
| **Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)** | | **37,525,492** | **26,544,322** |
| **Kororka Hoos-u-dhaca Kaashka** | | **894,197** | **(326,483)** |
| **Kaashka Bilowga Sannadka** | | 870,512 | 1,196,995 |
| **Kaashka Dhammaadka Sannadka** | **1.5** | **1,717,629** | **870,512** |

Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

**Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyey iyo Ta Rumooway**

**Sannadkii Dhammaadey 31-ka Disembar, 2022**

**Miisaaniyadda Qoondeynta ee Loo Ansaxiyey Habka Kaashka Ku Saleysan**

**Kala-sooca Lacag-bixinnada ee Heerka Dhaqaale**

| | | 2022 | | | | 2021 |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | Qiyaasta Asalka ah ee Qoondeynta | Qiyaasta Kama Dambeysta ah ee Qoondeynta | Waxaa Kantaroola TSA | Farqiga U Dhaxeeya Miisaaniyadda Kama Dambeysta ah iyo Tan Rumowday | Waxaa Kantaroola TSA |
| | Qoraalka | A | B | C | C-B | |
| | | USD | USD | USD | USD | USD |
| **Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)** | | | | | | |
| **Canshuuraha** | | | | | | |
| Canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka iyo faa'iidooyinka raasumaalka | | 298,846 | 298,846 | 253,203 | (45,643) | 266,658 |
| Canshuuraha mushaaraadka iyo shaqaalaha | | 653,771 | 653,771 | 708,305 | 54,535 | 505,035 |
| Canshuuraha alaabada iyo adeegyada | | 8,966,365 | 9,101,365 | 4,481,039 | (4,620,326) | 4,092,704 |
| Canshuuraha ganacsiga iyo macaamulaadka caalamiga ah | | 11,338,206 | 10,548,206 | 10,108,700 | (439,506) | 10,051,485 |
| Canshuuraha kale | | 700,000 | 100,000 | - | (100,000) | 12,534 |
| **Canshuuraha** | **20** | **21,957,188** | **20,702,188** | **15,551,247** | **(5,150,941)** | **14,928,416** |
| **Deeqaha** | | | | | | |
| Ka yimid ururrada caalamiga ah | | 3,898,729 | 9,018,295 | 8,091,909 | (926,386) | 4,004,990 |
| Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud | | 13,930,355 | 19,221,771 | 11,554,863 | (7,666,907) | 4,854,160 |
| **Deeqaha** | **21** | **17,829,084** | **28,240,065** | **19,646,772** | **(8,593,293)** | **8,859,149** |
| **Dakhli Kale** | | | | | | |
| Dakhliga guryaha | | 50,000 | 50,000.00 | - | (50,000.00) | - |
| Iibka alaabada iyo adeegyada | | 2,968,111 | 4,223,111 | 3,169,280 | (1,053,831) | 2,405,819 |
| Ganaaxyada iyo ciqaabaha | | 39,880 | 39,880 | 52,389 | 12,509 | 24,455 |
| **Dakhli Kale** | **22** | **3,057,991** | **4,312,991** | **3,221,669** | **(1,091,322)** | **2,430,274** |
| **Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)** | | **42,844,263** | **53,255,245** | **38,419,688** | **(14,835,557)** | **26,217,839** |

**Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya**

**Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyey iyo Ta Rumooway**
**Sannadkii Dhammaadey 31-ka Disembar, 2022**
**Miisaaniyadda Qoondeynta ee Loo Ansaxiyey Habka Kaashka Ku Saleysan**
**Kala-sooca Lacag-bixinnada ee Heerka Dhaqaale**

| | | 2022 | | | | 2021 |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | Qoraalka | Qiyaasta Asalka ah ee Qoondeynta A | Qiyaasta Kama Dambeysta ah ee Qoondeynta B | Waxaa Kantaroola TSA C | Farqiga U Dhaxeeya Miisaaniyadda Kama Dambeysta ah iyo Ta Rumowday C-B | Waxaa Kantaroola TSA |
| | | USD | USD | USD | USD | USD |
| **Lacag-bixinnada (Payments Outflows)** | | | | | | |
| **Gunnooyinka la siiyo Shaqaalaha** | | | | | | |
| Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka | | 19,487,179 | 24,087,966 | 18,140,859 | (5,947,106) | 15,050,731 |
| **Gunnooyinka la siiyo Shaqaalaha** | **23** | **19,487,179** | **24,087,966** | **18,140,859** | **(5,947,106)** | **15,050,731** |
| **Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada** | | | | | | |
| Safarrada iyo Shirarka | | 3,145,174 | 2,955,292 | 1,827,200 | (1,128,091) | 1,798,852 |
| Kharashaadka Hawlgallada | | 4,974,380 | 7,736,827 | 6,255,429 | (1,481,398) | 2,755,664 |
| Kiro | | 96,575 | 64,669 | 59,269 | (5,400) | 68,004 |
| Kharashaadka Kale ee Hawlgallada La Xiriira | | 2,877,835 | 3,447,854 | 3,085,067 | (362,788) | 2,256,725 |
| Kharashka Soo-noqnoqda ee Aan Mushaarka Ahayn | | 41,166 | - | - | - | - |
| Ku-talagalka | | 782,008 | 365,348 | 333,522 | (31,826) | 226,307 |
| **Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada** | **24** | **11,917,138** | **14,569,990** | **11,560,487** | **(3,009,503)** | **7,105,552** |
| **Deeqaha** | | | | | | |
| Deeqaha La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud | | 680,000 | 644,500 | 331,421 | (313,079) | 108,638 |
| **Deeqaha** | **25** | **680,000** | **644,500** | **331,421** | **(313,079)** | **108,638** |
| **Dheefaha Bulshada** | | | | | | |
| Dheefaha bulshada ee shaqada la xiriira | | 299,139 | 166,564 | 63,245 | (103,319) | 101,763 |
| **Dheefaha Bulshada** | **26** | **299,139** | **166,564** | **63,245** | **(103,319)** | **101,763** |
| **Kharashaadka Kale** | | | | | | |
| Xawilaadaha aan meel kale lagu sheegin | | 3,350,000 | 6,642,550 | 6,631,814 | (10,736) | 3,513,419 |
| **Kharashaadka Kale** | **27** | **3,350,000** | **6,642,550** | **6,631,814** | **(10,736)** | **3,513,419** |
| **Hantida aan maaliyadda ahayn** | | | | | | |
| Hantida Ma Guurtada ah | | 8,569,907 | 7,143,675 | 797,666 | (6,346,010) | 671,719 |
| **Hantida aan maaliyadda ahayn** | **28** | **8,569,907** | **7,143,675** | **797,666** | **(6,346,010)** | **671,719** |
| **Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)** | | **44,303,363** | **53,255,245** | **37,525,492** | **(15,729,753)** | **26,551,822** |
| **Kororka Hoos-u-dhaca Kaashka** | | | | **894,197** | **894,197** | **(333,983)** |

**Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya**
**Bayaanka Hawlgallada Dowladda**
**Sannadkii Dhammaadey 31-Ka Disembar, 2022**

| | | 2022 USD | 2021 USD |
|---|---|---|---|
| **Dakhliga** | **Macaamulaadka Saameynaya Qiimaha Sugan** | **38,419,688** | **26,225,339** |
| **Canshuuraha** | | **15,551,247** | **14,928,416** |
| | Canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka iyo faa'iidooyinka raasumaalka | 253,203 | 266,658 |
| | Canshuuraha mushaaraadka iyo shaqaalaha | 708,305 | 505,035 |
| | Canshuuraha alaabada iyo adeegyada | 4,481,039 | 4,092,704 |
| | Canshuuraha ganacsiga iyo macaamulaadka caalamiga ah | 10,108,700 | 10,051,485 |
| | Canshuuraha kale | - | 12,534 |
| **Deeqaha** | | **19,646,772** | **8,866,649** |
| | Ka yimid ururrada caalamiga ah | 8,091,909 | 4,004,990 |
| | Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud | 11,554,863 | 4,861,660 |
| **Dakhli Kale** | | **3,221,669** | **2,430,274** |
| | Iibka alaabada iyo adeegyada | 3,169,280 | 2,405,819 |
| | Ganaaxyada iyo ciqaabaha | 52,389 | 24,455 |
| **Kharashka** | | **36,727,826** | **25,880,104** |
| **Gunnooyinka la siiyo Shaqaalaha** | | **18,140,859** | **15,050,731** |
| | Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka | 18,140,859 | 15,050,731 |
| **Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada** | | **11,560,487** | **7,105,552** |
| | Safarrada iyo Shirarka | 1,827,200 | 1,798,852 |
| | Kharashaadka Hawlgallada | 6,255,429 | 2,755,664 |
| | Kiro | 59,269 | 68,004 |
| | Kharashaadka Kale ee Hawlgallada La Xiriira | 3,085,067 | 2,256,725 |
| | Ku-talagalka | 333,522 | 226,307 |
| **Deeqaha** | | **331,421** | **108,638** |
| | Deeqaha La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud | 331,421 | 108,638 |
| **Dheefaha Bulshada** | | **63,245** | **101,763** |
| | Dheefaha bulshada ee shaqada la xiriira | 63,245 | 101,763 |
| **Kharashaadka Kale** | | **6,631,814** | **3,513,419** |
| | Xawilaadaha aan meel kale lagu sheegin | 6,631,814 | 3,513,419 |
| **Isbeddelka Macaamulaadka Qiimaha Sugan** | | **797,666** | **671,719** |
| **Hantida aan maaliyadda ahayn** | | 797,666 | 671,719 |
| | Hantida Ma Guurtada ah | 797,666 | 671,719 |
| | Alaabooyinka | - | - |
| Macaamulaadka Hantida Maaliyadeed & Deymaha | | **846,917** | **(326,483)** |
| **Isbeddelka Qiimaha Sugan. Macaamulaadka (Hantida)** | | **846,917** | **(326,483)** |
| Hantida maaliyadeed | | 846,917 | (326,483) |
| Gudaha | | - | - |
| **Deymaha** | | **-** | **-** |
| Deymaha | | - | - |
| Deymaha | | - | - |
| **Kala-bandaanshaha Guud ee Istaatistik** | | - | - |

## *Qoraallada Bayaamada Maaliyadeed*
### *Qoraalka 1aad Siyaasadaha Xisaabaadka*

### *1.1 Aasaaska Diyaarinta Lagu Saleeyay*

Bayaannada maaliyadeed ee iskudhafan ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) waxaa loo diyaariyey si waafaqsan *Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha 2017* (PFM) iyo Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno International Public Sector Accounting Standard (IPSAS) - *Warbixinta Maaliyadeed ee Waafaqsan Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan ee 2017*. Qoraalladan ku qoran bayaamada maaliyadeed waxay noqdaan qayb aan ka go'in fahamka bayaamada oo waa in lala akhriyaa bayaamada.

Waxaa si joogto ah muddada oo dhan loo adeegsanayay siyaasadaha xisaabaadka.

### *1.2 Hay'adda Warbixinta*

Bayaamada maaliyadeed waxaa loogu talogaley Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya. Magaalo Madaxda Magacaaban ee Dowlad-goboleedka Jubaland waa magaalada Bu'aale, oo ku taalla gobolka Jubbada Dhexe ee Soomaaliya, taas oo dhacda koonfurta Wejiba Jubba. Si kastaba ha ahaatee, xarumaha Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya waxay hadda si ku-meelgaar ah ugu yaallaan magaalada Kismaayo. Cinwaanka ugu weyn waa:

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda,
Jidka Garoonka Diyaaradaha,
Xaafadda Faanoole, Ka Soo Horjeedka Hoteelka Agan.

Hawlaha ugu waaweyn ee Dowladda iyo hay'adaha ay maamusho waxaa ka mid ah bixinta adeegyada caafimaadka, waxbarashada, amniga iyo adeegyada guud ee dadweynaha. Bayaannada maaliyadeed waxaa loogu talogaley Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) waxayna ku saabsan yihiin muddada u dhaxeysa 1-da Jannaayo ilaa 31-ka Disembar ee 2022.

Bayaannada maaliyadeed waxaa ku jira hay'adaha ka warbixinaya sida ku xusan *Xeerka Qoondeynta DGJ ee Lr. 2aad ee 2022* waxayna ka kooban yihiin:

1. Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka
2. Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare
3. Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta
4. Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha
5. Wasaaradda Caafimaadka
6. Wasaaradda Isgaarsiinta, Boostada, iyo Tiknoolijiyadda
7. Wasaaradda Amniga Gudaha
8. Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta
9. Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga
10. Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha
11. Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka
12. Wasaaradda Madaxtooyada
13. Maamulka Garoonka Diyaaradaha ee Kismaayo
14. Maamulka Dekadda Kismaayo
15. Xafiiska Hantidhowrka Guud
16. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah

17 Baarlamaanka Jubaland
18 Wasaaradda Xannaanada Xoolaha
19 Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda
20 Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga
21 Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada
22 Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka
23 Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada
24 Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta
25 Guddiga Adeegga Garsoorka.
26 Wasaaradda Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka
27 Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha
28 Guddiga Xuduudaha iyo Doorashooyinka Jubaland
29 Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud
30 Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha
31 Wasaaradda Gaadiidka iyo Dekedaha
32 Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta
33 Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka

Wasaaradaha oo dhan waxaa lagu dhisey *Wareegtada Madaxeyne ee XM/J/772014* oo cinwaankeedu uu ahaan *Wareegto Lagu Dhisayo Wasaaradaha Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya oo lagu Qeexay Doorarka iyo Shaqooyinka Wasaaradaha* kuna taariikheysan 25ka Disembar 2014. Iyada oo sabab u ah dib-u-habeyn lagu sameeyay wasaaradaha, afar (4) wasaaradood oo cusub ayaa waxaa lagu dhisey *Wareegtada Madaxweyne ee XM/DGS/112/2018* oo soo baxday markay taariikhdu ahayd 27[ka] Nofembar, 2018. Xeerka Dhisidda Wasaaradda Maaliyadda iyo Maamulka Dakhli Ururinta ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ayaa loo abuuray ujeeddooyin lagu dhisayo Wasaaradda Maaliyadda iyo Maamulka Dakhli Ururinta si loo xaqiijiyo in Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ay leedahay Wasaarad Maaliyadeed oo ka mas'uul ah guud ahaan maamulka maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya iyo sidoo kale xaqiijinta in Wasaaradda Maaliyadda gudaheeda in uu ka jiro Maamulka Dakhli Ururinta kaas oo si buuxda u haysta shaqaale, u abaabulan, loo maamulo oo awood buuxda loo siiyay in uu ururiyo oo dhigo xisaabta mideysan ee waaxda khasnadda ((TSA) dhammaan canshuuraha sharciga ah iyo dakhliyada kale ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya. Xafiiska Hantidhawrka guud ayaa lagu dhisay Xeerka Hanti-dhowrka ee 2016; haseyeeshee, Xafiiska ayaa keliya si rasmi ah loo dhisay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2018. Maamullada Garoonka Diyaaradaha iyo Dekadda Kismaayo ayaa si gaar ah loo sharciyeeyay.

Wareegto ku xigtey oo ku saabsan dhisidda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) iyo ujeeddadiisa oo cinwaankeedu uu ahaa *Xeer lagu dhisayo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya oo ku taariikheysan 23ka Abriil, 2018* ayaa lagu dhisey xafiiska Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah. Xeer la socda ayaa sidoo kale lagu dhisey Shaqaalaha Rayidka ah iyo qaab-dhismeedka Mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah. Dastuurka Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) ayaa si otomaatik ah u dhisey Baarlamaanka Jubaland. Bayaannada kala duwan ee dhammaan hay'adaha liiska taxan ayaa waxay noqdaan qayb ka mid ah bayaannada maaliyadeed ee iskudhafan maadaama hay'adahan ay qayb ka ahaayeen Xeerka Qoondeynta DGJ Lr. 2aad, ee *2021.*

Maamullada Dekedaha iyo Garoonka Diyaaradaha ee Kismaayo ayaa si kala gaar ah loo sharciyeeyay sannadkii 2017, si kastaba ha ahaatee bayaannadooda gaarka ah ayaa halkan loogu darey in ay qayb ka noqdaan Bayaanka Maaliyadeed ee Iskudhafan maadaama hay'adahan ay qayb ka ahaayeen *Xeerka Qoondeynta DGJ Lr. 2aad ee 2022.* Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka FY2021 Maamulka Garoonka Diyaaradaha ee Kismaayo

iyo Maamulka Dekedda Kismaayo ayaa sida loo kala hor xusay la hoos keenay Wasaaradda Gaadiidka iyo Dekedaha.

Xafiiska Hantidhowrka Guud, Guddiga Adeegga Garsoorka, Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha iyo Wasaaradda Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka ayaa la dhisay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2018 iyo Guddiga Xuduudaha iyo Doorashooyinka Jubaland sannadkii 2019.

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka FY2021 Wasaarado dheeraad ah ayaa la soo bandhigay oo kala ahaa, Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka iyadoo Wasaaradda Biyaha, Macdanta iyo Tamarta magaca laga beddelay oo loo kala bixiyay Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta iyo Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta, sidoo kale Wasaaradda Warfaafinta iyo Isgaarsiinta ayaa laga kala dhigay laba hay'adood oo kala ah Wasaaradda Warfaafinta iyo Wasaaradda Isgaarsiinta.

Bayaamada maaliyadeed ee isku-dhafka ah waxaa ka mid ah dhammaan hay’adaha la kantaroolay intii lagu guda jirray sannadka. Hay’daha midkoodna iskama laha hay’ad kale haseyeeshee Dowladda Hoose ee Kismaayo ee ah dowladda hoose ee magaalada Kismaayo, ayaa waxaa kantaroola Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka

### *1.3 Kaalmada Dibedda*

#### *1.3.1 Lacag-bixinnada Dhinacyada Saddexaad*

DGJ waxay sidoo kale ka faa’iiday alaabo iyo adeegyo loo soo iibiyay iyadoo sabab u ah lacag-bixinno kaash ah oo ay bixiyeen dhinacyo saddexaad inta muddadan lagu guda jiray. Warbixinta kaalmada dhinaca saddexaad ayaa lagu hoos qoray Qoraalka 30aad

#### *1.3.2 Kaalmada Dibedda*

Kaalmada dibedda laga helo ayaa waxaa loo helay qaab ah deeqo ka yimid hay’ado deeq-bixiyeyaal laba-geesood ah iyo kuwo dhinacyo badan oo hoos imaanaya heshiisyo qeexaya ujeeddada kaalmada loo adeegsan doono. Kaalmada kale ayaa waxaa ujeeddooyin gaar ah u bixiyay NGO-yada iyo deeq-bixiyeyaasha kale waxaanna warbixintooda lagu hoos qoray Qoraalka 30.2

### *1.4 Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda & Xisaabaha Mashruuca*

Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ayaa xisaabo banki uga furan Bankiyada Dahabshiil iyo Salaam.

#### *1.4.1 Xisaabaha Bankiga Dahabshil*

Sannad maaliyadeedkii 2022, sideed (8) xisaabood oo cusub ayaa lagu furay oggolaansho qoraal ah oo laga helay Wasiirka Maaliyadda, iyada oo la raacayo Qaybta 29aad, faqradda 2aad ee Xeerka PFM ee 2017. Xisaab-hoosaad la xiriira mashruuc deeq-bixiye ayaa la furay si loogu hoggaansamo shuruudaha deeq-bixiyaha. Dhammaadkii sannad maaliyadeedka FY2021, lacagaha ku harsanaa xisaabahan bankiga waxay ahaayeen sidan soo socota:

| Magaca Xisaabaha Bankiga Dahabshiil | 2022 USD | 2021 USD |
|---|---|---|
| Wasaaradda Arrimaha Haweenka - Xisaabta Taageerada (Support Account) | 63 | 63 |
| Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah - Xisaab Hoosaad | 5,155 | 3,234 |
| JRIA iyo Arrimaha IDPs - Xisaabta GIZ | 1 | 51 |
| Taageerada JRIA -Xisaabta UNHCR | - | 2,714 |
| Wasaaradda Beeraha - Xisaab Taageero | 26,330 | 70,779 |
| Xisaabta Xafiiska Guddoomiyaha Jubbada Hoose | 1 | 1 |
| Ministry of Livestock - Support Account | 51,521 | 977 |
| Ministry of Health - Support Project Account | 70,072 | 92 |
| Ministry of Minerals, Energy & Water Resources | 241 | - |
| Jubaland Teachers Training College (JTTC) | 7,734 | 4,706 |
| Moet-GIZ Support Account | 4,129 | 131 |
| Ministry of Minerals Energy & Water-GIZ Project | 684 | - |
| Moh-Covid19 Emergency Preparedness | - | 87,116 |
| MoEHL DGJ-UNICEF Project | 5 | 5 |
| DGJ MoH MH PSS (Covid19) | 1 | 1 |
| DGJ Min of Women & Human Right | 26,238 | - |
| Ministry of Agriculture Jubaland | 18,579 | - |
| MoPWH Support Project Account | 80 | - |
| Moet-GIZ Gobwen Support Account | 1 | 1 |
| Moet-GIZ-Herbs Account | - | 425 |
| Support Project Account MoH DGJ | 1 | 1 |
| JRIA UFSP Sup-Account-GIZ | 1 | 1 |
| MOET-PROSCAL ACCOUNT | 10 | - |
| DGJ Mot12-GIZ Project Account | - | 2,532 |
| Ministry Of Agriculture DGJ GIZ Project | - | 19,735 |
| TECHNICAL VOCATIONAL EDUCATION AND TRANING GIZ | 15,050 | - |
| GIZ UFSP Gobweyn Project | - | 38,971 |
| MoPWRH-DGJ Support Project Account | - | 45,340 |
| JUCRI CDF Sub-Account-GIZ | - | 87,702 |
| UNHCR-JUCRI SUPPORT ACCOUNT | 227 | - |
| MOHADM-DGJ | 15,740 | - |
| MOH BMGF PROJECT | 12,400 | - |
| MOH JUBALAND HEALTH PROFESSIONAL ACT | 18,875 | - |
| JUBALAND SUN MOVEMENT SECRETARIAT | 52 | - |
| JUCRI SUPORTING FOR THE DISPLACED | 55,569 | - |
| JUCRI-SUPPORT OF IMPACTFULL UPGRADING GIZ | 57,741 | - |
| Promoting Local Artisan Through Pottery | 53,554 | - |
| | **440,054** | **364,574** |

## 1.4.2 Xisaabaha Bankiga Salaam Somali Bank

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2022, labo (2) xisaabood oo cusub ayaa lagu furay oggolaansho qoraal ah oo laga helay Wasiirka Maaliyadda, iyada oo la raacayo Qaybta 29aad, faqradda 2aad ee Xeerka PFM ee 2017. Dhammaan xisaabo-hoosaadyada waxay gaar ahaan la xiriiraan mashruucyada deeq-bixiyaha waxaanna loo furay si loogu hoggaansamo shuruudaha deeq-bixiyaha. Dhammaadkii sannad maaliyadeedka FY2022, lacagaha ku harsanaa xisaabahan bankiga waxay ahaayeen sidan soo socota:

| Magaca Xisaabaha Bankiga Salaam Somali Bank | 2022 USD | 2021 USD |
|---|---|---|
| Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda ee Jubaland | 87,718 | 3,911 |
| Ministry of Woman & Human Rights - Support Account | 60 | 35,427 |
| Ministry of Agriculture - Support Account | 3 | 9 |
| Ministry of Fisheries & Marine - Support By FAO | 93 | 93 |
| MOE And Higher Learning Support Project Account | 5,197 | 236 |
| Moi Jubaland Dialogue Account | 10 | 10 |
| MOH HMIS Strengthening Bardere And Elwak Districts | 70 | 70 |
| Ministry Of Minerals, Energy And Water Resources | 20,064 | 12,575 |
| Mopwh DGJ Jplg Support Account | 1,499 | 14,777 |
| JRIA Subaccount-Care | 3 | 3 |
| Moilg-DGJ | 74 | 164 |
| SURP- Kismayo Municipality | 905,286 | 350,437 |
| Ministry Of Public Work and Housing Jubaland | 3 | 11,066 |
| Mole Baxnaano Project Account | - | 19,485 |
| Garoonka Diyaaradaha Sayid Mohamed Abdulle Xassan | 15,657 | 21,898 |
| WB Project Account-2103-34177359 | 180,055 | 8,591 |
| RCRF III-PERFORMANCE BASED CONDITION/PBC'S | 21 | - |
| MoW & Hr-Support Account Dollars | - | 1,787 |
| JUCRI Sub-Account-Care | - | 25,400 |
| Degmada Dhoobley | 53,828 | - |
| Mole-Sagal Project | 7,934 | - |
| | **1,277,575** | **505,938** |

## *1.5 Kaash & La Mid Ah Kaash*

Kaash iyo La Mid ah Kaash waxaa loola jeedaa lacagaha waraaqda ah iyo qadaadiicda ee la hayo iyo dhigaal kasta ee lagu hayo xisaabaha bankiyada ama hay'adaha maaliyadeed. Kaashka waxaa loo aqoonsan yahay qaddarkiisa qiimaha lacageed. Bankiyada Soomaaliya ma bixiyaan wax dulsaar ah.

Kaashka ku jira bayaanka qabashada kaashka iyo lacag-bixinta ayaa ka kooban qaddaradan soo socda:

| | 2022 USD | 2021 USD |
|---|---|---|
| Kaashka La Hayo iyo lacagaha ku harsan bankiyada | 1,717,629 | 870,512 |

Kaashkan $1,717,629 waxaa ku jira $87,718 oo lagu hayo xisaabta weyn ee TSA, iyadoo lacagaha gacanta lagu hayo ee harsanna oo dhan $1,629,910 lagu hayo xisaabo-hoosaadka TSA oo ah kaash loo xaddiday ujeeddooyinka mashruuc gaar ah.

## *1.6 Nooca Lacagta Warbixinta*

Nooca lacagta looga warbixinayo waa Doolarka Mareykanka (USD), oo la duubay lagana dhigay doolarka ugu dhow.

### 1.7 Miisaaniyadda Asalka ama Tan Kama Dambeysta ah ee La Ansaxiyay iyo Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyadda iyo Tan Rumooway

Miisaaniyadda la ansaxiyey waxaa la diyaariyey iyadoo lagu saleynayo isla xisaabaadka (Kaash ku saleysan), isla aasaaska kala-soocidda iyo muddada (Laga bilaabo 1da Jannaayo 2021 ilaa 31ka Disembar 2022) ee bayaamada maaliyadeed. Waxaa ku jira isla hay'adaha ku jira bayaanka maaliyadeed ee iskudhafan (Kuwani waxaa lagu muujiyay Qoraalka 1.2)

Baarlamaanka Jubaland ayaa ansaxiyay miisaaniyadda asalka ah markay taariikhdu ahayd 26ka Oktoobar 2021. Waxaa ku xigay, in miisaaniyad dheeri ah uu ansaxiyey Baarlamaanka Jubaland 8da Luulyo 2022.

### 1.8 Taariikhda Oggolaanshaha

**Bayaannada maaliyadeed ayaa waxaa markii ay taariikhdu ahayd 27-ka Abriil 2023 ansaxiyay in la bixiyo Mudane Axmed Cabdirisaaq Maxamed (Handal), Wasiirka Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha.**

**Qoraalka 2aad Canshuuraha Dakhliga, Faa'iidooyinka iyo Faa'iidooyinka Raasumaalka**

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2022, DGJ ayaa ururisay canshuuraha dakhliga, faa'iidooyinka, iyo faa'iidooyinka raasumaalka oo gaaraya $253,203 ($266,658 sannadkii 2021). Canshuurta waxaa bixiyay shaqaalaha Rayidka ah iyo shaqaalaha kale ee ganacsiga taas oo lagu soo rogay Mushaarkooda guud ee ay bixiso Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya iyada oo la adeegsanayo nisbo jaango'an oo gaaraysa 5%.

**Qoraalka 3aad Canshuuraha Mushaaraadka iyo Shaqaalaha**

Canshuurta waxaa bixiyay kuwa loo shaqeeyo iyada oo nisbo jaango'an oo 5% lagu saleynayo mushaarka guud (mushaarka/ujuurada) ee la siiyo dhammaan shaqaalaha. Sannad maaliyadeedkii 2022 lacag dhan, $708,305 ($505,035 sannadkii 2021) ayaa laga helay ururro caalami ah iyo shirkado ganacsi oo ka hawlgalla Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya.

**Qoraalka 4aad Canshuuraha Alaabada iyo Adeegyada**

Kuwani waa canshuuro iskujir ah oo la saaro isticmaalka adeegyada ay bixiso DGJ. Shaxdan soo socota waxay muujinaysaa kala-dhigdhigista, iyo meelaha laga helo canshuuraha la saaro alaabada iyo adeegyada lagu bixiyay gudaha degaamada ay ka taliso DGJ.

| | 2022 | Wasarada Arrimaha Gudaha iyo Federalka | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | Wasarada Cadaalada iyo Arrimaha Diinta | Wasarada Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ah | Wasarada Ganacsiga iyo Warshadaha | Wasarada Hawlaha Guud, Guryeynta iyo Dhismaha | Wasarada Gaadiidka iyo Duulista Hawada | Wasarada Gaadiidka iyo Dekedaha | 2021 |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Canshuurta Macaashka | 851,110 | | 851,110 | | | | | | | 957,530 |
| Canshuurta Guryaha | 389,556 | 389,556 | | | | | | | | 407,778 |
| Shatiyada Gawaarida iyo Darawalada | 41,400 | | | | | | | 41,400 | | 149,732 |
| Shatiyada Ganacsiga & Xirfadaha | 103,100 | 35,420 | | | | 67,680 | | | | 31,405 |
| Ujuurrada Maamulka Dhulka | 368,861 | | | | | | | 210,686 | 158,175 | 545,962 |
| Canshuurta Waddo-marista ee Dowlad-goboleedka | 1,296,521 | | 1,296,521 | | | | | | | 953,272 |
| Ujuurrooyinka Kaluumeysiga | - | | | | | | | | | 20,000 |
| Ujuurrooyinka Soo-degidda Diyaaradaha | 313,863 | | | | | | | 313,863 | | 209,482 |
| Ujuurrada Rakaabka Maxalliga ah | 405,217 | | | | | | | 405,217 | | 369,193 |
| Ujuurrooyinka meelaha baabuurta la dhigto | 1,236 | | | | | | | 1,236 | | 3,299 |
| Canshuurta bixidda caalamiga ah | 72,134 | | | | | | | 72,134 | | 38,007 |
| Ujuuradda Hagidda Diyaaradaha | 126,517 | | | | | | | 126,517 | | 137,247 |
| Canshuurta Waddo-marista ee Magaalada | 453,310 | | | | | | | 453,310 | | 228,227 |
| Diiwaangelinta NGO-yada Caalamiga ah | 12,000 | | | | 12,000 | | | | | 18,000 |
| Diiwaangelinta NGO-yada Maxaliga ah | 5,000 | | | | 5,000 | | | | | 21,800 |
| Diiwaangelinta Shirkadaha Maxalliga ah | - | | | | | | | | | |
| Ujuurrooyinka Ku Soo-Xirashada Dekedda | 39,625 | | | | | | | | 39,625 | - |
| Canshuuraha kale ee laga qaado isticmaalka alaabooyinka iyo fasaxyada adeegsiga | 990 | | | 990 | | | | | | 1,770 |
| **Wadarta Guud** | **4,480,439** | **424,976** | **2,147,631** | **990** | **17,000** | **67,680** | **-** | **1,624,363** | **197,799** | **4,092,704** |

Nisbooyinka lagu dabakhi karo adeegyada way kala duwan yihiin intooda bandanna waxay ku xiran yihiin waaxda ganacsiga iyo nooca adeegga waxaanna loo oggolaaday si waafaqsan Xeerka Dakhliga 2017.

**Qoraalka 5aad Canshuuraha Ganacsiga iyo Macaamulaadka Caalamiga ah**

Canshuuraha Ganacsiga Caalamiga ah waxay mideynayaan dhammaan canshuuraha lagu soo rogo alaabada iyo adeegyada loo soo dhoofiyo ama laga dhoofiyo Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya. Intii lagu guda jirey sannad maaliyadeedkan, canshuuraha Kastamka/Furdada ee lagu soo rogo waxyaabaha dalka loo soo dhoofiyo waa canshuurta keliya ee lagu qaado dabakhadan. Maamulka Dekadda Kismaayo iyo Maamulka Garoonka Diyaaradaha Kismaayo waa ilaha ugu weyn ee canshuuraha lagu soo rogo ganacsiga caalamiga ah.

Intii sannadka lagu guda jiray, $10,108,700 ayaa la ururiyay iyadoo $3,310,865 ay la xiriirto Canshuuraha Furdada - Jaadka ($1,988,532 sannadkii 2021) iyo canshuuraha furdada alaabooyinka la soo dhoofiyay $6,734,607 ($7,986,350 sannadkii 2021). Hoos u dhaca ururinta canshuuraha furdada ee sannadkii la soo dhaafay ayaa la xiriirta hoos u dhaca qaadista canshuuraha alaabaha dalka loo soo dhoofiyay. Canshuuraha dhoofinta oo dhan $63,228 ayaa la ururiyay. Shaxda soo socota waa kala dhigdhigista faahfaahsan ee canshuuraha kastamka ee la qaaday iyo meelaha ay ka soo xaroodeen.

| | 2022 | | | | 2021 |
|---|---|---|---|---|---|
| | Wadarta Guud USD | Wasarada Maaliyada USD | Wasarada Gaadiidka iyo Dekedaha | Wasarada Gaadiidka iyo Duulista Hawada | USD |
| Canshuuraha furdada - Alaabooyinka dalka loo soo dhoofiyo | 6,734,607 | | 6,685,245 | 49,362 | 7,986,350 |
| Canshuuraha furdada - JAADKA | 3,310,865 | 3,310,865 | | | 1,988,532 |
| Canshuurta alaabooyinka dalka laga dhoofiyo | 63,228 | | 63,228 | | 76,603 |
| | **10,108,700** | **3,310,865** | **6,748,473** | **49,362** | **10,051,485** |

**Qoraaka 6aad Deeqaha ka yimid Ururrada Caalamiga ah**

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2022, deeqo ayaa laga helay ururro caalami ah oo dhan $8,091,909 ($4,004,990 sannadkii 2021). Qaddarka laga helay ururrada caalamiga ah ayaa lagu faahfaahiyay kala-dhigdhigista hoos ku xusan.

| Deeq-bixiye | 2022 USD | 2021 USA |
|---|---|---|
| Danish Refugee Committee (DRC) | 18,100 | |
| GIZ | 1,190,145 | |
| ADRA | 62,82 | |
| AVSI | | |
| Norwegian Church Aid | | |
| Norwegian Refugee Council | | |
| Save The Children | | |
| World Vision | | |
| TROCAIRE | | |
| CARE INTERNATIONAL IN SOMALIA | | |
| American Refugee Committee (ARC) | | |
| Lutheran World Federation (LWF) Education | | |
| Food and Agricuture Organization | | |
| International Labour Organisation | | |
| United Nations Assistance Mission in Somalia | | |
| United Nation Developmental Programme | | |
| UNICEF | | |
| UNHCR | | |
| UNHABITAT | | |
| Barnaamijka Cuntada Adduunka | | |
| United Nations Capit | | |
| Gruppo Per Rela | | |
| COOPERAZ | | |
| ANPPCA | | |

## Qoraalka 7aad Deeqaha ka yimid Qaybaha Kale ee Dowladda Guud

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2022 Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay ku deeqday lacag guud ahaan gaareysa $11,554,863 ($4,854.160 sannad maaliyadeedkii 2021) Dowlad-goboleedka Jubaland. Maaliyadda, oo la helay sannadka oo dhan waxaa ka mid ahaa $138,638 oo loo isticmaalay Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada / Global Partnership for Education (GPE), $3,619,572 ($2,684,093 sannadkii 2021) ayaa laga helay mashruuca RCRF II/III ee uu maamulo Bankiga Adduunka / World Bank, $460,000 oo loogu talagalay maaliyadda gargaarka abaaraha oo hoos imaanaysa Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinkat, iyadoo $9,493 la helay si loogu taageero LDF JPLG degmooyinka, iyo $1,307,013 oo loogu talagalay mashruuca Qorsheynta Maalgashiga Magaalooyinka Soomaaliyeed. Qaddarka laga helay mashruucyada ayaa lagu faahfaahiyay kala-dhigdhigista hoos ku xusan. (Sidoo kale tixraac ama u noqo Qoraalka 21aad).

| Mashaariic | 2022 | Wasarada Dhaqanka Tacliinta Sare | Wasarada iyo Arrimaha Gaargaarka &Maareynta Musiiboyinka | Wasarada Biyaha iyo Tamarta | Wasarada Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | Wasarada Kalumeysiga iyo Kheyraadka Badda | Wasarada Maliyada Iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 2021 |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada (GPE) | 37,866 | 37,866 | | | | | | 83,200 |
| Bah-wadaagta Caalamiga ah ee Waxbarashada GPE MCA | 100,772 | 100,772 | | | | | | 99,384 |
| Dib-u-eegista Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Jubaland | - | | | | | | | 23,310 |
| SURP II -TF-B1409(KFW) | 951,124 | | | | 951,124 | | | 718,223 |
| SURP II -TF-B1519(EU) | 169,855 | | | | 169,855 | | | 269,324 |
| SURP II - IDA-D5310(IDA) | 186,034 | | | | 186,034 | | | 294,975 |
| Munaasabadaha Maalinta Biyaha Adduunka ee 2019 | 6,540 | | | 6,540 | | | | - |
| GPE-Kuliyadda Tababbarka Macallimiinta ee Jubaland Teacher Training College | 37,000 | 37,000 | | | | | | - |
| M&E MoE emergency drought response program | 9,930 | 9,930 | | | | | | - |
| Somali Fishing Fund | 154,677 | | | | | 154,677 | | |
| Taageerada Xasillinta(Kismaayo,Garba,Bardh,Afmadow) | - | | | | | | | 10,000 |
| Mashruuca RCRF III | 3,619,572 | | | | | | 3,619,572 | 2,684,093 |
| Taageerada Miisaaniyadda ee Midowga Yurub | 1,080,000 | | | | | | 1,080,000 | - |
| TAAGEERADA MIISAANIYADDA EE DFS | 982,000 | | | | | | 982,000 | - |
| Jubaland contribution | 9,493 | | | | 9,493 | | | 4,130 |
| Sanduuqa Kaalmada Abaaraha | 460,000 | | 60,000 | | | | 400,000 | 150,000 |
| World Bank Budget Support | 3,750,000 | | | | | | 3,750,000 | |
| 8012.2. 1 RCRFIICOVID-19 | - | | | | | | | 517,520 |
| | 11,554,863 | 185,568 | 60,000 | 6,540 | 1,316,505 | | 9,831,572 | 4,854,160 |

| | 2022 USD | 2021 USD |
|---|---|---|
| Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | 185,568 | 182,584 |
| Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta | 6,540 | - |
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 9,831,572 | 2,684,093 |
| Wasaaradda Caafimaadka | - | 517,520 |
| Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga | - | 23,310 |
| Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda | 154,677 | - |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | 1,316,505 | 1,296,653 |
| Guddiga Adeegga Garsoorka. | 44,000 | - |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | 60,000 | 150,000 |
| | **11,598,863** | **4,854,160** |

## Qoraalka 8aad Iibka Alaabada iyo Adeegyada

Iibka alaabada iyo adeegyada wuxuu ka kooban yahay dakhliga ka soo xarooda dokumeentiga sharciga ah ee ay DGJ siiso muwaadiniinteeda kuwaas oo lagama maarmaan ah. Sannad maaliyadeedkii 2022, Wasaaradaha iyo Hay'adaha waxay ururiyeen guud ahaan dakhli gaaraya $3,169,280 ($2,405,819 sannadkii 2021) oo ka soo xaarooday iibka alaabada iyo adeegyada. Shaxda soo socota waxay bixinaysaa kala dhigdhigista faahfaahsan ee waxyaabaha dakhliga ka soo xarooday:

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Ajuurooyinka Dal-ku-galka | 157,523 | 107,942 |
| Ujuurrada Aqoonsiga Shakhsiga | 77,594 | 1,050 |
| Ujuurrooyinka Warqadda Dhalashada | 35,875 | 1,635 |
| Ujuurrooyinka Warqadda Dhulka | 1,323,361 | 464,806 |
| Diiwaangelinta Taarikada Gaadiidka | 262,880 | 246,800 |
| Diiwaangelinta Warqadda Gaadiidka | 157,523 | 144,860 |
| Qoondeynta Dhulka | 1,013,394 | 1,359,165 |
| Ujuurooyinka Nootaayada | 1,200 | 600 |
| Ujuurrooyinka Dokumentiyada Codsiga Qandaraaska | 2,700 | 1,000 |
| Ujuurada Baasaboorka | 44,980 | 4,660 |
| Ujuurrooyinka Baarista Waxyaabaha Dalka Loo Soo Dhoofiyay | 92,050 | 73,302 |
| | **3,169,080** | **2,405,819** |

## Qoraalka 9aad Ganaaxyada , iyo ciqaabaha.

Wasaaradda Cadaaladda, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta waxay ururisay Ujuurrooyinka Qabashada Dacwadaha Maxkamadda oo dhan $25,389. Ujuurrooyinka qabashada dacwadaha maxkamadda waxay la xiriiraan khidmadaha laga helo furitaanka galalka dacwadaha ee Maxkamadda Degmada ee Kismaayo.

## Qoraalka 10aad Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka

### *Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda*

Mushaaraadka iyo ujuurooyinka waa isku jirka dhammaan mushaaraadka, gunnooyinka iyo lacag-bixinnada nooc kale ah ee la siiyo shaqaalaha. Shaqaalaha waxaa ka mid ah shaqaalaha rayidka ah iyo kuwa haya xilalka siyaasadeed. Kala-dhigdhigista mushaaraadka iyo ujuurooyinka la soo koobay oo dhammeystiran ayaa hoos lagu muujiyay:

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Shaqaalaha joogtada ah | 2,713,520 | 2,552,838 |
| Shaqaalaha qandaraaska ku shaqeeya | 1,483,435 | 1,718,511 |
| Shaqaalaha ujuurrada ku shaqeeya | 1,093,101 | 914,323 |
| Gunno | 200 | 59,100 |
| Ciidamada Ammaanka (Booliska, Nabadsugidda iyo Asluubta) | 3,942,250 | 3,399,750 |
| Mushaaraadka la siiyo Wasiirada iyo Magacaabisyada Sharciga ah | 127,323 | 308,812 |
| Mushaaraadka La Siiyo Siyaasiyiinta | 810,610 | 749,677 |
| Gunnada Hoyga | 2,417,599 | 2,228,900 |
| Gunnada Xirfadlayaasha | 1,199,553 | 309,283 |
| Gunnada Gaadiidka | 183,853 | 50,820 |
| Gunnooyinka Kale | - | 29,160 |
| Gunnooyinka Hawlgallada Amniga | 440,724 | 385,498 |
| Bixinta Raashiinka Joogtada ah | 2,405,429 | 1,191,389 |
| Raashiinka Maalinlaha | 1,323,263 | 1,152,670 |
| | **18,140,859** | **15,050,731** |

Mushaaraadka Siyaasiyiinta waxay la xiriiraan mushaaraadka la siiyo Xildhibaannada Baarlamaanka. Mushaaraadka la siiyo Wasiirada iyo magacaabista qaanuuniga ah ee ay ka mid yihiin mushaaraadka la siiyo Wasiirada iyo Guddoomiyeyaasha madaxda ka ah hay'adaha qaanuuniga ah sida Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah.

Gunnada hoyga waxay la xiriirtaa gunnooyinka sida gunnooyinka guriga iyo gunnooyinka martigelinta hoteelka ee la siiyo Wasiirrada, Xildhibaannada Baarlamaanka, Guddoomiyeyaasha iyo shaqaalaha rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ). Bixinta raashiinka joogtada ah ee lacag-bixinta nooc kale ahaanta loo siiyo Ciidamada Militeriga Jubaland ee loo bixiyo qaab cunto iyo sahayda kale ee la xiriirta cuntada, halka raashiinka maalinlaha uu la xiriira raashiinka loo diyaariyo shaqaalaha ka shaqeeya Wasaaradda Madaxtooyada iyo qaybaha kala duwan ee Ciidamada ammaanka ee waajibaadkoodu yahay sugidda amniga Hay'adaha Dowladda.

## Qoraalka 11aad Safarrada iyo Shirarka iyo Xallinta Khilaafaadka

Kharashaadka safarrada iyo shirarka ayaa guud ahaan dhan $1,827,200 ($1,798,852 sannadkii 2021) waxayna ka kooban yihiin kharashaadka safarrada iyo shirarka ee lagu qabtay dalka gudahiisa iyo dibeddiisa iyo kharashaadka xallinta khilaafaadka. Shaxdan soo socota waxay bixinaysaa kala-dhigdhigidda kharashaadka guud.

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Safarka Gudaha | 329,849 | 420,544 |
| Safarka Dibedda | 188,705 | 270,926 |
| Shirarka maxalliga ah | 330,005 | 359,612 |
| Shirarka Dibedaha | 31,767 | 47,259 |
| Kharashaadka Xallinta Khilafaadka | 946,874 | 700,511 |
| | **1,827,200** | **1,798,852** |

## *Qoraalka 12aad Kharashaadka Hawlaha La Xiriira*

Kharashaadka Hawlaha La Xiriira waa isku jirka kharashaadka loo adeegsado fududeynta socodsiinta hawlaha xafiisyada Wasaaradda. Shaxda soo socota waxay bixinaysaa kala-dhigdhigidda kharashaadka hawlaha la xiriira ee ay bixisay DGJ intii sannadka lagu guda jiray.

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Biyo | 1,966,606 | 69,890 |
| Koronto | 140,388 | 171,216 |
| Shidaalka Matoorka | - | 19,336 |
| Lacagaha telefoonka | 14,200 | 17,241 |
| Kharashaadka Telefoonnada Gacanta | 10,601 | 12,978 |
| Internet-ka | 210,374 | 179,958 |
| Lacagaha Dishka Satalaytka | 95,100 | 74,000 |
| Ujuurrooyinka G-suite | 6,144 | 4,608 |
| Baasiin | 15,556 | 13,900 |
| Nafto | 751,252 | 226,022 |
| Saliidda (mashiinnada) | 6,885 | 3,272 |
| Qalabka Dhigaalka/Qoraalka | 209,480 | 190,382 |
| Lacagaha Faafinta | 15,086 | 22,799 |
| Sahayda Kulanka | 1,009,686 | 610,447 |
| Cuntada Fudud ee Xafiiska | 58,747 | 74,975 |
| Daabacadaha | 107,055 | 123,901 |
| Sahayda Nadaafadda | 113,296 | 49,767 |
| Waxyaalaha uu Isticmaalo Kombiyuutarka | 27,859 | 23,270 |
| Sahay Caafimaad | - | 11,297 |
| Dayactir qalab | 154,992 | 70,332 |
| Dayactirka alaabooyinka guriga iyo waxyaabaha lagu rakibo | 60,485 | 37,475 |
| Hagaajinta Gawaarida | 25,256 | 47,250 |
| Hagaajinta makiinadaha waaweyn | 1,750 | 5,800 |
| Dayactirka iyo gacan ku haynta dhismayaasha | 699,617 | 79,197 |
| Sahayda iyo qalabka dayactirka | 9,010 | 34,863 |
| Qandaraasyada dayactirka | 4,948 | - |
| Kuwo kale | 10,375 | 34,725 |
| Adeegyada Nadaafadda | - | 2,000 |
| Kirada Gawaarida/ kirada baabuurta | 522,279 | 544,764 |
| Doon Kirayn/ Kiro | 8,400 | - |
| | **6,255,429** | **2,755,664** |

### *Qoraalka 13aad Kiro*

Kharashaad kiro oo gaaraya $59,269 ayaa baxay 2022 ($68,004 sannadkii 2021. Kharashka kirada xafiiska wuxuu la xiriiraa $2,200 oo lagu bixiyo kirada *Hay'adda Qaxootiga iyo Shakhsiyaadka Gudaha Ku Barakacay* (JRIA) ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, $18,000 waxay la xiriirtaa kirada xafiiska Hantidhowrka Guud oo uu taageero mashruuca RCRF III iyadoo loo marayo kharashaadka soo noqnoqda ee aan mushaarka ahayn, $14,700 oo loogu talagalay mashruuca UNICEF ay taageerto ee Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka iyo $8,094 oo loogu talagalay mashruuca SAGAL ee Xawilaadda Bulshada Nugul ee Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha waxaanna taageera hay'adda NRC.

Kiro kale oo la xiriirta kiraynta hoteel iyo hool oo isku noqonaya $20,164.

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Kiro Xafiiseed | 43,594 | 47,840 |
| Kiro Kale | 15,675 | 20,164 |
| | **59,269** | **68,004** |

### *Qoraalka 14aad Kharashaadka Kale ee Hawlaha La Xiriira*

Ujuurooyinka la-talinta, Tababarka iyo Kobcinta shaqaalaha, ujuurooyinka adeegyada la bixiyay, iyo kharashaadka Telefisyoonka iyo Wargeyska waa qaybaha ugu muhiimsan ee kharashaadka kale ee hawlaha la xiriira. Ujuurooyinka la-talinta waxaa ay ka kooban yihiin adeegyada la-talinta ee loo qortay maareynta mashruuca RCRFII,  mashruuca qorsheynta maalgelinta magaalooyinka Soomaaliyeed ee loo marayo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, mashaariicda ay hirgeliyeen hay'adaha GIZ, CARE, Trocaire, Norwegian Refugee Council (NRC) iyo Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO). Kharashaadka tababarka shaqaalaha ee la xiriira tababbarada farsamo ee takhasusiga ah ee ay bixiyeen mashaariicda ay hirgeliyeen hay'adaha GIZ, ADRA, Norwegian Refugee Council (NRC), UNHABITAT, Ururka Shaqaalaha Adduunka / International Labour Organization (ILO) iyo Sanduuqa Horumarinta Ra'samaalka ee Qaramada Midoobay / United Nations Capital Development Fund.

Ujuurooyinka adeegyada la bixiyay waa lacag-bixinnada la siiyay SEMLEX iyo MILESTONE, SEMLEX oo ah shirkad ay qandaraas kula gashey Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) in ay bixiso adeegyada diiwaangelinta taarikada gaadiidka iyo buugga diiwaanka (logbook) iyo lambar u yeelidda guryaha; tani ayaa ugu horreyn lagu guuleystay iyada oo DGJ bixinayso kharashaadka ka baxay SEMLEX marka ay bixinayso adeegyadan. MILESTONE ayaa Jubaland u qabatey adeegyada diiwaangelinta dhulka. Iyada oo kharashaadka Xayaysiinta Telefisyoonka iyo Wargayska loogu talogalay kharashaadka ku baxa xayaysiinnada telefisyoonka iyo rukumashada joornaal ee ay bixiso DGJ. Khidmadaha bankiga ee ku baxa hawlgallada xisaabaha TSA ee DGJ ayaa yareeya khidmadaha Bankiga ee la xiriira qiimaha khidmadaha Bankiga ee hooseeya ee Bankiga Salaam. Shaxdan soo socota waa kala-dhigdhigista kharashaadka kale ee hawlaha la xiriira.

| | 202<br>USD | 202<br>USD |
|---|---|---|
| Ujuurrooyinka La-talinta | 592,140 | 704,503 |
| Tababarka iyo Kobcinta Shaqaalaha | 517,315 | 211,438 |
| Ujuurrada adeegga la bixiyay (Adeeg aan la-talin ahayn) | 1,848,267 | 1,112,693 |
| Khidmadaha Bankiga | 41,336 | 52,460 |
| Korjoogteyn Iyo Qiimeyn | 12,100 | 22,920 |
| Kharashka Xulashada iyo Shaqo-qorista | 16,200 | 8,172 |
| Xayaysiinta Telefishanka iyo Wargeysyada | 52,610 | 121,459 |
| Rukumashada Wargeysyada iyo Majaladaha | 5,100 | 15,580 |
| | **3,085,067** | **2,249,225** |

***Qoraalka 15aad Ku-talagal ah***

Intii sannadka lagu guda jiray, Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxaa ku baxay kharash dhan $333,522 oo ah kharashka ku-talagalka ah.

| | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 333,522 | 226,307 |
| | **333,522** | **226,307** |

***Qoraalka 16aad Deeqaha la siiyo qaybaha kale ee Dowladda Guud.***

Deeqaha la siiyo Qaybaha kale ee Dowladda Guud ayaa la xiriira lacagaha loo wareejiyo heerarka hoose ee Dowladda DGJ. Sannad maaliyadeedkii FY2022 lacag gaareysa of $331,421 ($108,638 sannadkii 2021) ayaa loo wareejiyay Dowladda Hoose ee Kismaayo si loo fududeeyo hawlgalladooda iyo sidoo kale bixinta adeegyada muhiimka ah magaalada Kismaayo. Xafiisyada dowladda hoose waxay hawlgaliyaan habraacyo jaango'an oo iyaga u gaar ah oo ay ku maareeyaan maaliyaddan sida uu dhigayo heshiis ay la galeen MoFED.

***Qoraalka 17aad Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada***

Kharashaadka dheefaha/faa'iidooyinka bulshada waxay ka kooban yihiin Daaweyn caafimaad oo ku kacaysa $63,245 ($101,763 sannadkii 2021) oo la bixiyay si loogu daaweeyo shaqaalaha Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) ee dalka gudahiisa iyo dibeddiisa. Daaweynta caafimaad waxaa caadi ahaan la siiyaa hawlwadeennada amniga ee ku dhaawacmay gudashada waajibaadkooda shaqada qaran iyo siyaasiyiinta Dowladda.

***Qoraalka 18aad Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin.***

Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin waxay la xiriiraan deymaha DGJ (waxaa loola jeedaa deymahii hore iyo lacagaha aan wali la bixin ee lagu leeyahay DGJ tan iyo markii la aasaasay ilaa iyo hadda) $6,631,814 ayaa la bixiayay sannad maaliyadeedkii 2022 sida hoos lagu faahfaahiyay.

| | 202 USD | 202 USD |
|---|---|---|
| Deymaha DGJ | 6,631,814 | 3,363,419 |
| | **6,631,814** | **3,363,419** |

Sannadkii 2013 , DGJ waxay ganacsiyada degaanka ka heshay amaah dulsaar la'aan ah oo guud ahaan dhan $1,262,769. Maaliyadaha waxaa loo adeegsadey in lagu dhiso maamulka DGJ. Sannadkii 2019 intii lagu guda jirey muddadii doorashada iyo markii Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ay xannibaad safar ku soo rogtey ayaa DGJ waxay qaadatey deyn dulsaar la'aan ah oo guud ahaan dhan $5,140,621. Waxaa intaa dheer, sannad maaliyadeedkii 2021/ 2022 in DGJ ay qaadatay deyn dulsaar la'aan ah oo guud ahaan dhan 7,368,585, 7,274,675 oo sida loo kala hor xusay ah waxaanna sabab u ahaa caqabado miisaaniyadeed iyo in aan taageero miisaaniyadeed laga helin Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxaa la isku afgartey in DGJ ay dib-u-bixiso lacagaha deynta ah iyadoo u bixinaysa qaab lacag qawiman oo joogto ah (instalments) oo ku xiran helitaanka maaliyadaha. Shaxda hoose waxaa ku xusan jadwalka dhaqdhaqaaqa deyn bixinta.

| | | |
|---|---|---|
| Qaddarka Lacageed ee La Helay - 2013 | | 1,262,769 |
| Qaddarka Lacageed ee La Helay - 2019 | | 5,140,621 |
| Qaddarka Lacageed ee La Helay - 2021 | | 7,368,585 |
| Qaddarka Lacageed ee La Helay - 2022 | | 7,274,675 |
| **Wadarta La Helay** | | **21,046,651** |
| | | |
| **Dib-u-bixinnada** | | |
| FY2014 | 70,000 | |
| FY2015 | 483,108 | |
| FY2016 | 353,141 | |
| FY2017 | 152,521 | |
| FY2018 | 106,590 | |
| FY2019 | - | |
| FY2020 | 1,436,670 | |
| FY2021 | 3,363,419 | |
| FY2022 | 6,631,814 | |
| **Wadarta Dib-u-bixinnada** | | **12,597,264** |
| **Baaqiga harsan** | | **8,449,387** |

***Qoraalka 19aad Hantida Aan Maaliyadda Ahayn***

Wadarta guud ee Hanti Aan Maaliyad Ahayn oo ah $797,666 ($671,719 sannadkii 2021) ayaa loo baahnaa oo ka kooban kharashaadka ku baxay dayactirka Dhismayaal, soo iibsashada qalabka ICT, Saabaannada (qalab xafiiseed), Makiinnado, alaabooyin iyo rakibaadooda iyo agab loogu talagalay Dowladda.

Kala-dhigdhigista ballaaran ee soo iibsiga hantida aan maaliyadda ahayn ayaa waxaa loo faahfaahiyay sida soo socota.

### *Qoraalka 20aad Canshuuraha*

Lacag wadarteedu gaaraysa $20,702,188 oo canshuur ururin ah ayaa la qiyaasay in la soo ururiyo sannad maaliyadeedkii 2022; si kastaba ha ahaatee, ururin rumoowday oo ah $15,551,248 ayaa lagu guulaystey in la soo ururiyo. Tirada lacagta la ururiyey waxay u dhigantaa 75% ee dakhliga guud ee canshuurta sannadka la qiyaasey.

Hoos u dhaca canshuuraha dakhliga ee la ururiyey ayaa si toos ah ula xiriirta xilli doorasheedka 2022. Sidoo kale, hoos u dhaca dakhli ururinta Maamulka Dekedda Kismaayo ayaa waxaa sabab u ahaa hoos u dhaca muuqda ee alaabooyinka dalka loo soo dhoofiyay, qiimo iyo mug ahaabna intii lagu guda jirey muddada doorashadii 2022.

| | 2022 | | | 2021 |
|---|---|---|---|---|
| | Qiyaasta Kama-dambeysta ah | Ururinta Rumoowdey | Farqiga u dhaxeeya Qiyaasta Kama-dambeysta ah iyo Tan Rumowdey | Ururinta Rumowdey |
| Canshuurta Dakhliga Shakhsiga | 298,846 | 253,203 | | (45,643) |
| Canshuurta Mushaaraadka - Aan Dowli Ahayn | 653,771 | 708,305 | | 54, |
| Canshuurta Macaashka | 1,265,688 | 851,110 | | ( |
| Canshuurta Guryaha | 1,756,000 | 389,556 | | |
| Shatiyada Gawaarida iyo Darawalada | 251,499 | 41,400 | | |
| Shatiyada Ganacsiga & Xirfadaha | 120,472 | 103,100 | | |
| Canshuuraha kale ee laga qaado isticmaalka alaabooyinka iyo fasaxyada adeegsiga | 5,000 | 99 | | |
| Ujuurrooyinka Kaluumeysiga | 178,160 | | | |
| Ujuurrooyinka Ku Soo-Xirashada Dekedda | 850,472 | | | |
| Ujuurrooyinka Soo-degidda Diyaaradaha | 369,309 | | | |
| Ujuurrada Rakaabka Maxalliga ah | 548,871 | | | |
| Canshuurta Waddo-marista ee Dowlad-goboleedka | 1,310 | | | |
| Canshuurta Waddo-marista ee Magaalada | | | | |
| Diiwaangelinta NGO-yada Caalamiga ah | | | | |
| Diiwaangelinta NGO-yada Maxaliga ah | | | | |
| Diiwaangelinta Shirkadaha Ajnabiga ah | | | | |
| Diiwaangelinta Shirkadaha Maxalliga ah | | | | |
| Ujuurrooyinka meelaha baabuurta la dhigto | | | | |
| Ajuurooyinka Xoolaha | | | | |
| Canshuurta bixidda caalamiga ah | | | | |
| Ujuuradda Hagidda Diyaaradaha | | | | |
| Ujuurrada Maamulka Dhulka | | | | |
| Ujuurrada Maamulka Dhulka | | | | |
| Canshuuraha furdada - soo dejinta | | | | |
| Canshuuraha furdada - JAADKA | | | | |
| Canshuurta Alaabooyinka Dalka Laga Dhoofiyo Dakhliga C | | | | |

## *Qoraalka 21aad Deeqaha*

Guud ahaan deeqo gaaraya $19,646,772 ayaa la helay marka loo eego tirada miisaaniyadda loo dejiyay oo gaaraysay $28,240,065. Deeqaha ka imaanaya Dowladaha shisheeye iyo kuwa Ururrada Caalamiga ah looma helin sida la qiyaasay iyadoo farqiga ay inta badan sabab u ahayd qiyaasid siyaado ah maadaama rajo wanaagsan laga qabay in la heli doonno $1,385,905 RCRFIII, $632,543 Iskaashiga Caalamiga ah ee Waxbarashada iyo $3,177,673 oo ahayd lacag bixinteeda dib u dhacday oo ka imaanaysay sanduuqa deeq-bixiyaha ee Mashruuca Adkeysiga Magaalooyinka Soomaaliya (SURP II). Shaxda soo socota ayaa waxay soo bandhigaysaa kala-dhigdhigista faahfaahsan ee deeqaha kala duwan.

| | 2022 | | | 2021 |
|---|---|---|---|---|
| | **Qiyaasta Kama-dambeysta ah** | **Ururinta Rumoowdey** | **Farqiga u dhaxeeya Miisaaniyadda Kama Dambeysta ah iyo Ta Rumowday** | **Ururinta Rumoowdey** |
| **Nooca Canshuurta** | | | | |
| Deeqaha Hadda Ka Yimid Ururrada Caalamiga ah | 9,018,295 | 8,091,909 | 926,386 | 4,004,990 |
| Deeqaha ka yimid Dowladda Federaalka ee Soomaaliya | 19,211,223 | 11,545,371 | 7,665,853 | 4,850,030 |
| Deeqaha ka yimid Dowladda Hoose-Jubaland | 10,547 | 9,493 | 1,055 | 4,130 |
| **Wadarta Guud** | **28,240,065** | **19,646,772** | **(8,593,293)** | **8,859,149** |

Mashaariicda RCRF II/III iyo RCRFIII inta ugu badan waxay maalgeliyaan mushaaraadka shaqaalaha rayidka ah ee la shaqaaleeyay ka-dib markii la marsiiyay geeddi-socod aad u adag oo wakhti badan qaatay, DGJ uma qorin shaqaale xawaarihii markii hore la qorsheeyay taas oo horseeday in aan la isticmaalin maaliyado dhan $185,289 oo loogu talagalay shaqaalaha caafimaadka ee dumarka ah. Maaliyadda xoojinta maareynta kheyraadka oo dhan $ 79,330 lama adeegsan, maaliyadahan waxaa loo qoondeeyay kordhinta mushaaraadka waaxda EAFS, hawlwadeennada waaxda EAFS ayaa u guuray qaybtan saddexdii bilood ee ugu dambeysay ee sannadkii oo sabab u ah dib-u-dhaca dhammeysashada shahaaddada CIPFA, oo ahayd shuruud ku xiran mushaar kordhinta. Intii lagu guda jiray sannadka waxaa jiray maaliyad waxqabadka ku saleysan loogu talagalay- oo aan la isticmaalin oo dhan $ 160,000 iyo dib u dhac ku yimid heshiiska deeg bixinta, iyo dib-u-dhac ku yimid lacagta taageerada adeeg bixinta-MOH oo dhan $480,000, taas oo la sii gudbiyay sannad maaliyadeedka 2023.

### *Deeqaha ka yimid Ururrada Caalamiga ah*

| Deeqaha | Miisaaniydda La Dejiyay | La Bixiyay | Harsan |
|---|---|---|---|
| Danish Refugee Committee (DRC) | 19,060 | 18,100 | 960 |
| GIZ | 1,533,959 | 1,190,145 | 343,815 |
| ADRA | 75,949 | 62,820 | 13,129 |
| Gruppo Per Relazioni Transculturali | 17,500 | 17,500 | - |
| COOPERAZIONE INTERNAZIONALE | 7,022 | 7,022 | - |
| Norwegian Refugee Council | 216,905 | 154,294 | 62,611 |
| Save The Children | 191,957 | 187,542 | 4,415 |
| TROCAIRE | 10,000 | 10,000 | - |
| ANPPCAN (African Network for the Prevention and Pr | 22,373 | 22,373 | - |
| CARE INTERNATIONAL IN SOMALIA | 221,580 | 192,347 | 29,234 |
| Food and Agricuture organization | 625,026 | 437,046 | 187,980 |
| International Labour Organisation | 124,445 | 94,420 | 30,025 |
| United Nations Assistance Mission in Somalia | 1,000 | | 1,000 |
| United Nation Developmental Programme | 148,200 | 148,200 | - |
| UNICEF | 4,815,532 | 4,727,185 | 88,348 |
| UNHCR | 407,133 | 404,419 | 2,714 |
| UNHABITAT | 158,127 | 82,538 | 75,589 |
| Barnaamijka Cuntada Adduunka | 20,874 | 8,941 | 11,933 |
| United Nations Capital Development Fund | 401,653 | 327,017 | 74,636 |
| | **9,018,295** | **8,091,909** | **926,386** |

### *Deeqaha ka yimid Dowladda Federaalka ee Soomaaliya*

Deeqda guud ahaan gaareysa $19,221,771 oo ka timid Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ayaa la qiyaasay; haseyeeshee, deeqda rumoowday ee la helay waxay ahayd $11,554,863. Kala duwanaanshaha ayaa inta badan loo aaneynayaa dib-u-dhac ku yimid bixinta lacag dhan ($5,833,751) iyo $1,299,948) oo ka imaanayay sanduuqda deeqda ee mashruuca adkaysiga magaalooyinka ee Soomaaliya (SURP II) iyo mashruuca taageerada RCRF II/IIII oo sida loo kala hor xusay ah.

### *Qoraalka 22aad Dakhliga Kale*

Dakhliga kale ee la ururiyay waxaa uu ka kooban yahay iibka alaabada iyo canshuuraha kale ee Ganaaxyada iyo ciqaabaha oo dhan $4,312,991 marka loo eego bartilmaameedka oo dhan $3,221,669.

Lacag ururinnada sannadka ayaa waxay ahaayeen:

### *Qoraalka 23aad Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha*

Guud ahaan lacag gaareysa $18,140,859 ayaa lagu bixiyay gunnooyinka la siiyo shaqaalaha marka loo eego miisaaniyadda kama dambeyska ah oo dhan $24,087,966. Isticmaal yarida ayaa la xiriira Shaqaalaha qandaraaska ku shaqeeya, Shaqaalaha ujuurrada ku shaqeeya, Gunnada hoyga iyo Mushaaraadka la siiyo Wasiirada, waxaana sabab u ah dib-u-dhac ku yimid soo wareejinta maaliyadaha ka imaanayay DFS. Isticmaal yarida la xiriira shaqaalaha joogtada ah ayaa sabab u ahayd dib u dhac ku yimid qorista shaqaalaha rayidka ah.

| | 2022 | | | 2021 |
|---|---|---|---|---|
| | **Miisaaniyadda Kam Dambeysta ah** | **Rumowdey** | **Farqiga u dhaxeya Miisaaniyadda Iyo Tan Rumowdey** | **Rumowdey** |
| Shaqaalaha joogtada ah | 3,526,928 | 2,713,520 | 813,408 | 2,552,838 |
| Shaqaalaha qandaraaska ku shaqeeya | 1,925,468 | 1,483,435 | 442,033 | 1,718,511 |
| Shaqaalaha ujuurrada ku shaqeeya | 1,292,890 | 1,093,101 | 199,789 | 914,323 |
| Gunno | 6,000 | 200 | 5,800 | 59,100 |
| Ciidamada Ammaanka (Booliska, Nabadsugidda iyo Asluubta) | 6,686,727 | 3,942,250 | 2,744,477 | 3,399,750 |
| Mushaaraadka la siiyo Wasiirada iyo Magacaabisyada Sharciga ah | 495,110 | 127,323 | 367,788 | 308,812 |
| Mushaaraadka La Siiyo Siyaasiyiinta | 1,772,500 | 810,610 | 961,890 | 749,677 |
| Gunnada Hoyga | 2,570,808 | 2,417,599 | 153,209 | 2,228,900 |
| Gunnada Xirfadlayaasha | 1,309,009 | 1,199,553 | 109,456 | 309,283 |
| Gunnada Gaadiidka | 209,345 | 183,853 | 25,492 | 50,820 |
| Gunnooyinka Kale | - | - | - | 29,160 |
| Gunnooyinka Hawlgallada Amniga | 450,000 | 440,724 | 9,276 | 385,498 |
| Bixinta Raashiinka Joogtada ah | 2,441,760 | 2,405,429 | 36,332 | 1,191,389 |
| Raashiinka Maalinlaha | 1,401,420 | 1,323,263 | 78,157 | 1,152,670 |
| **Wadarta Gunnooyinka la siiyo Shaqaalaha** | **24,087,966** | **18,140,859** | **(5,947,106)** | **15,050,731** |

### *Qoraalka 24aad Isticmaalka Alaabada iyo Adeegyada*

Awoodda kharash bixinta Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya waxay ku koobnayd dakhli ururinta muddo waqti ah oo cayiman. Xaaladda alaabada iyo adeegyada, DGJ waxay kharash-gareysay lacag guud ahaan dhan $11,560.487 oo u dhiganta boqolkiiba 79 ee miisaaniyadda kama dambeysta ah. Kala duwanaanshaha loo qaybiyay hay'adaha oo dhan waxaa inta badan loo aaneynayaa caqabadaha ka jira dakhliga la heli karo ee rumooway.

| | 2022 | | | 2021 |
|---|---|---|---|---|
| | Miisaaniyadda Kama Dambeysta ah | Rumowdey | Farqiga u dhaxeeya Miisaaniyadda iyo Tan Rumowdey | Rumowdey |
| Safarka Gudaha | 645,166 | 329,849 | 315,318 | 420,544 |
| Safarka Dibedda | 331,830 | 188,705 | 143,125 | 270,926 |
| Shirarka maxalliga ah | 827,070 | 330,005 | 497,064 | 359,612 |
| Shirarka Dibedaha | 71,500 | 31,767 | 39,733 | 47,259 |
| Kharashaadka Xallinta Khilafaadka | 1,079,726 | 946,874 | 132,852 | 700,511 |
| Biyo | 2,078,369 | 1,966,606 | 111,764 | 69,890 |
| Koronto | 255,187 | 140,388 | 114,799 | 171,216 |
| Shidaalka Matoorka | 1,400 | - | 1,400 | 19,336 |
| Lacagaha telefoonka | 34,996 | 14,200 | 20,796 | 17,241 |
| Kharashaadka Telefoonnada Gacanta | 21,840 | 10,601 | 11,239 | 12,978 |
| Internet-ka | 290,980 | 210,374 | 80,606 | 179,958 |
| Lacagaha Dishka Satalaytka | 104,000 | 95,100 | 8,900 | 74,000 |
Qaddarada uu Baarlamaanka Jubaland u qoondeeyay hay'adaha miisaaniyadda waxaa la maareeyaa iyadoo loo marayo xisaab mideysan oo ay maamusho Waaxda Khasnadda. Qaddaradan ma kantaroolaan hay'adaha miisaaniyadda gaarka ah balse waxaa adeegsada isagoo ka wakiil ah maamulaha xisaabta mideysan (Waaxda khasnadda) marka la dhammeeyo dokumeentiga habboon iyo oggolaansho loo marayo Sistem-ka Macluumaadka Maamulka Maaliyadeed (FMIS). Qaddarka loo soo gudbiyay sida Qoondeymaha Maaliyadda Iskudhafan ee *Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Bixinta Lacagaha Caddaanka ah ee Hay'adda gaarka ah iyo Isbarbardhiga Miisaaniyadda* waa qaddarka Khasnadda ay soo deysay iyadoo loo marayo Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda oo loogu faa'iideynaya hay'adaha miisaaniyadda (qaddarka "yareynta ama isticmaalidda" doondeynta).

Qaddarka lacagta kama turjumaysa kaashka rumooway ee laga helay Khasnadda sababtoo ah hay'adaha miisaaniyadda ma kantaroolaan xisaab banki iyaga u gaar ah. Qaddarka lacagta waxay ka turjumaysaa "isha" maaliyadda loo isticmaalay in lagu bixiyo lacag-bixinnada.

Sharaxaaddan soo socota waa sharaxaad kooban oo ah dabciga isha dakhliga iyo kharashaadka lagu maalgeliyay qoondeymaha maaliyadda guud.

### *Qoraalka 2aad Canshuuraha*

Canshuuraha waxaa loola jeedaa dakhliga laga helayo canshuuraha la saaro mushaaraadka iyo cudduda shaqaalaha, alaabada iyo adeegyada, canshuur ururinta dowladda hoose (Canshuuraha kale) iyo canshuuraha la saaro wax-isdhaafsiyada ganacsiga caalamaiga ah. Hay'adaha qaar inkastoo loo arko in ay yihiin xarumaha kharashaadka sidoo kale waxay soosaareen qayb ka mid ah dakhliga guud ee la ururiyo. Haseyeeshee, tani macnaheeda ma aha in hay'adahaasi ay kantarooli karaan dakhliga ay ururiyaan balse waxay u xawilaan dakhliga ay ururiyaan Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda halkaas oo loogu adeegsado maalgelinta qoondeymaha hay'adaha miisaaniyadda.

Iyadoo canshuuraha qaar ay si toos ah u qaado Wasaaradda ay khuseyso xaaladaha intooda badan, Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED) ayaa ku meelaysa shaqaalahooda ka socda waaxda dakhliga oo loo xilsaarey dakhli ururinta rumoowday. Shaxdan soo socota waa kala-dhigdhigista qabashada canshuuraha ay ururiyeen hay'adaha khuseeya oo la barbardhigey qiyaasta miisaaniyada kama dambeysta ah oo kooban.

| Hay'adaha Miisaaniyadda | 2022<br>Qabashada Canshuurta La Diiwaangeliyay<br>USD | 2021<br>Qabashada Canshuurta La Diiwaangeliyay<br>USD |
|---|---|---|
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 6,420,004 | 4,663,326 |
| Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta | 990 | 1,770 |
| Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga | 17,000 | 39,800 |
| Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha | 67,680 | 30,960 |
| Maamulka Garoonka Diyaaradaha ee Kismaayo | - | 425,469 |
| Maamulka Dekadda Kismaayo | - | 5,809,188 |
| Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda | - | 20,000 |
| Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada | 1,673,725 | 769,061 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | 424,976 | 420,757 |
| Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta | 600 | - |
| Wasaaradda Gaadiidka iyo Dekedaha | 6,946,273 | 2,748,085 |
| | **15,551,247** | **14,928,416** |

## *Qoraalka 3aad Deeqaha*

Deeqaha ka yimaada ururrada caalamiga ah iyo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxaa la soo xawilaa iyagoo la soo marsiinaya Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) sidaa daraadeedna waxaa lagu diiwaangeliyaa hoosta Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED). Xaaladaha qaarkood, deeq-bixiyeyaasha waxaa ay maalgelin karaan mashaariic wasaaradeed oo si shaki la'aan ah loogu qaabeeyay oo ayna hirgelisay hay'ad la doortey. Mashruuca noocaas ah ayaa hoos imaan doona hay'adaas gaarka ah inkastoo maaliyadaha la dhigay Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA).

| Hay'adda | Deeq-bixiye | 2022 USD |
|---|---|---|
| Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | GIZ | 176,637 |
| Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | COOPERAZIONE INT. | 3,000 |
| Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | FAO | 222,747 |
| Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | GIZ | 23,650 |
| Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | ADRA | 58,050 |
| Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | FGS | 185,568 |
| Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | CARE | 95,090 |
| Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | UNICEF | 76,150 |
| Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | Barnaamijka Cuntada Adduunka | 8,941 |
| Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta | GIZ | 236,003 |
| Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta | ADRA | 4,770 |
| Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta | FGS | 6,540 |
| Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta | UNICEF | 2,182,242 |
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | FGS | 9,831,572 |
| Wasaaradda Caafimaadka | GIZ | 163,785 |
| Wasaaradda Caafimaadka | Gruppo Per Relazioni | 17,500 |
| Wasaaradda Caafimaadka | Norwegian Refugee Council | 46,790 |
| Wasaaradda Caafimaadka | Save The Children | 150,542 |
| Wasaaradda Caafimaadka | FAO | 12,882 |
| Wasaaradda Caafimaadka | UNICEF | 2,225,286 |
| Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta | UNDP | 73,200 |
| Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga | GIZ | 74,768 |
| Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga | TROCAIRE | 5,000 |
| Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga | UNICEF | 27,695 |
| Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha | GIZ | 5,951 |
| Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka | GIZ | 43,074 |
| Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka | CARE | 17,938 |
| Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka | UNICEF | 100,493 |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha | DRC | 18,100 |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha | COOPERAZIONE INT | 4,022 |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha | Norwegian Refugee Council | 84,180 |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha | FAO | 79,960 |
| Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda | FAO | 85,704 |
| Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda | FGS | 154,677 |
| Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga | ANPPCAN | 22,373 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | TSA - DGJ | 9,493 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | GIZ | 166,952 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | FGS | 1,307,013 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | CARE | 79,319 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | ILO | 45,440 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | UNICEF | 92,800 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | UNHCR | 404,419 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | UNHABITAT | 56,855 |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | UNCDF | 327,017 |
| Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada | GIZ | 127,647 |
| Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada | FAO | 35,753 |
| Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta | GIZ | 126,678 |
| Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta | ILO | 48,980 |
| Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta | UNHABITAT | 25,683 |
| Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha | NRC | 23,324 |
| Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha | Save The Children | 12,000 |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | GIZ | 44,999 |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | Save The Children | 25,000 |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | FGS | 60,000 |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | TROCAIRE | 5,000 |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | UNDP | 75,000 |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | UNICEF | 22,520 |
| | | **19,646,772** |

Dakhli deeq ah oo gaaraya $28,085,388 ayaa miisaaniyadiisa la dejiyay intii lagu guda jiray muddada ka warbixinta ee sannad maaliyadeedka FY2022 Haseyeeshee,
$19,646,772 ayaa la helay, waxaanna jira hoos u dhac dhan $8,593,293 marka loo eego qiyaasta sannadkii, waxaanna sabab u ah ahaa dib-u-eegis rajo badan laga qabay intii lagu guda jiray sannadkii deeqaha laga filayay Ururrada caalamiga ah , iyo
$7,665,853 waxaa sabab u ahaa in Dowladda Federaalka Soomaaliya ay soo daahisay soo diridda maaliyadda sanduuqa mashruuca adkeysiga magaalooyinka (SURP II), RCRF II/III/III.

Inkastoo maaliyadaha ay ku soo dhaceen Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda oo ayna maamusho Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED), hawlaha mashruuca xaaladaha intooda badan waxaa loo qoondeeyay hawlaha laga hirgeliyay hay’adaha kale.

## *Qoraalka 4aad Dakhliga Kale*

Iibka alaabada iyo adeegyada wuxuu ka kooban yahay dakhliga iyo canshuuraha kale ee lagu soo rogo Ganaaxyada iyo ciqaabaha ee ka soo xarooda dokumeentiga sharciga ah ee ay DGJ siiso muwaadiniinteeda kuwaas oo lagama maarmaan ah. Sannad maaliyadeedkii 2022, Wasaaradaha iyo Hay'adaha waxay guud ahaan ururiyeen $4,312,991. DGJ waxay adeegyada qaar ay siisaa dadka deggan degaanka iyadoo ka qaadeysa ujro. Sannadkii 2022, lacag ururin qaareysa $262880 iyo $157523 ayaa laga helay ama laga diiwaangeliyay diiwaangelinnada Taarikada gaadiidka iyo buugga diiwaanka gaadiidka (logbook) sida ay isugu xigaan. Si la mid ah, ujuurooyinka Dal-ku-galka, ujuurrada Aqoonsiga shakhsiga, ujuurrooyinka Warqadda dhalashada, Ujuurrooyinka Warqadda dhulka, Qoondeynta dhulka, Ujuurooyinka nootaayada, ujuurrooyinka Dokumentiyada Codsiga Qandaraaska, iyo Ujuurrooyinka baarista waxyaabaha dalka loo soo dhoofiyay ayaa la qaaday ($157,523, $44,980, $77,594, $35,875, $1,323,361$1,013,394, $1,200, $2,700 iyo $92,050
oo sida loo kala hor xusay ah).

Ujuurrooyinka Qabashada Dacwadaha Maxkamadda oo dhan $52,389 ayaa waxaa qaaday Wasaaradda Cadaaladda, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta. Ujuurrooyinka qabashada dacwadaha maxkamadda waxay la xiriiraan khidmadaha laga helo furitaanka galalka dacwadaha ee Maxkamadda Degmada ee Kismaayo.

## *Qoraalka 5aad Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha*

Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha waxay la xiriiraan dhammaan mushaaraadka iyo ujuurooyinka oo ay ka mid yihiin lacag-bixinta nooc kale ah. Mushaaraadka la siiyo shaqaalaha rayidka ah iyo ciidanka amniga waxay ka kooban yihiin qaybta ugu muhiimsan ee gunnooyinka la siiyo shaqaalaha. Mashruuca kharashaadka soo noqnoqda iyo maalgelinta dib-u-habeynta (RCRF II/III/III) waxaa uu bixiyaa mushaaraadka shaqaalaha joogtada ah ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) ee shaqada ugu soo qorey si lagu soo tartamey Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah. Intii lagu guda jiray muddada ka warbixinta, mashruuca RCRF II/III/III waxaa uu bixiyay mushaaraadka Hay’adahan soo socda.

| SR. Magaca MDAs | 2022 Tirada Shaqaalaha | 2022 Mushaarka Aasaasiga ah | 2021 Tirada Shaqaalaha | 2021 Mushaarka Aasaasiga ah |
|---|---|---|---|---|
| 1 Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | 15 | 6,917 | 13 | 7,240 |
| 2 Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | 413 | 73,552 | 357 | 51,744 |
| 3 Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta | 8 | 4,165 | 8 | 4,165 |
| 4 Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 43 | 22,079 | 46 | 21,474 |
| 5 Wasaaradda Caafimaadka | 107 | 23,105 | 120 | 24,298 |
| 6 Wasaaradda Isgaarsiinta, Boostada, iyo Tiknoolijiyadda | 2 | 1,787 | 7 | 4,079 |
| 7 Wasaaradda Amniga Gudaha | 4 | 2,087 | 5 | 2,589 |
| 8 Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta | 10 | 4,344 | 10 | 4,344 |
| 9 Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga | 9 | 4,366 | 9 | 4,366 |
| 10 Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha | 6 | 3,040 | 6 | 3,040 |
| 11 Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka | 9 | 4,680 | 10 | 5,182 |
| 12 Wasaaradda Madaxtooyada | 41 | 13,399 | 46 | 16,812 |
| 13 Xafiiska Hantidhowrka Guud | 9 | 4,013 | 9 | 4,013 |
| 14 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah | 23 | 7,757 | 21 | 7,656 |
| 15 Wasaaradda Xannaanada Xoolaha | 6 | 2,739 | 6 | 2,739 |
| 16 Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda | 4 | 2,439 | 5 | 2,589 |
| 17 Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga | 8 | 3,864 | 8 | 3,864 |
| 18 Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada | 20 | 8,433 | 22 | 9,437 |
| 19 Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | 8 | 4,229 | 6 | 3,040 |
| 20 Wasaaradda Degaanka iyo Dalxiiska | 5 | 2,589 | 5 | 2,589 |
| 21 Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta | 10 | 4,400 | 11 | 4,550 |
| 22 Guddiga Adeegga Garsoorka. | 24 | 8,870 | 24 | 8,870 |
| 24 Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha | 4 | 2,624 | 4 | 2,624 |
| 25 Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha | 6 | 3,577 | - | - |
| 26 Wasaaradda Gaadiidka iyo Dekedaha | 1 | 1,285 | - | - |
| 27 Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta | 1 | 1,285 | - | - |
| 28 Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | 2 | 2,088 | 1 | 1,285 |
| | **798** | **223,713** | **759** | **202,589** |

Geeddi-socodka shaqo-qorista lagu tartamo waa shuruuda aasaasiga ah ee mashruucan. Haysashada shaqo-qoris laga Taxadarey, awoodid la'aanta Guddiga shaqaalaha rayidka ah kordhinta geeddi-socodka shaqo-qorista iyo isbedbedelka siyaasadeed ayaa xaddiday qaadashada Mashruuca RCRF II/III si looga soo baxo filashooyinka miisaaniydooda la dejiyay.

## *Qoraalka 6aad Isticmaalka Alaabada iyo Adeegyada*

Awoodda Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) ay ku bixinayso kharashaadkeedda hawlaha la xiriira, adeegyada iyo alaabada iyo kharashaadka kale ee kala duwan waxaa go'aamiya awoodda lagu ururinayo ama lagu helayo dakhli ku filan fulinta miisaaniyadeeda. Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) ma laha tas-hiilaad deymeed sidaa daraadeed iyadoo sabab u ah caqabadahan aasaasiga ah Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) waxay hortebinta mudnaanta koowaad siisay oo ayna ku bixisay boqolkiiba 71% dakhliga la heli karo fulinta miisaaniyadaha hay'adaha. Shaxdan soo socota waa heerka fulinta miisaaniyadda hawlgallada Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) oo kooban. Ogow in shaxda ay keliya soo koobeysaa miisaaniyadda hawlgallada.

| | Miisaaniyadda Kama Dambeysta ah 2022 | Fulinta 2022 | Fulinta % |
|---|---|---|---|
| Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka | 348,769 | 260,445 | 75% |
| Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | 814,579 | 271,764 | 33% |
| Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta | 2,295,999 | 2,186,704 | 95% |
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 4,749,107 | 4,461,525 | 94% |
| Wasaaradda Caafimaadka | 2,393,065 | 1,798,926 | 75% |
| Wasaaradda Isgaarsiinta, Boostada iyo Tiknoolijiyadda | 23,500 | 500 | 2% |
| Wasaaradda Amniga Gudaha | 295,000 | 249,662 | 85% |
| Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta | 38,600 | 3,429 | 9% |
| Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga | 133,732 | 87,057 | 65% |
| Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha | 22,863 | 8,995 | 39% |
| Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka | 111,516 | 62,502 | 56% |
| Wasaaradda Madaxtooyada | 679,000 | 630,480 | 93% |
| Xafiiska Hantidhowrka Guud | 50,456 | 25,436 | 50% |
| Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah | 52,064 | 30,184 | 58% |
| Baarlamaanka Jubaland | 216,300 | 595 | 0% |
| Wasaaradda Xannaanada Xoolaha | 130,967 | 66,754 | 51% |
| Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda | 66,556 | 44,384 | 67% |
| Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga | 34,593 | 14,593 | 42% |
| Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada | 149,160 | 70,035 | 47% |
| Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka | 1,219,749 | 843,640 | 69% |
| Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada | 66,756 | 36,501 | 55% |
| Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guryeynta | 183,793 | 140,503 | 76% |
| Guddiga Adeegga Garsoorka. | 9,500 | 1,000 | 11% |
| Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha | 43,894 | 21,065 | 48% |
| Guddiga Xuduudaha iyo Doorashooyinka Jubaland | 14,000 | - | 0% |
| Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud | 14,000 | - | 0% |
| Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha | 182,310 | 102,200 | 56% |
| Wasaaradda Gaadiidka iyo Dekedaha | 51,000 | 3,180 | 6% |
| Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta | 10,500 | - | 0% |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | 168,664 | 138,429 | 82% |
| | 14,569,990 | 11,560,487 | 79% |

## *Qoraalka 7aad Deeqaha la siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud*

Qaybaha kale ee dowladda guud waxaa loola jeedaa dowladaha heerka hoose sida dowladaha hoose ee magaalooyinka. Dowladda Hoose ee Kismaayo waa dowladda hoose ee keliya ka dhisan Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya oo hawlgelisa geeddi-socodka dakhli ururinta iyo kharashaadka. Dowladda hoose waxay ka ururisaa canshuuro iyada u gaar ah sistem-ka gaadiidka dadweynaha iyo ganacsiyada kale ee ku dhaqdhaqaaqa Kismaayo gudaheeda. Heshiiska u dhaxeeya Wasaaradda Maaliyadda iyo Dowladda Hoose ee Kismaayo, wuxuu dhigayaa in dhammaan dakhliga laga ururiyo dowladda heerka hoose in la dhigo Xisaabta Mideysan ee Waaxda Dowladda iyo in dowladda hoose soo codsato kharashaadkeeda iyadoo adeegsanaysa habraacyada oggolaanshaha jaango'an ee Wasaaradda.

Dowladda hoose waxay ku joogteynaysaa dokumeentiyo iyada u degsan iyo habraacyo ganacsi jaango'an hawlgalkeeda oo ka duwan Wasaaradda.

### *Qoraalka 8aad Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada ee shaqada*

Dheefaha/faa'iidooyinka bulshada ee shaqo-siiyaha waxay inta badan ka kooban yihiin daaweynta caafimaad ee la siiyo shaqaalaha DGJ. Qorshaha ma ahan mid rasmi ah balse mararka qaar waxaa la siiyaa shaqaalaha loo tixgeliyo in ay u baahan yihin daaweyn caafimaad. Daaweynta caafimaad waxaa lagu bixiyaa hay'adaha oo dhan. Intii sannadka lagu guda jiray hay'adahan soo socda ayaa waxaa la siiyay daaweyn caafimaad.

### *Qoraalka 9aad Xawilaadaha aan meel kale lagu soocin.*

Xawilaadaha ama wareejinnada aan meel kale lagu sheegin ee guud ahaan dhan $6,631,814 ee la xiriira deymha DGJ waa lacag-bixinnada loo diray kuwa deymaha ku leh DGJ waxayna la xiriiraan deymihii ku baxay dhismaha Maamulkii ku-meelgaarka ahaa ee Jubaland iyo doorashadii iyo abaarahii 2022. Xawilaadaha ama wareejinnada aan meel kale lagu sheegin ayaa loola wadaagay hay'adaha sida soo socota:

| Hay'adda Miisaaniyadda | 2022<br>USD | 2021<br>USD |
|---|---|---|
| Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha | 6,631,814 | 3,068,580 |
| Wasaaradda Madaxtooyada | - | 294,840 |
| Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka | - | 150,000 |
| | **6,631,814** | **3,513,419** |

### *Qoraalka 10aad Hantida Aan Maaliyadda Ahayn*

Hantida aan maaliyadda ahayn waxaa ay ka kooban tahay hantida ay soo iibsadeen hay'adaha si ay u socodsiiyaan hawlgalladooda shaqo waxaanna ka mid ah hantida sida gawaarida, Makiinnadaha iyo Qalab aan meel kale lagu qeexin, Alaabada iyo rakibaadooda, Qalabka macluumaadka, kombiyuutarada, iyo isgaarsiinta (ICT), Dhismaha Waddo iyo dhismayaasha aan degaanka ahayn ee loogu talagalay Wasaaradaha dhisan. Habeynta hore ee hay'adaha dhowaan la sameeyay ayaa damaannad qaaday xoog-saaridda soo iibsashada hantida sida alaabta, qalab xafiiseedka iyo baabuur.

Intii lagu guda jiray muddada warbixinta, isugeyn lacag dhan $797,666 ayaa loo bixiyay hantida aan maaliyadda ahayn, taas oo u dhigmaysa boqolkiiba 11% ee miisaaniyadda la qiyaasay. Hay'adaha waxay awoodi waayeen in ay ka faa'iideystaan oo ay adeegsadaan qoondeynta miisaaniyadda iyadoo ay sabab u yahay dib-u-dhac ku yimid bixinta maaliyadaha deeq-bixiyayaasha.

[redacted]

[redacted]

[redacted]

[redacted]

[redacted]

[redacted]

| DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA (DGJ) |
|---|
| WARQADDA MAAMULKA EE SANNADKII DHAMMAADEY 31-KA DISEMBAR 2022 |

**24-ka Sebtembar 2023**

## TUSMADA

**1 HORDHAC** .......... 4

**2 WARQADDA MAAMULKA OO FAAHFAAHSAN** .......... 6

**3 LA-SOCOSHADA/DABAGALKA WAXYAABIHII LAGU OGGAADAY BAARITAANKII HORE** ..... 35

**4 LIFAAQYO** .......... 35

**LIFAAQA 1 (A): QABASHOOYIN AAN LA TAAGEERIN** .......... 39

**LIFAAQA 2AAD): FARQIYADA U DHAXEEYA QADDARADA LA DIIWAANGELIYAY SIDA KU CAD NIDAAMKA MAAREYNTA DAKHLIGA (RMS) IYO BISAN FMIS** ...........

**LIFAAQA 3AAD: LA'AANTA DOKUMENTIYO TAAGEERAYA LACAG-BIXINNADA** ..........

**LIFAAQA 4AAD: LACAG-BIXINNO AAN LAHAYN DOKUMENTIYO TAAGEERAYA OO KU FILAN** .......

**LIFAAQA 5AAD: LIIDASHADA GEEDDI-SOCODKA WAX-SOO-IIBSIGA** ..........

**EREYO LA SOO GAABIYEY**

| Erayo La Isku Gaabiyay | Ereyada oo Kaamil ah |
|---|---|
| DRP | Qorshaha Ka Soo Kabashada Musiibooyinka |
| DSA | Gunnada quud maalmeedka |
| FMIS | Nidaamka Macluumaadka Maareynta Maaliyadda |
| FMS | Dowladda Xubinta ka ah Federaalka /Federal Member State |
| FS | Bayaannada Maaliyadeed |
| FY | Sannad Maaliyadeed |
| ICT | Tiknoolajiyadda Macluumaadka iyo War-isgaarsiinta |
| ISSAI | Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay’adaha Hanti-dhowrka Sare |
| IPSAS | Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda |
| DGJ | Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya |
| MDA | Wasaaradaha, Waaxdaha iyo Hay'adaha– |
| MOFED DGJ | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya |
| MPs | Xubnaha Baarlamaanka |
| XHDG | Xafiiska Hantidhowrka Guud |
| PFM | Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha |
| PV | Fawjar Lacag-bixineed |
| RCC | Xarunta Dakhli Ururinta |
| REG | Xeer-nidaamiye |
| RMS | Nidaamka Maareynta Dakhliga |
| RV | Fawjarka Dakhliga |
| SAS | Shirkadda Safari Aviation Service Limited |
| SOMSAD | Nidaamka Casriga ah ee Somalia Single Administrative Document |
| TSA | Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda |
| USD | Doolarka Mareykanka |

Wasiirka Maaliyadda,
Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ)
Kismaayo.

Mudane,

**ARRIMAHA SOO IFBAXAY INTII LAGU GUDO JIRAY BAARISTA SANNADKII DHAMMAADEY 31KA DISMEBAR 2022**

Waxaannu dhowaan soo gebogabeynay baaritaankeenna Bayaannada Maaliyadeed ee Wasaaradaha iyo Tan Iskudhafan ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya sannadkii dhammaadey 31-ka Disembar 2022 taas oo aan u sameynay si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare ee loo yaqaanno *International Standards of Supreme Audit Institutions* ("ISSAI"). Jaangooyooyinkaasi waxay u baahan yihiin in aan qorsheyno oo aan sameyno baaritaanka si aan u helno hubaal caqligal ah oo ah in bayaannada maaliyadeed ee sannadlaha ah in aysan lahayn khalad la taaban karo laakiinse aan loogu talagalin ujeeddo lagu muujinayo ra'yi ku saabsan taabogalnimada kantaroolka gudaha ee hay'adda. Baaritaanka ayaa la sameeyaa si uu noogu suurageliyo in aan sameyno oo aan dhiibanno ra'yigeenna ku saabsan bayaannada maaliyadeed ee uu diyaariyay maamulka iyadoo uu kormeerayo Wasiirka Maaliyadda. Baarista bayaannada maaliyadeed kama xayuubinayso Wasaaradaha mas'uuliyadahooda. Si kastaba ha ahaate, iyadoo la raacayo hab-dhaqankeenna caadiga ah, waxaannu warbixintan u qornaa si aan kuu dareensiinno arrimo gaar ah oo aan aqoonsannay intii aan ku guda jirnay baaritaankeenna. Arrimahaasi waxay ku qoran yihiin warbixinta halkan ku lifaaqan.

Arrimaha lagu soo hadal qaaday warbixintan waa keliya kuwo ina soo jiitay intii lagu guda jiray baaristeenna, lagama maarmaanna ma ahan in ay yihiin bayaanka ballaaran ee dhammaan liidashooyinka jira ama dhammaan sii wanaajinta la sameyn karo. Soo-jeedimada sii wanaajinta waa in aad adigu qiimeysaa saamayntooda oo dhammeystiran ka hor inta aanan la hirgelin.

Jawaabaha maamulka waa in la bixiyaa iyadoo loo marayo isuduwidda Wasaaradda Maaliyadda. Waxaannu jeclaan lahayn in aan maamulka iyo hawlwadeennadaba ugu mahadcelinno caawimaadooda iyo wada-shaqeyntii ay nala yeesheen intii ay baaristu socotay waxaannu ku farxi lahayn in aan bixinno caddeyn kasta ee aad uga baahan karto arrimaha ka soo baxaya warbixintan.

Mahadsanadiin,

**Bashiir Maxamed Bahale**

**Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya,**
**Kismaayo**
**Soomaaliya**

1

### 1.1 Kala-horreysiinta

Si loo fududeeyo la-socodka iyo si loogu suurageliyo maamulka in ay si taabogal ah diiradda u saaraan wax-ka-qabashada arrimaha ku jira warbixinteenna, waxaannu u kala-soocnay arrimaha ka soo ifbaxaya baaristeenna sida ay u kala muhiimsan yihiin. “Sare”, “Dhexe” iyo “Hoose”.

Marka mudnaanaha arrimaha loo kala soocayo “Sare”, “Dhexe” iyo “Hoose” ISSAIs waxay nooga baahan yihiin in aynu tixgelinno muhiimadda gaarka ah ee arrin laga hadlayo.

Waxyaabihii lagu ogaadey baarista waxaanu mudnaan u kala siinnay sidan soo socota:

| | |
|---|---|
| **Sare** | Tallaabooyinka lagu taliyay waa in si degdeg ah loo hirgeliyaa sababta oo ah waxaa ay ku saabsan yihiin liidashooyin mug leh |
| **Dhexe** | Sii wanaajinta waa in la tixgeliyaa muddo-dhexe. |
| **Hoose** | Soo-jeedimada waxay la xiriirraan hababka xil-gudashada ugu wanaagsan waxaanna la hirgelin karaa muddo-dheer. |

# 2 WARQADDA MAAMULKA OO FAAHFAAHSAN

## 2.1 SOO-KOOBIDDA U-FIIRSASHADA

| Tix | Waxyaabahii la soo ogaadey oo kooban | Mudnaanta | Saameynta maaliyadeed oo US$ ah* |
|---|---|---|---|
| 1 | Miisaaniyad badan oo aan la isticmaalin | Dhexe | - |
| 2 | Liidashooyin ka jira hannaanka diiwaangelinta iyo maareynta dakhliga | Sare | 902,700.00 |
| 3 | In aan la wada adeegsan Nidaamka Maareynta Dakhliga | Sare | - |
| 4 | Liidashooyin ka jira Dekedda Kismaayo | Sare | - |
| 5 | Daldaloollo ka jira Xarunta Dakhli Ururinta | Sare | - |
| 6 | Sii wanaajinta iswaafajinnada bankiyada | Sare | - |
| 7 | Diiwaan-hayn iyo kaydin liita | Dhexe | - |
| 8 | Liidasho ka jirta habraacyada iyo maareynta deynta | Sare | - |
| 9 | In aanu jirin dokumentiyo taageeraya lacag-bixinnada | Sare | 2,737,150 |
| 10 | Lacag-bixinno aan lahayn dokumentiyo taageeraya oo ku filan | Sare | 3,742,005 |
| 11 | Kala-soocidda qabashada iyo kharashaadka oo khaldan | Dhexe | - |
| 12 | Ka-gaabinta dokumentiyada taageerada in lagu shaabbadeeyo "LA BIXIYEY" | Dhexe | - |
| 13 | U hoggaansamid la'aanta Xeer-nidaamiyaha wax-soo-iibsiga | Sare | - |
| 14 | Liidashooyin ka jira maareynta hantida iyo Hannaanka Maareynta Hantida | Sare | - |
| 15 | Daldaloollo ka jira Waajibaadka Shaqo ee Hantidhowka Gudaha | Dhexe | - |
| 16 | Dib-u-dhaca hirgelinta soo-jeedimada baaristii sannadkii hore | Dhexe | - |
| **Wasarta Guud ee Saameynta Maaliyadeed** | | | **6,479,155** |

*Saameynta maaliyadeed (USD)* - Saameyntan waa kaliya saameynta maaliyadeed ee la qiyaasay, saameynta dhabta ahna waxaa u badan tahay in ay intan aad uga badan tahay*

## 2.2 WAXYAABAHII LA OGAADEY IYO SOO-JEEDIMADA OO FAAHFAAHSAN

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 1** | **Cinwaanka:** Miisaaniyado aan caqligal ahayn |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Waxyaabaha ugu muhiimsan ee loo baahan yahay si loo hubiyo in la helo faylal maaliyadeed sax ah oo dhammeystiran waa siyaasado iyo habraacyo kantarool maaliyadeed oo taabogal ah. Kantarool maaliyadeed oo muhiim ah waa saadaalin caqligal ah oo ku saleysan hawl maalmeedka, awoodaha dakhilga ururinta hadda iyo kuwa suuragalka ah ee dowladda iyo hawlgallada dowlada ee hadda

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Miisaaniyadda sannad maaliyadeedkii 2022 la xaqiijiyay waxay ahayd $37.5 milyan marka loo eego miisaaniyadda asalka oo $53.3 milyan ahayd. Boqolkiiba soddon ee miisaaniyadda 2022 ee dowlad-goboleedka lama xaqiijin.

**Waxyaabaha ka dhalan kara**

Tani waxay muujinaysaa awoodaha saadaalinta maaliyadda ee liita ee Wasaaradda Maaliyadda. Falanqeynta isbeddellada iyo isbarbardhiga miisaaniyadda iyo tan rumowday oo bil kasta iyo saddex bilood kastaba la sameeyo waxay ahayd in ay ka yimaadaan tallaabo lagu saxayo.

**Muhiimadda**

Dhexe

**Soo-jeedimo:**

Bilowga horeba hannaanka miisaaniyad dejinta dowladda waa in uu noqdaa mid caqligal ah oo lagu saleeyay siyaasado cad oo si fiican loo soo baarey kuwaas oo ka turjumaya awoodaha dakhli ururinta dowladda. Wasaaradda waa in ay sidoo kale si dhow ula socotaa waxqabadka dowlad-goboleedka ee ku saleysan bil kasta ama saddexdii biloodba mar sidaa daraadeed miisaaniyadaha dheeraadka ah ayaa la diyaarin karaa si ay uga turjumaan xaqiiqooyinka dhulka ka jira.

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

**Faallooyinkii ay ka bixisey MOFEDED - DGJ**:

Falanqaynta miisaaniyadda iyo korjoogteyn ayaa la sameyn doonnaa, miisaaniyadaha dheeraadkana waxaa mustaqbalka loo diyaarin doonnaa hadba sida loogu baahdo.

**Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**

**Waaxda miisaaniyadda 2024**

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 2** | **Cinwaanka:** Liidashooyin ka jira hannaanka diiwaangelinta iyo maareynta dakhliga |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Hannaanka Dakhliga ayaa muujinaya qaybo ka mid ah Buugga Habraacyada Dakhliga/Kharashaadka iyo Maareynta Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya oo Dhigaya "Dakhli ururinta sida ku cad sharciga/wareegtada dakhliga waxaa sameeya midkood canshuur qaadayaal dowladda u shaqeeya ama wakiilo canshuur ururinta awood buuxda u leh oo ka wakiil ah dowladda, ama canshuur-bixiyaha ayaa si toos ah uga bixin kara xisaabta bangiga ee Xisaabta Mideysan ee Khasnadda (TSA) ama Daaqadda lacag bixinta ee Wasaaradda Maaliyadda. Canshuurta ay qaadaan canshuur-qaadayaasha ama wakiilada had iyo jeer waxaa taageera canshuur qaadaha/wakiilka oo bixinaya rasiidka dakhliga ee la oggol yahay, oo tiro ahaanna la kantoroolo. Canshuur-qaadayaasha waa in ay lacagta dhigaan ama ku shubaan xisaabta bankiga.

Dakhliga waxaa lagu diiwaangeliyaa hannaanka FMIS iyada oo la adeesanayo summadaha dakhliga ee ku habboon"

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Waxaan dib-u-eegnay rasiidyada dakhliga ee lagu diiwaangeliyay Bayaannada Maaliyadeed waxaanna oggaaney liidashooyinkan soo socda in ay jiraan:

Qabashooyinka aan la taageerin; a) Nuqullada rasiidyada dakhliga ee asalka ah ee shacabka la siiyo ee loogu talagalay lacag-bixinnada adeegyada Dowladda ay bixiso lama bixin oo la xiriira rasiidyada gudaha laga soosaarey oo qaddarkoodu dhan yahay **USD 902,700.00** marka la eego wadarta guud ee rasiidyada oo dhan **USD 18,772,916** ee looga soo warbixiyay Bayaannada Maaliyadeed. Tani waxay u dhigantaa 5% guud ahaan dakhliyada gudaha laga soo saarey sida hoos lagu faahfaahiyay.

| **Taariikhda** | **Lambarka Dokumentiga** | **Qaddarka** |
|---|---|---|
| 1/17/2022 | 22/00000371 RV | 554,700.00 |
| 2/12/2022 | 22/00000923 RV | 100,000.00 |
| 9/14/2022 | 22/00005307 RV | 140,000.00 |
| 9/20/2022 | 22/00005482 RV | 108,000.00 |
| **Wadarta Qabashada** | | **902,700.00** |

Waxaan aragney xaalado rasiidyada si khalad oo loo kala soocay oo loogu diiwaangeliyay hoosta koodhadh xisaabeed kala duwan. Tusaale ahaan lambarka fawjarka rasiidka 22/00002940 RV ee ay lacagtiisu dhan tahay  $400,000 wuxuu hoos imaanayaa dekadda, haseyeeshee rasiidkan waxaa laga helay canshuuraha laga ururiyay guryaha.

**Waxyaabaha ka dhalan kara**

Liidashada habraacyada dakhli ururinta ayaa keeni karta in ay wax ka lumaan maaliyadaha, xisaabaadka canshuurta la ururiyey oo aan dad ku filnayn, warbixin maaliyadeed oo aan sax ahayn iyo/ama khaladaad kala-soocid suuragal ah in ay ku jiraan bayaanka maaliyadeed.
Dokumentiga isha dakhliga ee asalka la'aan waxay yareynaysaa awoodda lagu xaqiijinayo saxnaanta qaddarada dakhliga iyo qiimeynta taabogalnimada habraacyada kantaroolka ee lagu dabakho macaamulaadka.

**Saameynta Maaliyadeed: USD 902,700.00**

**Muhiimadda**

Sare

**Soo-jeedimo:**

Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED) waa in ay xaqiijisaa in dhammaan dakhliga si sax ah loogu taageero nuqullada asalka ah ee rasiidyada dakhliga ee DGJ. Waxaa intaa dheer, in dhammaan dakhliga la ururiyay ay tahay in la waafajiyo buugaagta rasiidka iyo bankiga.
Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay hubisaa dakhliga la diiwaangeliyay in la waafajiyo diiwaannada diiwaangelinta kale ee ay gacanta ku hayaan hay'adaha kala duwan si looga fogaado khaladaadka kala-soocidda rasiidyada

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:** **Ma Waafaqsanin**

**Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ**:

Qodobbada Muhiimka ah:

Iswaafajinta iyo Diiwaangelinta Dakhliga oo Sax ah: dhammaan dakhliyada waxaa si sax ah loogu diiwaangeliyay oo la waafajiyay rasiidyada asalka. Tani waxaa ka mid ah qaddarada muunadda ah oo ka kooban afar rasiidyo oo la soosaaray oo ah wadartan guud ee qaddarka USD 902,700.00.

Arrinta Faylka Lumay: Waxaa la oggaaday intii lagu guda jiray hannaanka baarista, faylka ay ku jireen rasiidyada taageeraya qaddarka kor lagu sheegay in la waayay. Tani waxay keentay in si ku meelgaar ah loo waayo diiwaannadan oo la siin lahaa kooxda baarista.

U-diyaar-garowga Baarista Mustaqbalka: Si looga hortago in ay dhacdooyin la mid ah ay mustaqbalka dhacaan, Waaxda Dakhliga waxay diyaarisay xalka looga gudbi lahaa arrintan. Dhammaan faylasha iyo dokumentiyada khuseeya waqti hore ayaa loo diyaarin doonnaa oo loo habeyn doonnaa hawl baaris kastoo qorsheysan. Tallaabadan waxaa loogu talagalay fududeynta hannaan baaris hufan oo si habsami la'aan ah u socda.

Waxaan ogsoonahay muhiimadda ay leedahay diiwaan-haynta aad looga fiirsado waxaanna naga go'an in aan joogteyno jaangooyada ugu sarreysa ee hab-dhaqannadeenna maaliyadeed. Faylka la helay waxaa uu ka marag-ka-cayaa dadaalkeenna ku aaddan dabagalka saxda ah iyo maareynta macaamulaadkeenna maaliyadeed.

Kala-soocidda Khaladka ah ee Rasiidyada: Waxaa la oggaadey in rasiidkan si sax ah

loogu diiwaangeliyay hoosta koodhka xisaabta Dekedda.

Tusaale Gaarka Ayaa La Tilmaamay: Tusaalaha xusidda mudan ee arrintan waa fawjarka rasiidka lambarkiisu yahay 22/00002940 RV. Rasiidkan gaarka ah, oo uu qaddarkiisa dhan yahay $400,000, waxaa si sax ah loogu diiwaangeliyay hoosta koodhka xisaabta dekedda laakiinse qaddarkan kama soo xaroon canshuurta guryaha.







**Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 3** | **Cinwaanka:** In aan la wada adeegsan Nidaamka Maareynta Dakhliga |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Kantarool muhiim ah oo lagu gaaro hannaanka habboon ee maareynta dakhliga waa hubinta in hannaanka dakhliga gebi ahaanba laga dhigo mid otomaatik ah iyada oo la adeegsanayo mashiin ama barnaamij (software) diiwaangeliya dakhliga oo soosaara rasiidyo waqtiga la joogo ah dakhliga la qabanayo ee baraha dakhli ururinta kaas oo ka-dib lagu xiriirin karo qaybaha BISAN RMS iyo BISAN FMIS

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Waxaan dib-u-eegnay rasiidyada dakhliga ee lagu diiwaangeliyay Bayaannada Maaliyadeed waxaanna oggaaney liidashooyinkan soo socda in ay jiraan:

**a) Adeegsiga Xaddidan ee Nidaamka BISAN RMS:** Waxaan aragney in dhammaan qaybaha canshuurta in aan lagu diiwaangelin nidaamka RMS. Gaar ahaan, sannad maaliyadeedkii 2022, keliya canshuuraha macaashka, shatiyada, canshuuraha mushaarka, ujuurrooyinka soo-degidda diyaaradaha, ujuurrooyinka rakaabka, canshuuraha furdadda/kastamka, iyo ujuurrooyinka guryaha ayaa lagu diiwaangeliyay. Si kastaba ha ahaatee, canshuuraha kale, ujuurrooyinka, iyo shatiyada uu waajibiyay Xeerka Dakhliga 2018, oo ay soo rogeen Dowlad-goboleedda ama Dowladda Hoose, laguma diiwaangelin gudaha nidaamka RMS. Waxaa intaa dheer, in qaybaha kala duwan ee la diiwaangeliyay, farqiyo in uu ka jiro kala duwanaanshaha ayaa la tilmaamay oo u dhaxeeya qaddarada la diiwaangeliyay sida ku cad nidaamyada RMS iyo BISAN FMIS, ee lagu faahfaahiyay **Lifaaqa 1aad.**

**b) Nidaamyada FMIS iyo BISAN RMS oo aan midaysnayn:** Waxaa intaa sii dheer, in aan aragney nidaamka RMS in uusan ku xirnayn nidaamka BISAN FMIS, taas oo carqaladeynaysa isku-xirnaanta aan laga maarmin ee u dhaxeysa baraha dakhli ururinta iyo barnaamijka (software-ka) xisaabaadka si loo helo diiwaangelin/daabicid wax-ku-ool ah.

**Waxyaabaha ka dhalan kara**

1. **Kala-duwanaansho U-dhaxeeya Xogta:** Kala duwanaanshaha u dhaxeeya qaddarada lagu diiwaangeliyay nidaamyada RMS iyo BISAN FMIS waxay keenayaan walaacyo ku saabsan saxnaanta xogta iyo hannaannada iswaafajinta. Kala duwanaanshahaasi wuxuu keeni karaa iswaafaqsanaan la'aan u dhaxeysa warbixinnada maaliyadeed, taas oo saameynaysa ku tiirsanaanta iyo aaminsanaanta macluumaadka maaliyadeed.
2. **Hufnaan La'aanta Hawlgallada:** Mideysnaan la'aanta nidaamyada RMS iyo BISAN FMIS waxay muujinaysaaa hufnaan la'aanta hawlgallada. Isdhexgal/isku-xirnaan aan kala go' lahayn oo ka dhaxeeyo barta dakhli ururinta iyo barnaamijka (software) xisaabaadka ayaa wuxuu muhiim u yahay xog wareejin sax ah oo hufan, taas oo yareynaysa khaladaadka iyo dib-u-dhacyada ku yimaada socodsiinta hawlaha maaliyadeed.
3. **Halisaha U-hoggaansamidda:** Ka-gaabinta diiwaangelinta dhammaan canshuuraha khuseeya, ujuurrooyinka, iyo shatiyada uu waajibiyay sharci-dejinta waxay keenaysaa halis u-hoggaansamid. Waxay keeni kartaa ganaaxyo u hoggaansamid la'aan, arrimo sharci, ama caqabado xilliga baarista sharciga ah.

**Muhiimadda**

Sare

**Soo-jeedimo:**

Dhammaan dakhliyada waa in lagu diiwaangeliyaa RMS oo ay ku jiraan lacagaha ay soo wareejiyaan DFS iyo Deeq-bixiyayaasha. Nidaamyada RMS iyo FMIS waa in si joogto la isu waafajiyaa. Waa in uu jiraa isdhexgalin aan kala go' lahayn oo u dhaxeeya nidaamyada RMS iyo FMIS

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

**Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ**:

Iswaafajinta Lagu Guuleystay ee Bisan FMIS: Waxaan ku guuleysanay in aan iswaafajino nidaamka Bisan FMIS iyo diiwaannadeena bankiga iyo rasiidyada dhabta ah. Tallaabadan waxay xaqiijinaysaa in diiwaannadeenna maaliyadeed ay yihiin kuwo sax ah oo waafaqsan halka aan maaliyad ahaan taaganahay ee dhabta ah.

Xaaladda Hadda ee Bisan RMS: Nidaamka Bisan RMS, wuxuu marxaladdan, diiwaangelinayaa macaamulaadka la xiriirra dhammaan Ilaha Dakhliga Gudaha. Si kastaba ha ahaatee, waa muhiim in la xusuusnaado nidaamka in uu si buuxda u yahay mid otomaatik ah.

Saadaasha Mustaqbalka – Isdhexgalin Dhammeystiran: Marka RMS si buuxda looga dhigo mid otomaatik ah, waxaan filaynaa in aan awoodi doonno in aan si buuxda isu waafajinno nidaamyada Bisan FMIS iyo Bisan RMS. Isdhexgalintan waxay si weyn u dardargelinaysaa ama u toosinaysaa maareynta maaliyadaheenna iyo dakhligeenna, taas oo bixinaysa aragtida saxda ah ee isku-xiran ee ladnaanta maaliyadeenna.

**Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**

Agaasimaha Dakhliga, Abriil 2024

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 4** | **Cinwaanka:** Liidashooyinka ka jira Garoonka Diyaaradaha iyo Dekedda Kismaayo |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Qeybta 9aad ee Sharciga Canshuurta wuxuu dhigayaa in rasiid rasmi ah ay bixiyaan saraakiisha canshuurta oo ku qoran taariikhda lacag-bixinta, magaca iyo lambarka sarkaalka qaadaya lacagaha, goobta lacagta lagu bixiyay, magaca iyo lambarka aqoonsiga canshuur-bixiyaha, qaddarka lacagta la bixiyay iyo mas'uuliyadda marka loo eego lacag-bixinta la bixinayo. Diiwaannada dhammaan canshuuraha la qaaday waa in loo hayaa qaabka ku cad habraacyada ay dhigayaan xeernidaamiyayaasha ay soosaartey Wasaaradda Maaliyadda.
Rasiidyada lacag-bixinta waa in ay baartaa MOFEDED si loo hubiyo in aaney jirin wax-isdabamarin iyo khiyaanno

iyo in la sameeyo sixitaan haddii ay dhacdo lacag-bixin aan habboonayn.

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Waxaan dib-u-eegnay rasiidyada dakhliga ee lagu diiwaangeliyay Bayaannada Maaliyadeed waxaanna oggaaney liidashooyinkan soo socda in ay jiraan:

A. Dakhliga la diiwaangeliyay ee ka soo xaroodey Dekadda Kismaayo ma lahan nidaamka otomaatiga ah ee SOMCAS

B. Maamulka Dekedda Kismaayo, markuu adeegyo u fidiyo markab, faahfaahinnada adeegyada ayaa waxaa iyadoo gacan la adeegsanayo lagu diiwaangeliyaa xaashida diiwanka markabka, kaas oo aan la cusboonaysiin ama kii ugu dambeeyay ahayn xilligii baarista oo aan meesha booqaney.

C. Markii aan sameynay su'aalo-weyddiin iyo dib-u-eegis ku saabsan hannaanka furdada Dekedda iyo Garoonka Diyaaradaha ee Kismaayo, hannaanka qoraalka alaabooyinka ay tahay in la canshuuro ayaa gacanta lagu sameeyaa; oo muujinaysa dib-u-dhac ku yimid hirgelinta nidaamka online-ka ah qoraalka alaabooyinka ay tahay in la canshuuro.

D. Hab-dhaqannada diiwaan-haynta oo aan ku filnayn ayaa lagu arkay Maamulka Dekadda. Xilligii lagu guda jiray qiimeynta goobta, Kooxda Baarista ayaa isku-dayday in ay xaqiijiso istaatistika gaadiidka Dekadda ee muhiimka ah ee 2022, oo ay ku jiraan tirinta maraakiibta iyo doomaha yaryar ee ku soo xirtay, iyo dhacdooyinka gudaha muddada dib-loo-eegay. Waxaa intaa dheer, in kooxdu ay codsatey diiwaannada kharashaadka hawlgallada marka loo eego dakhliga bil kasta. Nasiib-darose, diiwaannadan waa la heli waayay si dib u eegis loogu sameeyo maadaama Dekaddu aaney lahayn dokumentiyada la cayimay.

**Waxyaabaha ka dhalan kara**

Hab-dhaqannada dokumentiyada ee aan ku filnayn Maamulka Dekadda Kismaayo ayaa ka dhashey isbeddellada muuqda ee dakhliga la diiwaangeliyay intii lagu guda jiray muddadii dib loo eegay.

Adeegyada gacanta lagu sameeyo ee dakhliga iyo hawlgallada maraakiinta waxay halis ugu jiraan khaladaad ka dhasha diiwaangelinta xogta ee gacanta lagu qoro.

**Muhiimadda**

Sare

**Soo-jeedimo:**

In la sameeyo oo laga hirgeliyo borotakoollada diiwaan-haynta oo adag Maamulka Dekadda. Tani waa in ay ku jirtaa nidaam qaabeysan oo loogu talagalay diiwaangelinta istaatistika gaadiidka Dekadda, dhacdooyinka, kharashaadka hawlgallada, iyo dakhliga oo ku saleysan qaab nidaamsan oo joogto ah. Hawlwadeennada Maamulka Dekadda waa in loo fidiyaa tababbar iyo hagid ku saabsan hab-dhaqannada diiwaan-haynta wax-ku-oolka ah. Tani waxay xaqiijin doontaa in hawlwadeennada ay ku qallabeysan yihiin xirfadaha lagama maarmaanka u ah in si sax ah loo joogteeyo oo loo maareeyo dokumentiyada loo baahan yahay.

Sahaminta isticmaalka SOMCAS si loo fududeeyo diiwaan-hayn sax ah oo hufan. Tani waxaa ka mid noqon kara kayd-xogeedyo dijitaal ah ama nidaamyada maareynta ee ku habboon baahiyada hawlgallada Dekadda. Samee baaritaannada gudaha ama hubinnada u-hoggaansamidda oo muddo ka-dibba mar la sameeyo si loo xaqiijiyo raacidda habraacyada

diiwaan-haynta ee la sameeyay. Tani waxay gacan ka geysaneysaa aqoonsiga iyo sixidda khaladaad kasta ama dhimanaansho kastoo ku yimaada joogteynta iyo gacan ku haynta diiwaannada aasaasiga ah.

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

**Faallooyinkii ay ka bixisey DGJ**:

Waxaan si dhow ula shaqeyn doonnaa daneeyayaasha si loo xaqiijiyo in dhammaan liidashooyinka la xusay wax laga qabto sannad maaliyadeedka hadda gudahiisa.

Hirgelinta nidaamka SOMCAS ee DGJ wuxuu bilaaban doonnaa Jannaayo 2024, dhammaan dakhliyada ka soo xaroonaya dekadda iyo garoonka diyaaradaha waxaa lagu diiwaangelin doonnaa nidaamkan.

**Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**

Agaasimaha Dakhliga, Maajo 2024

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 5** | **Cinwaanka:** Daldaloollo ka jira Xarunta Dakhli Ururinta |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Xarunta Dakhli Ururinta (RCC) waa qayb hoos timaada Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) ee DGJ oo ku lug leh ururinta qaar ka mid ah dakhliyada gudaha ka soo xarooda sida Canshuuraha dakhliga ganacsiyada, canshuuraha guryaha, diiwaangelinta baabuurta, shatiyada darawalka, canshuuraha waddo-marista, iyo canshuuraha furdada – jaadka. Qaybta waxaa madax u ah maamulaha bankiga kaas oo hoostaga Agaasimaha Dakhliga – MOFED DGJ, iyo dhowr shaqaale; oo ka kooban saraakiisha cashuur bixiyaha iyo lacag-hayayaasha/khasnajiga.

Canshuuraha lagu diiwaangeliyay RMS sida canshuuraha dakhliga ganacsiyada, canshuur-bixiyaha wuxuu u sii gudbayaa lacag-hayaha (daaqadda lacag-bixinta) labaad, kaas oo ka-dib marka uu xaqiijiyo qaddarka lacagta ku diiwaangelinaya qaddarka lacagta qaybta BISAN RMS wuxuunna bixinayaa rasiidka RMS isaga oo la haraya hal nuqul. Canshuuraha aan weli lagu diiwaangelin RMS, rasiidka hore ee uu macmiilka siiyo lacag-hayaha 1aad ayaa had iyo heer ah kama dambeys.

Dhammaan lacagaha maalintii la ururiyo ayaa maalinta xigta bankiga la geeyaa ka-dib marka laga bixiyo khidmadaha ururinta ee shirkadda Smart technologies limited.

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Dib-u-eegistii aannu sameynay, waxaannu ku oggaaney daldaloolladan soo socda:

a. **Dokumentiyo Aan Ku Filnayn:** Dokumentiyada taageeraya dakhliga macaamulaadka oo aan ku filnayn, sida in aan lahayn ama dhammeystirnayn diiwaannada dakhli ururinta, rasiidyada, iyo dokumentiyada la xiriira, taas oo adkeynaysa in la xaqiijiyo saxnaanta iyo sharciyadda dakhliga

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 5** | **Cinwaanka:** Daldaloollo ka jira qaddarada Xarunta Dakhli |
|---|---|

Ururinta.

b. **Warbixinta iyo Diiwaangelinta oo Aan Ku Filnayn:** Diiwaangelinta macaamulaadka dakhliga oo dib-u-dhacay ama aan sax ahayn, kala-soocid khaldan oo aan habboonayn, ama ka gaabinta in la hab sax ah iyo waqtigii la rabay ah loo soo sheegi waayo dakhliga, taas oo warbixinta maaliyadeed u keenaysa caqabado iyo kala duwanaansho. Lama sameyn iswaafajinta maalinlaha ah ee u dhaxeysa wadarta guud ee lacagta cadaanka ah ee la ururiyay iyo rasiidyada taageerada maalinlaha ah iyo qaddarada bankiga lagu shubay. Waxaa intaa dheer, in aannu codsanay Bayaanka EVC ee lambarka rasmiga ah ee lacagaha lagu ururiyo si aan dib-u-eegis ugu sameyno, laakiinse lama bixin.

c. **Filnaansho La'aanta Karti-dhisidda iyo Tababbarka Shaqaalaha** La'aanta tababbar ama xirfad kobcin ku filan xubnaha shaqaalaha ku lugta leh dakhli ururinta, oo keenaysa khaladaadka, faham la'aanta habraacyada, ama filnaansho la'aanta maareynta hawlaha dakhliga la xiriira.

Waa muhiim in la saxo daldaloolladan maadaama ay si weyn u xoojinayso hawlgallada Xarumaha Dakhli Ururinta, u sii wanaajinayso isla-xisaabtanka, oo ayna u yareynayso wax isdabamarinnada maaliyadeed ee suuragalka ah ama khaladaadka maareynta dakhliga.

**Waxyaabaha ka dhalan kara**

Waa muhiim in arrimahan in si dhaqso ah wax looga qabto si loo taageero ku kalsoonaanta hannaanka dakhli ururinta, hubinta u hoggaansamidda xeer-nidaamyada, sii wanaajinta daahfurnaanta, iyo yareynta halista khaladaadka, khiyaannada, ama ku takrifalka maaliyadaha.

**Muhiimadda**

Sare

**Soo-jeedimo:**

MOFED waa in ay sameysaa hannaan loogu talagalay iswaafajinnada maalinlaha ah ee u dhaxeysa wadarta guud ee lacagta la ururiyay, rasiidyada taageeraya, iyo qaddarada bankiga lagu shubay. Hab-dhaqankan joogtada ah wuxuu hubinayaa saxnaanta wuxuunna si dhaqso ah u soosaarayaa kala duwanaanshaha.

Hubisaa in si adag loo raaco nidaamka bixinta iyo joogteynta dokumentiyada aasaasiga ah sida Bayaanka EVC ee lambarrada dakhli ururinta rasmiga ah. Sameysaa borotakoollo cad oo loogu talagalay gudbinta dokumentiyada marka la codsado.

Xoojisaa kantaroollada gudahe iyadoo sameynaysa habraacyo adag oo loogu talagalay xaqiijinta, diiwaangelinta iyo iswaafajinta macaamuladaha maaliyadeed. Tani waxaa ka mid ah kala-saaridda waajibaadyada, sameynta baaritaanno joogto ah, iyo dhaqangelinta isla-xisaabtanka.

Bixinta tababbar ballaaran oo loogu talagalay shaqaalaha ku lugta leh hanaannada dakhli ururinta. Baridda muhiimadda ay leedahay iswaafajinta maalinlaha ah, diiwaangelinta habboon, iyo u hoggaansamidda baratakoollada u-hoggaansamidda wanaagsan.

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 5** | **Cinwaanka:** Daldaloollo ka jira qaddarada Xarunta Dakhli |
|---|---|
| **Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:** | |
| **Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED – DGJ**:<br><br>Waxaa naga go'an sii wanaajinta habeysnaanta nidaamkeenna faylasha/galalka. Nuqullada rasiidyada macmiilka waxaa la waafajin doonnaa warqadaha kaashka bankiga lagu shubay waxaanna loo gelin doonnaa si nidaamsan oo fudud in la helo. | |
| **Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**<br><br>Agaasimaha Dakhliga, Juun 2024 | |

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 6** | **Cinwaanka:** Sii wanaajinta iswaafajinnada bankiyada |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Iyada oo la raacayo Xeerka PFM iyo gaar ahaan Xeer-nidaamiyaha 5_Iswaafaqsanaanta Kaashka iyo Bankiyada, 3.1.1 ayaa wuxuu Dhigayaa ,"Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda iyo xisaab banki kasta oo kale oo ay yeelaneyso Dowlad-goboleedka waa in la is-waafajiyaa sida wanaagsanna waa in is-waafajintaa la sameeyaa maalin kasta ama ugu yaraan toddobaadkiiba mar 2 maalmood gudahood marka uu dhammaado toddobaadka ayna is-waafajintaas sameeyso Waaxda Khasnadda, Wasaaradda Maaliyadda iyada oo la adeegsanayo nidaamka maareynta maaliyadda maamulka (FMIS). '3.1.2. Is-waafajin kasta waa in uu eegaa uu ugu dambeyntii ansaxiyaa mid ka mid ah saxiixayaasha loo oggol yahay xisaabta bankiga ama sarkaal sare oo loo magacaabay' "3.1.3. Is-waafajinta bankiga iyo dokumentiyada taageeraya waa in la hayaa si loogu adeegsado kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriira hantidhowrka, waana in la fayl-gareeyaa iyaga oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo daabacanba."

Qodobka 8.1. ee Buugga Habraacyada Maareynta Xisaabaha Bankiga, ayaa wuxuu Dhigyaa: "Bisha Disembar ee sanad walba, Unugga Maareynta Lacagta Caddaanka ah ayaa dib-u-eegis ku sameyn doona diiwaanka bankiga iyo dhammaan xisaabaha banki ee dowladda. Dib-u-eegista waxaa ay koobeysaa arrimahan muhiimka ah ee soo socda:

Habka xilgudashada ugu wanaagsan ee xisaabaadka ayaa u baahan in hay'adda lagu joogteeyo habraacyo kantarool maaliyadeed sax ah oo dhammeystiran. Mid ka mid ah kantaroolada noocaas ahi waa sameynta iswaafajinno banki oo u dhaxeeya Byaannada bankiga iyo buugga kaashka ee hay'adda si loo iftiimiyo khaladaad kasta.

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

A. Codsiga xaqiijinta sannadlaha ah ee loo diro bankiyada oo dhan lama sameyn
B. Waxaan oggaanay in aannu jirin wax caddeymo ah oo la soo bandhigay oo muujinaya in Waaxda Khasnadda ee hoos imaanaysa Wasaaradda Maaliyadda ay xaqiijinta sannadlaha ah ka sameysay bankiyada si loo xaqiijiyo in magacyada iyo lambarada xisaabta ee dhammaan xisaabaha bankiga ee diiwaangashan in ay ku qoran yihiin magaca Wasaaradda Maaliyadda.

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 6** | **Cinwaanka:** Sii wanaajinta iswaafajinnada bankiyada |
|---|---|

C. Iswaafajinnada bankiga oo muddo ka-dibba mar la sameeyo waa in la sameeyaa in ay gacan uga geystaan oggaanshaha hore ee khaladaadka iyo wax isdabamarinta macaamuladaha bankiga iyo kaashka. Tani lama sameyn.

D. Xirid la'aanta xisaabaha bankiga ee aan shaqeyn ee Wasaaradaha kala duwan ee DGJ.

**Waxyaabaha ka dhalan kara:**

Maqnaanshaha iswaafajinnada bankiga waxay kordhineysaa halista in khaladaadka iyo wax isdabamarinnada aan la oggaan. Sidoo kale la'aanta iswaafajinnada, bayaannada maaliyadeed ee DGJ MOFED waxaa loo arki karaa in ay yihiin kuwo khaladaad ku jira.

Ka-gaabinta in la shaaciyo dhammaan xisaabaha bankiga ee furan waxay kordhinaysaa halista in la yareeyo haraaga bankiga waxayna caqabad ku noqonaysaa in la iskala xisaabtamo dakhliyada muddadaasi ku soo xarooday. Sidaa daraadeed, tani waxay keeni kartaa khaladaad maaliyadeed oo ku jira qabashooyinka iyo lacag-bixinnada ay soo gudbinayso Dowlad-goboleedda.

**Muhiimadda**

Sare

**Soo-jeedimo:**

Waxaan ku talinaynaa:

Iswaafajinnada bankiga ee billaha ah waa in ay sameyso Waaxda Khasnadda, iswaafajinnada bankigana waa in uu Agaasimaha Dakhliga dib-u-eegaa si loo hubiyo in ay tahay mid sax ah oo dhammeystiran. Dib-u-eegista waa in la diiwaangeliyaa iyadoo ansaxintuna ay ka muuqato saxiixa dib-u-eegaha iyo taariikhda dib-u-eegista si loogu hoggaansamo Xeer-nidaamiyaha 5aad ee Xeerka PFM ee DGJ.

Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay xaqiijinnada faahfaahinta xisaabaha bankiga ugu dartaa sida qayb ka mid ah habraacyada dhammaadka sannadka iyadoo loo hoggaansamayo buugaagta habraaca.

Dhammaan xisaabaha bankiga ee aan dhaqdhaqaaqa lahayn muddo cayiman waa in dib loo eego oo laga eegaa hawlaha aan caadiga ahayn iyo gelidda aan la oggolayn ee xirtaanka.

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

**Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:**

**Ma Waafaqsanin;**

Annaga oo ka jawaabayna waxyaabihii la oggaadey ee ah in iswaafajinnada bankiga ee muddo ka-dibba mar la sameeyo aan la sameyn, waxaan jeclaan lahayn in aan muujinno in Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) ee DGJ in ay si hawlkarnimo ah u sameyso iswaafajinnada bankiga oo bille ah iyo mid maalinle ah oo ah qayb ka mid ah habraacyadeenna kantaroolka maaliyadeed ee jaango'an. Hannaanka iswaafajinta waxaa kor kala socda Waaxda Khasnadda, iyadoo ay ku lug leeyihiin saddex shaqaale oo hawshan si gaar ah loogu xilsaarey.

Waxaan si xushmad leh u diidnay waxyaabaha la oggaadey waxaanna aaminsanahay in habraacyadeenna jira ay u hoggaansameen

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 6** | **Cinwaanka:** Sii wanaajinta iswaafajinnada bankiyada |
|---|---|

shuruudaha nidaamiga/sharciga ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaan ogsoonahay muhiimadda ay leedahay horumarinta joogtada ah waxaanna qaadi doonnaa tallaabooyinka muhiimka ah ee lagu wanaajinayo hannaanadeenna, gaar ahaan meelaha Warqadda Maamulka lagu muujiyay.

**Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**

Waaxda Khasnadda

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 7** | **Cinwaanka:** Diiwaan-hayn iyo kaydin liita |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Waxay dhigayaan sannad maaliyadeedka dhammaadkiisa in buugaagta maaliyadaha, foomamka, iyo fawjarrada ay tahay in la qaado oo la dhigo meel ammaan ah oo laga heli karo si loogu adeegsado ujeeddooyinka baarista iyo hantidhowrka

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Ma jirin kayd lagu kaydin karo faylasha iyo diiwaannada sannadihii hore. Waxay ku rasteysnaayeen dhulka qolka faylasha. Qolka faylashanna kuma jirin diiwaan ay faylasha ku diiwaangashan yihiin. Faylal badan ayaa qolka laga saarey, dibna looma soo celin, qaar ka mid ah faylasha maqan waxay la xiriiraan kiisas uu baaritaan ku socdo. Sidoo kale, fawjarrada kharashaadka faylasha ku jira inta badan faylka ugu ma jiraan qaabka ay isugu xigxigaan taariikhda ama lambarrada, haddaba fawjarrada qaar lama raadraaci karin xitaa markay faylasha ku jiraan.

Waaxda Khasnadda qaansheegyada la ansaxiyay waxaa iyagoo xirmooyin aan nidaamsanayn ah la geliyaa faylal kala duwan, beddelkii faylasha loo gelin lahaa si habeysan. Sidoo kale, Wasaaradda ma haysato diiwaanka dhammaan qandaraasyada. Sidaa daraadeed suuragal ma ahayn in la raadraaco oo la helo qandaraasyo gaar ah.

**Waxyaabaha ka dhalan kara:**

Soo-saarid la'aanta fawjarrada muhiimka ah si loo baaro waxay soo-jiidi kartaa xadidaad iyo afeef, Qandaraaslayaasha waxay si khiyaanno ku dheehan u sheegan karaan lacag-bixinta laba jeer haddii fawjarka lacag-bixinta aan la raad-raaci karin.

**Muhiimadda:**

Dhexe

**Soo-jeedin:**

MOFED waa in ay diyaarisaa kayd si habboon loogu kaydin karo faylasha iyo dokumentiyada. Koodhka kaydka waa in uu nidaamiyaa gacan-ku-haynta faylasha si sannado loo ilaaliyo iyo xeer-nidaamyada

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 7** | **Cinwaanka:** Diiwaan-hayn iyo kaydin liita |
|---|---|
| xog gelinta iyo xog ka bixinta faylasha ku jira qolka dokumentiyada. Magacaabista Sarkaalka Kaydka ee wasaarad kasta iyadoo waajibaadyada shaqo dib laga sheegi doonno. | |
| **Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:** | |
| **Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:**<br><br>Waafaqsanahay. Dhisidda kayd xeer-nidaamyo habboon leh iyo Sarkaalka Kaydka waxay muhiim u tahay joogteynta diiwaannada maaliyadeed, hubinta raadraaca, iyo taageeridda hannaanada baarista. | |
| **Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**<br><br>Agaasimaha Waaxda Khasnadda 2024 | |

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 8** | **Cinwaanka:** Liidasho ka jirta habraacyada iyo maareynta deynta |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Qaybta 36 (1) Xeerka PFM ee 2017, "Miisaaniyadda Soo-jeedinta ah ee uu Wasiirka u soo bandhigey Baarlamaanka waa in ay ku jiraan Lifaaq sheegaya deymaha iyo damaanadaha lagu leeyahay maamulka/dowladda". Qaybta 38 (2) ee Xeerka PFM, "Wasiirku waa in uu soo saaraa dhabbe-tuseyaal, ka hadlaya shuruudaha la doonayo in laga soo baxo ee heshiisyada amaahaha". Sidoo kale, "Qaybta 42 (4) ee Xeerka PFM, wuxuu dhigayaa Wasiirku waa in uu hubiyaa in ay jirto istiraatiijiyad deymeed oo muddo kadibba wax laga beddelo lana baahiyo taas oo muujineysa faahfaahinta shuruudaha amaahaha iyo sidoo kale deymaha iyo damaanadaha ay dowladdu damaanad-qaadi karto waqti ka waqti".

Qaybta 41aad ee Xeer Maareynta Maamulka wuxuu dhigayaa **"**Ganacsiyada/wakaaladaha iyo hay'adaha maaliyadda ee dowladdu leedahay waxaa la doonayaa dhammaadka saddex bilood ee kasta, in ay Wasiirka u soo gudbiyaan warbixin faahfaahsan oo tilmaameysa amaahashadooda iyo sida ay deymaha isaga bixinayaan, oo ay ku jirto deymaha ay dowladdu damaannad-qaaddey, iyo sidoo kale deymaha dib loo habeeyay wixii kale ee kuwa alaabada iyo adeegyada in la siiyo ay sugayeen muddo ka badan 90 maalmood ka hor."

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Qaddarka aan wali la bixin ee amaahda gudaha ayaa kordhay muddo sannado ah min Usd.1,262,769 oo la soo sheegay sannadkii 2013 ilaa Usd.7,274,675 oo la soo sheegay sannadkii 2022. Tani waxay ka dhigan tahay koror dhan Usd.6,011,906 ama qiyaastii 83% muddo toban (10) sano

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 8** | **Cinwaanka:** Liidasho ka jirta habraacyada iyo maareynta deynta |
|---|---|

oo ah sida hoos ku qoran:

| | |
|---|---|
| Qaddarka Lacageed ee La Helay - 2013 | 1,262,769 |
| Qaddarka Lacageed ee La Helay - 2019 | 5,140,621 |
| Qaddarka Lacageed ee La Helay - 2021 | 7,368,585 |
| Qaddarka Lacageed ee La Helay - 2022 | 7,274,675 |
| **Qaddarka Lacageed ee La Helay** | **21,046,651** |

| **Dib-u-bixinnada** | |
|---|---|
| FY2014 | 70,000 |
| FY2015 | 483,108 |
| FY2016 | 353,141 |
| FY2017 | 152,521 |
| FY2018 | 106,590 |
| FY2019 | - |
| FY2020 | 1,436,670 |
| FY2021 | 3,363,419 |
| FY2022 | 6,631,814 |
| **Wadarta Dib-u-bixinnada** | **12,597,264** |
| **Baaqiga harsan** | **8,449,387** |

Intii aan dib u eegaynay deymaha, liidashooyinkan soo socda ayaa la arkay;

Ma jirto istiraatiijiyad deymeed oo si joogto ah loo cusboonaysiiyo lana baahiyo, taas oo faahfaahinaysa shuruudaha amaahaha cusub iyo sidoo kale deymaha iyo damaanadaha ay dowladdu damaanad-qaadi karto waqti ka waqti.

Ma jiro nidaam maaliyadeed oo deymaha lagu maareeyo.

Qoraalka 18 ee bayaannada maaliyadeed wuxuu sheegayaa deymo aan wali la bixin oo dhan **USD 8,449,387** kana kooban keenista alaabooyin iyo adeegyo loo qabtey Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya, lanama siinin liiska qaddarada kor ku xusan. Ma cadda waxa qaddarada lacageed loo adeegsaday. Ma jiraan faahfaahinnada koodhadhka miisaaniyadda saxda ah iyo sharaaxadahooda.

Wasaaradda Maaliyaddana ma diyaarin mana soo gudbin warbixin ku saabsan amaahaha, dib-u-bixinta deymaha, dib-u-dhigista, iyo baajinta deymaha ee loo dirayo Madaxweynaha iyo Baarlamaanka.

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 8** | **Cinwaanka:** Liidasho ka jirta habraacyada iyo maareynta deynta |
|---|---|

**Waxyaabaha ka dhalan kara:**

Filnaansho la'aanta iyo liidashooyinka ka jira habraacyada maareynta deynta waxay wax u dhimi karaan hubinta wax ka qabashada deymaha ee dowladda in loo maareeyo si taxaddar leh oo wax-ku-ool ah.

Sidaa daraaddeed, runnimada qaansheegyada aan wali la bixin ee lagu sheegay qoraalka 18aad ee bayaannada maaliyadeed lama xaqiijin karo. Tani waxay keeni kartaa khaladaad aan la oggaan waxaanna suuragal ah in lacag-bixinno aan sax ahayn la sameeyo.

Waxaa jirta in aan loo hoggaansamin Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM).

**Muhiimadda**

**Sare**

**Soo-jeedin:**

Waxaan ku talinaynaa Wasiirka in uu diyaariyo oo uu warbixin u gudbiyo Madaxweynaha iyo Baarlamaanka oo tilmaameysa amaahashooyinka cusub iyo bixinta damaannadaha, iyo sidoo kale faahfaahinnada dib-u-bixinnada deynta, dib-u-jadwaleyn, iyo baajinta. Waxaa intaa dheer, in Wasiirku diyaariyo oo uu dadweynaha u soo bandhigo warbixin faahfaahinaysa amaahaha dadweynaha ee aan wali la bixin iyo adeegga amaahda la saadaaliyay muddo dhexe.

Sidoo kale, waxaan ku talinaynaa Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya in ay hirgeliso nidaamyada habboon ee amaahyada lagu maareynayo. Tani waxay sii wanaajin doontaa diiwaan-haynta iyo xaqiijinta iswaafajinta amaahda ee joogtada ah,.

Faahfaahinnada amaahaha iyo dhaqdhaqaaqa ayaa lala socon karaa iyagoo la jadwaleynayo laakiinse dejinta miisaaniyadooda waa in loo sameeyaa si waafaqsan shaxda xisaabaha iyo lacag-bixinnada ee hadda jirta ee lagu diiwaangeliyay qaybta kharashaadka amaahda laga bixinayo. Tusaale ahaan haddii qayb amaah ah loo adeegsado in lagu bixiyo mushaaraadka damaannadaha iyadoo qaybta loo adeegsado keenista hantida markaa bayaannnada maaliyadeed, macaamulaad kasta waa in lagu diiwaangeliyaa koodhka saxda ah ee xisaabta.

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:

Inkastoo ay run tahay in aanan hadda haysan nidaam maaliyadeed gaar u ah maareynta amaahda, waxaan jeclaan lahayn in aan muujinno in aan wadaagnay liiska faahfaahsan ee qaansheegyada aan wali la bixin oo qaddarkoodu dhan yahay USD 8,449,387, sida lagu sheegay Qoraalka 18aad ee bayaannada maaliyadeed. Macluumaadkan waxaa la siiyay kooxda baarista si daahfurnaanta loo xaqiijiyo.

Waxaan caddeynaynaa muhiimadda ay leedahay maareynta deynta ee wax-ku-oolka ah waxaanna naga go'an in aan wax-ka-qabanno liidashooyinka la tilmaamey

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 8** | **Cinwaanka:** Liidasho ka jirta habraacyada iyo maareynta deynta |
|---|---|
| **Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**<br><br>**Cinwaanka:** Agaasimaha Waaxda Khasnadda 2023 | |

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 9** | **Cinwaanka:** In aanu jirin dokumentiyo taageeraya lacag-bixinnada |
|---|---|
| **Shuruudaha:**<br><br>Waxyaabaha ugu muhiimsan ee loo baahan yahay si loo hubiyo in la helo faylal maaliyadeed sax ah oo dhammeystiran waa siyaasado iyo habraacyo kantarool maaliyadeed oo taabogal ah. Kantarool maaliyadeed oo muhiim ah waa xaqiijinta in dhammaan lacag-bixinnada lagu taageero dokumentiyo ku filan sida qaansheeg, rasiidyo, heshiisyo, tigidyo, waraaqda koridda diyaaraha, warqadaha guddoonka alaabta, iwm.<br><br>**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**<br><br>Waxaa maqan dhowr fawjar oo kuwa lacag-bixinta ah iyo dokumentiyada taageeraya oo guud ahaan wadarta qiimahoodu dhan yahay **$ 2,737,150** sida lagu muujiyay **Lifaaqa 2aad.** Arrintan ayaa muujinaysa in fawjarrada lacag-bixinta iyo dokumentiyada taageeraya in aan khasnad ama meel ammaan ah oo la gaari karo la dhigin. | |
| **Waxyaabaha ka dhalan kara:**<br><br>Waxaa jirtay in Baaxadda Baarista ay ku Xaddidnayn ilaa xadka fawjarrada aan la soo bandhigin. Helitaan la'aanta dokumentiyada taageeraya waxay ka dhigan tahay suuragalnimada lacag-bixinta aan la oggolaan, khaladaad, tallaabo khiyaanno ama ku takrifalka maaliyadaha. | |
| **Saameynta Maaliyadeed: USD 2,737,150** | |
| **Muhiimadda**<br><br>**Sare** | |
| **Soo-jeedin:**<br><br>Maamulka sare ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxaa loo baahan yahay in ay saxaan hab-dhaqannada ka jira wasaaradda. Haddii qaansheegyadan aanan loogu soo bandhigin Baarista saddex bilood gudahooda, baarlamaanka waa in uu fiiro gaar ah u yeeshaa. Mustaqbalka haynta ammaanka ah iyo helidda dokumentiyada taageerada waa in la xaqiijiyaa illaa iyo inta baarista laga dhammeynayo. | |
| **Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:** | |
| **Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:**<br><br>**Ma Waafaqsanin/Waan Diidnay:** Waxaa dhammaan dokumentiyada taageerada u soo bandhignay kooxda baarista waxaanna gebi ahaanba diidanahay in dokumentiyada sidaa u qiimaha badan aanay lahayn dokumentiyo taageeraya. Waxaan aaminsanahay in xoogaa khaladaad yaryar ay ku jireen dokumentiyada qaarkood, khadaadkaasina waa la sixi doonnaa wixii hadda ka dambeeya. | |

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 9** | **Cinwaanka:** In aanu jirin dokumentiyo taageeraya lacag-bixinnada |
|---|---|
| Xaqiijinta haynta ammaanka ah iyo helitaanka dokumentiyada taageeraya waa muhiim. Waxaan ballan-qaadaynaa in aan ku saxno arrimaha la aqoonsaday wakhtiga la soo jeediyay gudahiisa. | |
| **Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda: Sarkaalka Waaxda Khasnadda 2024** | |

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 10** | **Cinwaanka:** Lacag-bixinno aan lahayn dokumentiyo taageeraya oo ku filan |
|---|---|
| **Shuruudaha:**<br><br>In la helo diiwaanno maaliyadeed sax ah waa hubinta in fawjarrada lacag-bixinta ay la socdaan dokumentiyo taageeraya oo ku habboon kuwaas oo ka mid noqon kara warqadda xawilaadda bankiga, qaansheegyada, warqadda koridda diyaaradaha, qandaraasyada iyo warqadaha guddoonka alaabta oo ku lifaaqan<br><br>**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**<br><br>Dokumentiyo taageeraya oo ku filan la'aantooda ayaa waxaan oggaanay lacag dhan **USD 3,742,005,** in si aan ku filnayn loo taageeray sida lagu muujiyay **Lifaaqa 3aad.** | |
| **Waxyaabaha ka dhalan kara:**<br><br>La'aanta dokumentiyo ku filan oo habboon oo loogu talagalay lacag-bixinta, waxaa jira khatarta khayaano iyo musuqmaasuq. Baaristu ma xaqiijin karto alaabooyinka iyo adeegyada lacagahooda la bixiyay in si dhab ah loo helay iyo in kantaroollada lacag-bixinta si habboon loo dhaqangeliyay. | |
| **Saameynta Maaliyadeed: USD 3,742,005** | |
| **Muhiimadda**<br><br>**Sare** | |
| **Soo-jeedin:**<br><br>Lacag-bixinnada waa in la ansaxiyaa iyadoo loo marayo khadadka awoodda ee wasaaradda gudaheeda ah, waa in ay jiraan dokumentiyo habboon oo ku filan oo loogu talagalay lacag-bixinta iyo baaritaananda dambe. | |
| **Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:** | |
| Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:<br><br>**Ma Waafaqsanin/Waan Diidnay:** Ma jirto wax lacag-bixin ah oo abid la bixiyay iyadoo aan soo marin hannaanka ansaxinta gacanta lagu sameeyo iyo midka elektarooniga ah, FMIS (nidaamka Bisan) ma oggolaado in hal adeegsade uu kaligiisa | |

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 10** | **Cinwaanka:** Lacag-bixinno aan lahayn dokumentiyo taageeraya oo ku filan |
|---|---|
| sameeyo hannaanka, waa in ay jiraan qof bilaaba (xogta geliya), ansaxin iyo daabacid loogu talagalay ballanqaadka, codsiga lacag-bixinta iyo lacag-bixinta. Waxaa sidoo kale jirta oggolaansho gacanta lagu sameeyo oo CPO ah iyo ansaxinta kama dambeysta ah ee jeegga. Waaxda Khasnadda waxaa si buuxda uga go'an hubinta in ay jiraan dokumentiyo habboon oo ku filan iyo in dhammaan kantaroolka gudaha la hirgeliyo. | |
| **Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:** Waaxda Khasnadda | |

| **Waxyaabihii la ogaadey lrº: 11** | **Cinwaanka:** Kala-soocidda qabashada iyo kharashaadka oo khaldan |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Qaybta 8.2 (a & d) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2017 wuxuu Dhigayaa: Dhammaan wax-is-dhaafsiyada maaliyadeed, dakhli iyo kharashaadba, waa in la qaabeeyaa lana kala soocaa iyada oo la adeegsanayo isla kala-sooca (baadi-sooca) loo adeegsado miisaaniyadda iyo xisaabaadkaba. Xeerarkan soo socda ayaana hagaya:

Marka ay ku habboon tahay, kala-soocidan waa in loo qaabeeyaa qaab ay la jaanqaadi karaan jaangooyooyinka caalamiga ah ee la-isla oggol yahay ee ay qeexeen xeer-nidaamiyeyaasha la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Xeerkan. Miisaaniyadda mideysan ama qoondeymaha dheeriga ah, kala-soocidda (baadi-soocyada) miisaaniyadda waxaa loo sameyn karaa kharashaadka sirta ah.

Kharashaadka iyo lacagaha kale ee la bixiyo waxaa loo kala soocayaa iyada oo lagu saleynayo qaybta maamul/hay'adeed ee ka mas'uulka ah bixintiisa, iyada oo loo qoondeynayo heerka hay'adda kharash-gareyneysa, waxaana loo sii kala sooci doonaa si waafaqsan kala-soocidda dhaqaale iyo kala-soocidda kale ee ay qeexi doonaan xeerarka hoos imaanaya Xeerkan.

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Markaan dib-u-eegnay rasiidyada la diiwaangeliyay iyo muunadda lacag-bixinnada loo doortay baarista, waxaan oggaanay dhowr xaaladood oo macaamulaadyo kala duwan oo si khalad ah loo kala-soocay.

Intii lagu guda jiray daraaseynteenna miiska baarista ee lacag-bixinnada la diiwaangeliyay ee loo xushay muunadda baarista, xaalado badan ayaa soo ifbaxay iyadoo macaamulaad kala duwan si khalad ah loo soocay oo lagu tilmaamay in ay Deymo yihiin.

**Waxyaabaha ka dhalan kara:**

Waxaa jirta halis ah in bayaannada maaliyadeed uu khalad ku jiro.

**Muhiimadda**

**Dhexe**

**Soo-jeedin:**

Maamulka waa in uu damaanaq-qaado kala-soocidda saxda ah ee macaamulaadka ee waafaqsan shaxda xisaabaha iyo dabeecadaha ay leeyihiin. Waa muhiim in si fiican loo baaro dhammaan

| |
|---|
| macaamulaadka sida khaladka ah loo soocay iyo in si dhaqso ah loo saxo diiwaannada. |
| **Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:** **Waafaqsanahay** |
| Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:<br><br>**Waafaqsanahay.** Kala-soocidda saxda ah waa muhiim, waxaanna ballanqaadeynaa in aan si degdeg ah u baarno oo aan u saxno macaamulaad kasta oo si khalad ah loo kala-soocay. |
| **Qofka ka mas'uulka ah:** Waaxda Khasnadda |
| **Taariikhda la qiyaasay in la dhammeynayo:** 2023 |

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 12** | **Cinwaanka:** Ka-gaabinta dokumentiyada taageerada in lagu shaabbadeeyo "LA BIXIYEY" |
|---|---|
| **Shuruudaha:**<br><br>Waxyaabaha ugu muhiimsan ee loo baahan yahay si loo hubiyo in la helo faylal maaliyadeed sax ah oo dhammeystiran waa siyaasado iyo habraacyo kantarool maaliyadeed oo taabogal ah. Kantarool maaliyadeed oo muhiim ah waa in la baajiyo dhammaan dokumentiyada taageeraya lacag-bixinta la bixiyay iyada oo lagu shaabadeynayo “LA BIXIYEY” si looga sooco ama saaro kharashaadka aan la bixin iyo si loo yareeyo suuragalnimada lacag-bixinnada in dhowr jeer la bixiyo iyada oo lagu saleynayo isla dokumentiyada.<br><br>**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**<br><br>Waxaan oggaanay in fawjarrada lacag-bixinta kharashaadka iyo dokumentiyada la xiriira midkoodna in aan lagu shaabadeyn "La Bixiyay" ka-dib markii lacag-bixintooda la dhammeeyay. | |
| **Waxyaabaha ka dhalan kara:**<br><br>Hab-dhaqanka jira wuxuu fududeeyaa in wax isdabamarin lagu sameeyo kheyraadka dadweynaha. | |
| **Muhiimadda**<br><br>**Dhexe** | |
| **Soo-jeedimo:**<br><br>Soosaar borotakool waajibinaya in lagu shaabadeeyo "La Bixiyay" fawjarrada lacag-bixinta kharashaadka iyo dokumentiyada la xiriira isla-markiiba ka-dib marka lacag-bixinnada la bixiyo. Hab-dhaqankan wuxuu u adeegayaa sida tilmaame muujinaya macaamulaadka la dhammeeyay, xaqiijinta qeexnaanshaha iyo yarenta halista lacag-bixinno khaladaad ku jira | |

| |
|---|
| ama in lacag-bixinnada laba mar la bixiyo. |
| **Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:** |
| **Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:**<br><br>**Waafaqsanahay. Soosaaridda iyo bilaabidda borotakoolka ku shaabadeynta "LA BIXIYAY" ee fawjarrada lacag-bixinnada kharashaadka korkooda ah waa hab-dhaqan wanaagsan, oo aan hirgelin doonno si aan u sii wanaajinno kantaroollada maaliyadeed.**<br><br>**Faallooyinka Guud.** |
| **Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**<br><br>Agaasimaha Waaxda Khasnadda 2024 |

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 13** | **Cinwaanka:** U hoggaansamid la'aanta Xeer-nidaamiyaha Wax-soo-iibsiga Dowladda |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Qaybta 4aad ee buugga siyaasadda wax-soo-iibsiga waxaa uu dhigayaa dhabbetusayaasha lagu dabaqi karo soo-iibsiga alaabooyinka, shaqooyinka, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn ee la bixiyay iyo/ama ay maalgeliso Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) oo ay ka mid yihiin maaliyadaha ay bixiyaan Deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah ee laga baraandego iyada oo loo marayo Xisaabta Midaysan ee Waaxda Khasnadda ee DGJ.

Waxay dhigaysaa hababka wax-soo-iibsiga ee soo socda;

Qandaraas qiime sheegid lagu tartamo leh – u baahan xayaysiin furan oo caalami ah. Wax xaddidaad ah lama bixin. Hababka kale; waa in lagu adeegsadaa halka qandaraaska lagu tartamo uusan noqon habka wax-soo-iibsiga ugu hufan ee dhaqaale ahaanna ugu habboon sida hoos ku cad;
Tartanka qandaraaska ee xaddidan; ee leh casumaad toos ah oo aan lahayn xayaysiin furan. Wax xaddidaad ah lama bixin.
Habka adeegashada ee loogu talagalay alaabooyinka iyo adeegyada ku kacaya lacag dhan USD $10,000 ama ka yar - u baahan ugu yaraan saddex (3) qiimo sheeg.
Ka-helidda Hal Meel oo Keliya ee loogu talagalay alaabooyinka iyo adeegyada ku kacaya lacag dhan USD $1,000 ama ka yar.

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Waxaan oggaaney liidashooyinkan soo socda in ay ka jiraan hannaanka wax-soo-iibsiga:

- Ka-gaabinta in la bixiyo dokumentiyada qandaraaska si loogu sameeyo dib-u-eegista baarista
- Wax-soo-iibsi aan caadi ahayn iyo isticmaalka hab-dhaqanno wax-soo-iibsi aan lagu tartamin
- Ku xadgudubka habka wax-soo-iibsiga qiimaha-hooseeya
- Wasaaradda Maaliyadda gacanta kuma hayso liiska shirkadaha ama kuwa wax laga soo iibsado ee ka soo baxay shuruudaha Hore ee laga rabo qandaraaslayaasha

Siyaasadda ma lahan dhabbetusayaasha loogu talagalay qandaraaska lagu tartamo ee loogu talagalay iibka alaabooyinka iyo adeegyada ka badan USD 10,000.

**Waxyaabaha ka dhalan kara:**

La'aanta habraacyada wax-soo-iibsiga lagu tartamo waxay keenaysaa halis ah in DGJ aysan xaqiijin in la helo qiimaha ugu badan ee lacagta canshuur-bixiyayaasha iyo deeq-bixiyayaasha. Ilduufka wuxuu yareynayaa suuragalnimada helitaanka natiijooyinka ugu faa'iidada badan marka la eego qiimaha iyo wax-ku-oolnimada kharashka.

**Muhiimadda**

**Sare**

**Soo-jeedimo:**

Si loo helo qiimaha ugu fiican ee abaal-marinnada qandaraaska, Maamulka Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in uu dhaqangeliyaa hab-dhaqannada wax-soo-iibsiga lagu tartamo ee loogu talagalay alaabooyinka iyo adeegyada. Waa in si taxaddar leh ay u hayaan dokumentiyada taageerada ee muujinaya habraacyadan iyo go'aamada wax-soo-iibsiga

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 13** | **Cinwaanka:** U hoggaansamid la'aanta Xeer-nidaamiyaha Wax-soo-iibsiga Dowladda |
|---|---|

ku xiga. Tani waxay xaqiijinaysaa daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka hannaanka wax-soo-iibsiga.

Wax-ka-qabashada liidashooyinkan waa muhiim si loo xaqiijiyo daah-furnaanta, u hoggaansamidda xeer-nidaamyada, hab-dhaqannada anshaxa ee wax-soo-iibsiga, iyo adeegsiga hufan ee maaliyadaha dadweynaha. Hirgelinta habraacyada wax-soo-iibsiga oo adag, dokumentiyada, iyo hababka turxaan-bixinta kuwa alaabada iyo adeegyada laga soo iibsado waxay yareyn karaan halisahan waxayna sii wanaajin karaan isla-xisaabtanka.

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

**Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:**

- Hirgelinta soojeedimadan waxay gacan ka geysan doonnaan xoojinta hannaanka wax-soo-iibsiga iyo sii wanaajinta daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, iyo hufnaanta ee maareynta maaliyadaha dowladda.
- - Waxaan leenahay xadidaad loogu talagalay habka adeegashada iyo habka ka-helidda hal meel wax kasta oo ka badan habka adeegashada 10,000 ah waxaa loo tixgeliyaa in uu yahay hab lagu tartamo.
- - Waa run in aan leenahay xaalado shirkado gaar ah oo keliya la adeegsaday taasina waxaa sabab u ah arrimo amniga la xiriirra ama mararka qaarkood shirkadda halka meel laga helay ayaa ah shirkadda kaliya ee bixin karta adeegaasi.
- - Marka la eego arrimaha ka soo baxidda shuruudaha Hore ee laga rabo qandaraaslayaasha, waxaan haynaa liiska shirkadaha ama kuwa wax laga soo iibsado ee ka soo baxay shuruudaha Hore ee laga rabo qandaraaslayaasha.
- - Wasaaradda waxay Diiwaangelin doontaa sababaha fiican iyo ansaxinta dhammaan xaaladaha shirkadda halka meel laga helay, iyadoo la raacayo buugga habraaca iyo Siyaasadda Wax-soo-iibsiga DGJ. Tani waxay gacan ka geysanaysaa xaqiijinta in shuruudaha shirkadaha lagu dooranayo in si cad loo qeexo oo looga soo baxo.

**Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**

Agaasimaha Waaxda Wax-soo-iibsiga Disembar 2024

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 14** | Liidashooyin ka jira maareynta hantida iyo Hannaanka Maareynta Hantida |
|---|---|

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 14** | Liidashooyin ka jira maareynta hantida iyo Hannaanka Maareynta Hantida |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Qodobka 3.3 ee xeer-nidaamiyaha 9aad (Siyaasadda Hantida Raasamaalka ah) ee Xeerka PFM ee 2017 oo Dhigaya "Wasaaradda Maaliyadda waa in ay maamushaa Diiwaanka Dhexe ee Hantida Raasamaalka ah ee guud ahaan dowladda, kaas oo ay tahay in uu maamulo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda. Hay'adaha waxaa ay goonidooda u lahaan karaan Diiwaanka Hantida Raasamaalka ah oo iyaga u gaar ah si ay ugu adeegsadaan maareynta hantida ee hay'adda dhexdeeda, hase-yeeshee, diiwaanka dhexe ee ay maamusho Wasaaradda Maaliyadda ayaa ah diiwaanka rasmiga ah ee dowladda waxaana guud ahaan hantidhowrka iyo waxbixinnada hantida raasamaalka ah loo fiirinayaa diiwaanka goobta dhexe laga maamulo."

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Wax diiwaan ah lagama hayo hantida raasumaalka ah ee la soo iibiyay sannadkii 2022.

Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya (DGJ) ma lahayn nidaamka maamul hantida oo shaqeynaya sannadkii 2022 arrintanna sidan ayay ahayd dib-u-eegistii baarista 2021.

Diiwaanka hantida lama helin intii ay baaristu socotay.

**Waxyaabaha ka dhalan kara:**

Haddii aan jirin diiwaanka hantida la soo iibiyay, Dowladda waxay halis ugu jirtaa in ay lumiso gawaarida, kombiyuutarada, qalabka, hantida kale. Kantaroollo iyo diiwaanno la'aanta ayaa saamixi kara gawaarida in lagu qoro magacyo gaar ah ama hantida in ay sheegtaan shakhsiyaad.

La'aanta diiwaannada hantida, mid aan suuragal ahayn ayay noqon kartaa in la xaqiijiyo in hantida la soo iibiyay in dhab ahaantii la keenay iyo in ay iminka ay adeegsaneyso Dowladda.

**Muhiimadda**

**Sare**

**Soo-jeedimo:**

Waxaan ku talinaynaa in la sameeyo sharci ama xeer lagama maarmaan ka dhigaya joogteynta diiwaanka hantida oo ay yeelaneyso Hay'ad Dowladeed kasta. Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay ku amarto dhammaan Hay'adaha Dowladda in ay magacaabaan sarkaal u qaabilsan gacan ku haynta diiwaannada hantida iyo in la sameeyo xaqiijin muddo ka-dibba mar lagu sameeyo hantida hadda jirta iyo xaaladooda. Doorka saraakiisha Wasaaradda Maaliyadda waa in laga dhigaa un la-socosho, isuduwid iyo kormeer beddelkii xog ururinta. Waa in ay sidoo kale fududeeyaan iswaafajinta xaqiijinta Hantida Dhabta ah, iyadoo la raacayo xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha (PFM) ee 2017.

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 14** | Liidashooyin ka jira maareynta hantida iyo Hannaanka Maareynta Hantida |
|---|---|

**Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:**

MOFED - DGJ waxay fahamsan tahay muhiimadda ay leedahay joogteynta Diiwaanka Hantida Raasumaalka ah ee dhexe waxayna oggoshahay baahida loo qabo nidaam Sharciyeysan in uu ka jiro Hay'ad Dowladeed kasta. Haseyeeshee, iyadoo sabab u ah caqabado maaliyadeed, ayaa waxaan awoodi weynay in aan qoondeyno maaliyado ku filan hirgelinta iyo gacan ku haynta nidaamkaasi. Soo-jeedinta in sarkaal loo magacaabo gacan ku haynta diiwaanka hantida iyo xaqiijinta muddo ka-dibba mar la sameeyo waa mid ansax ah.

**Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**

Agaasimaha wax-soo-iibsiga

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 15** | Daldaloollo ka jira Waajibaadka Shaqo ee Hantidhowka Gudaha |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Iyadoo la raacayo qaybta 34 (1) ee Xeerka PFM ee 2017, Waaxda hantidhowka (baarista) gudaha waxay ugu dambeyn mas'uul ka tahay in ay in ay muddo ka dibba dib-u-eegto maareynta maaliyadda ee hay'adda ama unugga sidoo kale in ay daraaseeyso sida loo raacayo dhammaan habraacyada iyo geeddi-socodyada maareynta maaliyadda iyo sidoo kale in ay qiimeyso sida ay dad ugu filan yihiin baaritaannada iyo is-dheellitirka (checks and balances), iyo kantaroolka, ee hab-dhaqannada maareynta maaliyadeed ee ay leeyihiin hay'adda ama unugga; iyo ee ku qoran Xeerkan, xeer- nidaamiyayaashiisa iyo tilmaamaha (amarrada) uu soo saaro Wasiirka.

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Dib-u-eegista qaybta Hantidhowrka (Baarista) Gudaha ayaa daaha ka qaaday cillado muuqdo kuwaas oo aragtideenna ahaan saameyn xun ku yeellan kara waajibaadka Hantidhowka (Baarista) Gudaha. Tusaale ahaan;

A. Lama soosaarin wax warbixinno hantidhowka (baarista) gudaha ah
B. Qaybta Hantidhowka (Baarista) Gudaha waxaa ka shaqeynayay oo kaliya laba shaqaale kuwaas oo aan si weyn ugu filnayn aragtida inta ay le'eg tahay iyo qoondeynta miisaaniyadda Wasaaraddan
C. La'aanta qorshe-hawleedka Waaxda Hantidhowka (Baarista) Gudaha ee sannadkii 2022
D. Ka-gaabinta Waaxda Hantidhowrka Gudaha in ay Diiwaanka Khatarta u diyaariso Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED)

**Waxyaabaha ka dhalan kara:**

Iyadoo ay sabab u yihiin liidashooyinka kor lagu xusay, wax qorshe-hawleed ah looma sameyn hantidhowka (baarista) gudaha

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 15** | Daldaloollo ka jira Waajibaadka Shaqo ee Hantidhowka Gudaha |
|---|---|

Sidaa daraadeed, cidna ma qiimeynaynin wax-ku-oolnimada iyo ama la'aanta kantaroollada gudaha ee Wasaaradda. Maaliyadaha dowladda ayaa laga yaabaa in si khalad ah loo adeegsado iyo/ama in lagu takrifalo.

**Muhiimadda**

**Dhexe**

**Soo-jeedimo:**

Waaxda Hantidhowka (Baarista) Gudaha waa in ay xaqiijisaa in warbixinnada hantidhowr/baarista la diyaariyo oo si joogto ah loo soosaaro. Warbixinnadan waxay muhiim u yihiin qiimeynta ladnaanta maaliyadeed iyo hufnaanta hawlgallada Wasaaradda.

Waxaan ku talineynaa kordhinta tirada shaqaalaha qaybtan si loo hubiyo in shaqooyinka baarista loo qabto si ku filan. Hantidhowrka (barista) gudaha waa in uu mudnaan siiyaa diyaarinta Diiwaanka Halista ah ee Wasaaradda Maaliyadda.

Qorshe-hawleedka sannadlaha ah waa in la diyaariyaa, qorshahan waa in uu muujiyaa hawlaha baarista la sameeyay, waqtiyadooda, iyo kheyraadyada loo baahan yahay.

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

**Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:**

Waaxda hantidhowrka (barista) gudaha waxay qorshe hawleedkeeda la wadaagtey kooxda baarista. Inkastoo markii hore ay shaqaalaha ku yareeyeen, waaxda waxay hadda u shaqeysaa si buuxda, waxaanna la filayaa in sannad maaliyadeedka 2023, dhammaan arrimaha la tilmaamey ee la xiriira waxyaabihii lagu oggaadey baarista gudaha in wax laga qaban doonno oo la sixi doonna.

**Qofka ka mas'uulka ah:**

Agaasimaha waaxda hantidhowka (baarista) gudaha

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 16** | **Cinwaanka:** Dib-u-dhaca hirgelinta soo-jeedimada baaristii sannadkii hore |
|---|---|

**Shuruudaha:**

Habka xilgudashada ugu wanaagsan wuxuu u baahan yahay in marka baarista la soo gebbogabeeyo, maamulka Hay'adda in uu qaadi doonno mas'uuliyadda lagu wanaajinayo nidaamka kantaroolka gudaha, sidaa daraadeedna waxaa laga hortagayaa in ay dhacdooyin la mid ah ay dhacaan mustaqbalka.

**Sharraxaadda waxyaabihii la ogaadey**

Waxaa la oggaadey markii loo kuura-galey in inta badan soo-jeedimadii baarista ee la muujiyay ee muddada baarista dhammaatey 31-ka Disembar, 2022, in aanan la hirgelin. Kaliya la (2) marka la eego sideed-iyo-toban (18) ka mid ah soo-jeedimada baaristii sannadkii hore ayaa si buuxda wax looga qabtey oo la xiray.

Fadlan u noqo "La-socoshada Soo-jeedimada Baaristii Hore" ee ku taalla Qaybta 3.0.

**Waxyaabaha ka dhalan kara:**

DGJ waxay laga yaabaa in aysan ka faa'iidin soo-jeedimada baarista oo ah qalab wax-ku-ool u ah korjoogteynta iyo sii wanaajinta waxqabadka hawlgallada.

| **Waxyaabihii la ogaadey lr°: 16** | **Cinwaanka:** Dib-u-dhaca hirgelinta soo-jeedimada baaristii sannadkii hore |
|---|---|

**Muhiimadda**

**Dhexe**

**Soo-jeedin:**

Waxaan ku talinaynaa DGJ, gaar ahaan Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED), hubinta xalka ballaaran ee dhammaan liidashooyinka la aqoonsadey ee lagu muujiyay baarista. Tani ayaa la fulin doonnaa iyadoo lagu saleynayo soo-jeedimada la bixiyay ama iyadoo la hirgelinayo tallaabooyinka kantaroolka beddelka ah ee sida wax-ku-ool ah u saxaya liidashooyinkan.

**Waafaqsanahay/ Ma Waafaqsanin:**

**Faallooyinkii ay ka bixisey MOFED - DGJ:**

MOFED-DGJ ayaa ka faallootey. Waxaan ognahay qiimaha ay leedahay in si dhaqso ah loo dhaqangeliyo soo-jeedimada hantidhowrka iyo ogaanshaha meelaha weli shaqada u baahan. Soo-jeedimada hantidhowrka ee harsan ayaa waxaa la siin doonaa mudnaan sare, waxaanna wax looga qaban doonnaa sida ku habboon.

**Cidda ka mas'uulka ah iyo taariikhda:**

Agaasimaha Guud

2024

## 3 LA-SOCOSHADA/DABAGALKA WAXYAABIHII LAGU OGGAADAY BAARITAANKII HORE

Xaaladda hoose waa xaaladda soo-jeedimadii baaritaanka ee la xiriira bayaanka maaliyadeed ee sannadkii dhammaaday bisha Disembar 2022.

| Wadarta Guud ee Tirada Soo-jeedimadii Sannadkii Hore | La Hirgeliyay | Qayb Ahaan La Hirgeliyay | Aan La Hirgelin |
|---|---|---|---|
| 18 | 2 | 5 | 11 |

| Lr. | Cinwaanka Waxyaabihii la Ogaadey | Soo-jeedimo | Xaaladda |
|---|---|---|---|
| 1 | Kala duwanaanshiyo aan la iswaafajin oo u dhaxeeya Bayaannada Maaliyadeed ee la saxiixay iyo baaqiga diiwaanka | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay had iyo jeer iswaafajisaa xisaabaha Diiwaanka ee kala duwan ka hor inta aysan diyaarin Bayaannada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee Dowladda iyo iswaafajinta kala duwanaansho kasta ee soo ifbaxaya waqti ku filan si loo damaannad qaado saxnaanta macluumaadka ku jira bayaannada maaliyadeed iyo si looga fogaado khaladaadka la taaban karo. | La Hirgeliyay. |
| 2 | Liidashooyin ka jira hannaanka diiwaangelinta iyo maareynta dakhliga | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay xaqiijisaa in dhammaan dakhliga si sax ah loogu taageero nuqullada asalka ah ee rasiidyada dakhliga ee DGJ. Waxaa intaa dheer, in dhammaan dakhliga ururiyay ay tahay in la waafajiyo buugaagta rasiidka iyo bankiga.<br>Dhammaan diiwaangelinnada buugaagta la geliyo ee marxaladaha kala duwan ee meertooyinka dakhliga iyo xisaabaadka waa in lagu saleeyaa tixraacyo gaar ah oo laga soo qaatay dokumentiyada habboon ee lagu adeegsaday marxaladaha kala duwan. Canshuur qaadayaasha waa in ay adeegsadaan lambarka tixraaca ee uu soo saaro hannaanka (system) ka dibna waa in ay ku daraan kooxda rasiidyada gaarka ah ee isku noqonaya qaddarka guud ee lacagta bankiga lagu shubey maalintii. Fawjarrada rasiidka loo yeelay lambarrada taxanaha ah ee loogu talogalay dakhli ururinta ka sokow, buugaagtan rasiidka waa in la soo saaro iyaga oo raacaya tiro xisaabeed isku xigxigta si loo sii wanaajiyo la-xisaabtamka.<br><br>Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay hubisaa dakhliga la diiwaangeliyay in la waafajiyo diiwaannada diiwaangelinta kale ee ay gacanta ku hayaan hay'adaha kala duwan sida Wasaaradda Qorsheynta | Qayb ahaan la hirgeliyay. |
| 3 | In Aan La Wada Adeegsan Nidaamka | Hannaanada dakhli ururinta waa in si buuxda loogu dhafo ama loo dhexgeliyo hannaanada xisaabaadka. | Qayb ahaan la hirgeliyay. |

| Lr. | Cinwaanka Waxyaabihii la Ogaadey | Soo-jeedimo | Xaaladda |
|---|---|---|---|
| | Maareynta Dakhliga | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay xaqiijisaa in hannaanka BISAN RMS si buuxda loo adeegsado iyo in la waafajiyo qaddarada lagu diiwaangeliyay hannaanka BISAN FMIS. Waxaa intaa dheer, in Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ay tixgeliso isku xirka labada qaybood ee BISAN. | |
| 4 | Liidashooyin ka jira Dekedda Kismaayo | Baarista dokumentiyada taageerada oo ay sameyso MOFED si loo hubiyo in aysan jirin wax-isdabamarin iyo khiyaanno, Waxqabadyada dekedda in laga dhigo kuwa si otomaatik ah u shaqeeya sida mugga ganacsiga, socodka markaaiibkta marka la eego tirada maraakiibta, doomaha yaryar iyo tanka shixnadaha si loo sii wanaajiyo dakhli ururin waafaqsan daabacidda canshuurta furdada. Tababar ama karti dhisid loogu talagalay kooxda kastamka. SOMSAD waa in si buuxda loo adeegsado si loo sii wanaajiyo qoridda alaabooyinka la canshuurayo iyadoo laga guurayo foomamka gacanta lagu qoro ee waqtiga beerdareeya loona guurayo nidaamka casriga ah ee diiwaangelinaya alaabooyinka la canshuurayo ee SOMSAD ee lagu taliyay. | Lama hirgelinin. |
| 5 | Daldaloollo ka jira qaddarada Xarunta Dakhli | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay xaqiijisaa shaxo ay ku qoran yihiin qiimaha go'an ee canshuurta oo taageeraya iyo qaansheegadka laga qaaday macaamiisha in la diiwaangeliyo oo lagu lifaaqo rasiidyada macaamiisha.<br><br>Sarkaal aan ku lug lahayn dakhli ururinta waa in uu si joogto ah oo maalinle ama toddobaadle ah u sameeyaa iswaafajinta dakhliga la ururiyay iyo lacagaha bankiga la geeyay. Iswaafajinta waa in ay dib-u-eegaan saraakiil sarsare iyada oo dib-u-eegistaasina qoraal lagu muujinayo.<br>Wasaaradda Maliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay sidoo kale tixgelisaa in ay ku dhigto khasnadda lacagaha caddaanka ah iyo sidoo kale in ay diyaariso tilmaamo ku saabsan tirada lacagaha ugu badan ee kaash ahaan xarunta loogu bixin karo.<br>Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay xaqiijisaa in diiwaan hayn habboon uu ka jiro xarunta RCC. Nuqulka rasiidyada macmiilka waa in ay u ekaadaan rasiidyada RMS iyo warqadaha bankiga ee ay isku midka yihiin waanna in fayl loo geliyaa sida ay isugu xigxigaan si ay u fududaato in dib loo helo. | Lama hirgelinin. |
| 6 | Daldaloollo ka jira in Wakiillada Dakhli Ururinta ay ka Wada-shaqeeyaan Hannaanka Dakhli Ururinta | Wasaaradda Maaliyada iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay xaqiijisaa dakhli ururintu in ay sameeyaan hawlwadeennada Waaxda Dakhliga. Haddii ay dhacdo in hannaanka dakhli ururinta ay ku lug yeeshaan adeeg-bixiyeyaal dibedda ka ah wasaaradda, hab lagu tartamo oo habboon, qiimeyn iyo u-kuurgelid waa in la sameeyaa oo la diiwaangeliyaa. | Qayb ahaan la hirgeliyay. |

| Lr. | Cinwaanka Waxyaabihii la Ogaadey | Soo-jeedimo | |
|---|---|---|---|
| | | Dakhliyada gudaha laga soo uruuriyay waa in iyagga oo kaamil ah si dhakhso ah bankiga loo geeyaa isla markaana loo aqoonsadaa in uu yahay dakhliga Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) - DGJ. Khidmado ururinta kasta ee adeeg bixiyayaasha waa in ka-dib qaansheegadkooda si gaar ah loo soo gudbiyaa oo kharashaad ahaan loogu aqoonsadaa Bayaannada Maaliyadeed.<br>Qandaraasyada lala galo wakaaladaha dakhli ururinta ee ay Dowladdu magacaawdo waa in loo faylgareeyaa qaab si fudud lagu heli karo, la hayaa caddaynta anisixinta magacaabista ee Wasiirka Maaliyadda isla markaana si ku filan loo soo turxaan bixiyaa. Qandaraasyada noocasi ah waa in lagu bixiyaa iyadoo la adeegsanayo hannaan lagu tartamo isla markaana waa in si fudud loo heli karaa si dib-u-eegis loogu sameeyo. | |
| 7 | Sii wanaajinta habraacyada Iswaafajinta Bankiyada | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay xaqiijiso u hoggaansamida diyaarinta iswaafajinnada bankiga ee sida toddobaadlaha ah loo sameeyo. Taa beddelkeeda, waxay tixgelin kartaa in ay dib-ugu-noqoto oo ay naqtiimiso Buugga Habraacyada Deeqaha si ay u diyaariso iswaafajinta bankiga oo bille ah halkii ay si toddobaadle ah u diyaarin lahayd.<br><br>Dhammaan xisaabaha bankiga ee aan dhaqdhaqaaqa lahayn muddo cayiman waa in dib loo eego oo laga eegaa hawlaha aan caadiga ahayn iyo gelidda aan la oggolayn ee xirtaanka.<br><br>In Bayaamada iswaafajinta bankiga loo diyaariyo, loo eego oo loo ansixiyo si waafaqsan shuruudaha Xeer-nidaamiyaha 5aad ee Xeerka PFM. Caddaynta dib-u-eegista iyo ansaxinta waa in lagu muujiyaa sida ay u muuqato iswaafajinta bankiga. Tani waxaa ka mid ah sheegidda taariikhda iyo jagooyinka dib-u-eegayaasha iyo ansixiyeyaasha.<br><br>Hubi in kantaroollo ku filan maareynta bankiga in ay jiraan iyo in dhammaan xisaabaha bankiga ee la shaaciyay in ay muujiyaan daahfurnaan. | La Hirgeliyay. |
| 8 | Codsiga xaqiijinta sannadlaha ah ee loo diro bankiyada oo dhan lama sameyn | MOFED waa in ay faahfaahinnada xaqiijinnada xisaabaadka bankiyada ay ka dhigto qayb ka mid ah habraacyada sannadka- dhammaadkiisa ee waafaqsan buuggaagta habraaca. | Qayb ahaan la hirgeliyay. |

| Lr. | Cinwaanka Waxyaabihii la Ogaadey | Soo-jeedimo | Xaaladda |
|---|---|---|---|
| 9 | Dhabbetusayaasha Xisaabaadka iyo Maaliyadda oo Aan Dad Ku Filnayn | Maamulka Wasaaradda Maaliyadda waa in uu wax ka beddelaa siyaasadaha maaliyadda iyo xisaabaadka iyada oo lagu darayo dhabbetusayaasha ka maqan waanna in la ansixiyo si loo adeegsado. | Lama hirgelinin. |
| 10 | Liidasho ka jirta habraacyada iyo maareynta deynta | Wasiirka waa in uu diyaariyaa oo warbixin u gudbiyaa Madaxweynaha iyo Baarlamaanka oo tilmaameysa amaahashooyinka cusub iyo bixinta damaannadaha, iyo sidoo kale dib-u-bixinnada deynta, dib-u-jadwaleyn iyo baajinta. Waa intaa dheer in Wasiirka ay tahay in uu diyaariyo oo uu daabaco warbixin ku saabsan deynta dowladda lagu leeyahay iyo sidoo kale saadaasha deyn bixinta lagu bixinayo muddada-dhexe. Waxaan ku talineynaa in, Dowlad-goboleedka Jubaland ee Soomaaliya ay xaqiijiso hannaanada habboon ee maamulka deymaha in la dhaqangeliyo si loo wanaajiyo diiwaan-haynta wanaagsan iyo in la sameeyo iswaafajinta joogtada ah ee deynta. | Lama hirgelinin. |
| 11 | In aanu jirin dokumentiyo taageeraya lacag-bixinnada | Wasaaradda waa in ay xaqiijisaa in dokumentiyo taageeraya oo ku filan in la hayo si loo caddeeyo in dhammaan adeegyada ama alaabada la bixiyay, sidaa daraadeedna kharashaadka la xiriira waxay u qalmaan in lagu daro Bayaannada Maaliyadeed. Waa in aan wax lacag ah la bixin iyadoon lahayn dokumentiyo ku filan oo taageeraya. | Lama hirgelinin. |
| 12 | Lacag-bixinno aan lahayn dokumentiyo taageeraya oo ku filan | Wasaaradda waa in ay xaqiijisaa in aan wax lacag ah la bixin iyadoon lahayn dokumentiyo ku filan oo taageeraya. | Lama hirgelinin. |
| 13 | Kala-soocidda qabashada iyo kharashaadka oo khaldan | Maamulka waa in uu xaqiijiyaa macaamulaadka in si sax ah loo kala sooco iyada oo la raacayo shaxda xisaabaha laguna saleynayo dabcigooda. Waa in ay baaraan dhammaan macaamulaadka sida khaldan loo kala soocay ka-dibna waa in ay u gudbiyaan diiwaannada guud (joornaalada) ee sixitaanka. | Lama hirgelinin. |
| 14 | Ka-gaabinta in lagu shaabadeeyo dokumentiyo “LA BIXIYAY” | Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MOFED) waa in ay hubiso in macaamulaadka isla goobta uu ka dhacay lagu geliyo barnaamijka (software) xisaabaadka | Lama hirgelinin. |
| 15 | Liidashooyinka geeddi-socodka wax-soo-iibsiga | Si loo hubiyo in qiimaha lacagta la helo marka la bixinayo qandaraasyada, Maamulka DGJ MOFED waa in ay xaqiijiyaan in hannaan lagu tartamo in la adeegsado marka la soo iibsanayo alaabo iyo adeegyo iyo in ay hayaan dokumentiyada taageeraya | Lama hirgelinin. |

| Lr. | Cinwaanka Waxyaabihii la Ogaadey | Soo-jeedimo | Xaaladda |
|---|---|---|---|
| | | si ay ugu muujiyaan habraacyadan iyo go'aamada wax-soo-iibsiga ee la qaatey. Si loo hubiyo in la helo qiimaha lacagta marka la bixinayo qandaraasyada, Maamulka Wasaaradda Maaliyadda ee DGJ waa in uu hubiyaa in geeddi-socodka lagu tartamo la adeegsado marka la soo iibsanayo alaabooyin iyo adeegyo iyo in la helo dokumentiyo taageeraya si loo muujiyo habraacyadaas iyo go'aamada wax-soo-iibsiga ee la gaarey. | |
| 16 | Liidashooyin ka jira maareynta hantida iyo Hannaanka Maareynta Hantida | Waxaan ku talinaynaa in DGJ ay isticmaasho Nidaamka Maareynta Hantida si loo hubiyo in hantida la diiwaangeliyo iyadoo lala diiwaangelinayo dhammaan macluumaadka muhiimka ah, lagu calaamadiyo lambar gaar ah, iyo in la iswaafajiyo alaabta dhabta ah iyo diiwaannada xisaabaadka iyadoo la raacayo xeerka PFM ee 2017. Dowladda waa in ay hubisaa saxnaanta macluumaadka iyo xogta lagu diiwaangeliyay Nidaamka Maareynta Hantida iyadoo la xaqiijinayo in lambarrada sumadda ah iyo lambarrada taxanaha ah ee ku qoran hantida in la waafajiyo kuwa ku jira Nidaamka Maareynta Hantida. | Lama hirgelinin. |
| 17 | Daldaloollo ka jira Waajibaadka Shaqo ee Hantidhowka Gudaha | DGJ waa in ay xaqiijisaa shaqada hantidhowka (baarista) gudaha in ay noqoto hawlgallo wax-ku-ool ah iyo baarayaasha gudaha in ay shaqeeyaan oo ay baaristooda u sameeyaan si madax-bannaan iyo in ay warbixintooda gaarsiiyaan wasiirka maaliyadda, sidoo kale hantidhowka (baarista) gudaha waa in ay qorsheeyaan baarista dhammaan goobaha halistooda sarreyso ee la tilmaamay. | Lama hirgelinin. |
| 18 | Dib-u-dhaca hirgelinta soo-jeedimadii baaristii sannadkii hore | Waxaan ku talinaynaa DGJ iyo gaar ahaan Wasaaradda Maaliyadda (MOFED) in ay xaqiijiso in dhammaan liidashooyinka lagu muujiyay baarista in wax laga qabto iyadoo lagu saleynayo soo-jeedinta la bixiyay ama tallaabooyinka kale ee ka hortagga ee si lagu qanci karo wax uga qabanayo liidashada. | Qayb ahaan la hirgeliyay. |

# 4 LIFAAQYADA

## LIFAAQA 1AAD:

# XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBALAND EE SOOMAALIYA


KISMAAYO JUBALAND SOOMAALIYA

Ibrahim.mohamed@Jubbalandoag.so